CULUUMTA MAANSA AQOONTA IYO U ABTIRINTA MAANSADA



Siciid Maxamuud Gahayr "Hargeysaawi"

1. Gogoldhig 4

2. Hordhac....14

3. Afka Soomaaliga 20

4. Qeexidda Suugaanta 26

4.2 Hana qaadkii Maansada Soomaaliyeed 37

4.3 Ujeeddooyinka Maansada Loo sameeyo....41

4.6 Hummaageynta (Af-Maldaha Maansada) ... **Error! Bookmark not defined.**

4.6.2 Miisaanka Maansada....79

4.6.1.2 Aragtida Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir" ee Aabbaha miisaanka maansada.... 82

4.6.1.3 Aragtida Abwaan Gaarriye ee Aabbaha miisaanka maansada ..84

4.6.1.4 Qabashadii Doodda iyo Garsoorkii Guddiga....86

4.6.2. Miisaanka Maansada ee Carraale....90

4.7.2. Geeraar 98

4.7.3. Jiiftada 106

4.7.18 Badda Salsalka....154

4.7.19 Badda Hees Carruureedda 156

4.7.20 Badda Hayaayda....158

4.7.29 Badda waraabka....160

4.7.21.1 Miisaanka Badda Waraabka....162

4.7.22 Badda Dikriga 162

5.7.29 Badda Dabahuwanta 163

4.7.24 Badda Mooyaha 165

4.7.24.1 Miisaanka Badda Mooyaha 167

4.7.25 Badda Biitada 167

4.7.25.1 Miisaanka Badda Biitada 169

4.7.26 Badda Geeljiraha....170

4.7.26.1 Miisaanka Badda Geel-jiraha 170
4.7.27 Badda Lixleyda.....170
4.7.27.1 Miisaanka Badda Lixleyda 172
4.7.28 Badda Daaqsinta 172
4.7.29 Badda Jiibta.....173
4. Isbarbardhiga tayada labada miisaan ee Gaarriye iyo Carraale 174
4.8.1. Xagga u adeegsiga qaybaha maansada 175
4.8.2. Xagga dhaxal reebidda.....176
4.8.3. Isku badalka Badaha Maansada 177
5. Waa Maxay Heesuhu? 179
5.1. Haddaba heesuhu baddee ayay galaan? 179
6. Waa kuma Qoraaga Buuggu? 184
7. Raad-Raaca Buugga (Bibliography) 186

Gogoldhig

Buuggan Culuumta maansada ka hor intii aan la daabicin, waxa akhriyey Abwaanno iyo Qoraayo suugaanta iyo maansada aqoon badan u leh. Abwaannadaas iyo Qoraayadaas buugga akhriyey, waxa ay bixiyeen aragtiyahooda ku aaddan buugga, kelmadihii ay aragtiyahooda ku cabbireenna waa kuwan:

"Marka hore aan idhaahdo Siciid Maxamuud Gahayr waa wiil aad u da'yar, ujeeddooyinka buuggani xambaarsan yahay aad bay uga da'weyn tahay isaga. Waxaan horta Siciid ku hambalyeynayaa sida uu ugu dhiirraday in uu nolosha wax ku soo kordhiyo iyo in uu qoraalkiisa ku bilaabo hantida ummadda iyo baadidoonkeeda ku saabsan suugaanta ay Soomaalidu leedahay, taasoo runtii ah ujeeddo aad u culus.

Waxaan odhan karaa ujeeddadaas uu Siciid abbaaray waa ku dhac geesinimo leh. Siciid baabka suugaanta iyo dedaalkiisa wuu u talo badsaday, waayeel iyo wax-garad ayuu la tashaday oo ku yidhi "wax igu biiriya", talo badsigaasna Siciid kumuu khasaarin, waxa Siciid taa u barbar taal, wuxuu faaqiday Miisaanka Maansada oo isna maanta faaqidaaddiisu badka taal, waxaan Siciid u rejaynayaa in uu helo fursad uu ku sii kordhiyo dedaalkiisa.

Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi"
Abwaan weyn, Mufakar, Aqoonyahan ku xeeldheer arrimaha bulshada, dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida.

"Markaan akhriyey buuggan la magac baxay "*CULUUMTA MAANSADA*" oo uu qoray qoraa da'yar oo la yidhaa "*Siciid Maxamuud Gahayr*" oo aan odhan karo waxa uu mudan yahay in lagu daydo,oo uu misaal fiican u yahay dhammaan dhallinta afka Soomaaliga ku hadasha gaar ahaan xerta suugaanta.

Mar kale waxaan odhan karaa waxa uu gutay qayb ka mida xil ka saarnaa afkiisa hooyo iyo suugaanta Soomaaliyeedba. Waayo,

waddan waliba waxa uu ku tamariyaa ama ku jabaa hadba siday dhallintu uga shaqayso afkooda, dhaqankooda iyo waliba diintooda.

Waxaad ka arkaysaa baydadkan soo socda in dhallintu tahay laf dhabarta ummadda:

“Hadduu geed engago xaabadaa, laga idlaystaaye
Dadkana odaygu goortuu ka tago, iyo islaantiisu
Ubadkooda hadha baa tabcoo, aayatiin hela e” (Xaaji Af-Qallooc)

Haddaba haddaan u soo noqdo buugga iyo waxa ku duugan

Horta buuggan Culuumta Maansada waxa uu xanbaarsan yahay qaybo badan oo mihiim ku ah suugaaanta Soomaalida oo mug balaadhan una qalma magaca uu sito buuggani.

Markaa waxaan ku baraarujinayaa bulshada guud ahaan, gaar ahaana da’yarta inay akhriyaan buuggan, iyana ay gutaan waajibka ka saaran afkooda iyo suugaantooda xiisaha badan.

Waxaan kusoo koobayaa hadalka in uu jiro qoraa da’yar oo keenay ama ururiyey wax mudan kudayasho .Wa salaamu calaykum”.

Maxamed Xaashi Dhamac “Gaarriye”
Abwaan weyn, Mufakar Cilmi-baadhe ah, Bare Sare (Professor) Saynis iyo Suugaaneed, Daahfuraha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

“Bismillaahi Raxmaani Raxiim
Waxa aan akhriyey buugga Culuumta Maansada ee uu diyaar gareeyey Saciid Maxamuud Gahayr. Buugga kani waa mid marka horeba lagu qeexayo waxa ay suugaani tahay iyo qaybeheeda kala duwan. Hal-Duggaal iyo Hal-duleed, Hal-ladaad iyo Hal-shidaad, Suugaan dhab ah iyo suugaan la dhoobdhoobay ama Suugaan la dhaxlay iyo suugaan laga dhalaaliyey maskaxda , waa qaybaha uu qoraagu ku aroorinayo dhalashada suugaanta. Sida ay u farcanto ama laamaha ay u kala qaybsantaa waa; maanso, hal-xidhaale, Riwaayad, maahmaah, odhaah, sheeko, ciyaar-dhaqameed, hal-qabsi, hal ku dhig iyo hal-kula-bax. Waa saddex iyo toban laamood oo mid kastaaba sii farcanto. Qoraagu wuxu halkan ku faahfaahiyey laanta koowaad ee ah maanso. Iyada qudheedu waxa ay u kala baxday 29 laamood oo uu ku ladhay tilmaamo qeexaya iyo tusaaleyaal kaabaya.

Buuggani waa buuggii koowaad ama qormadii koowaad ee intii aan arkay ugu waafisanaa ka hadalka maansada. Wuxu qoraagu meel keli ah isugu soo ururiyey culuum suugaaneed oo aan hore sidiisa oo kale meel loogu soo koobin. Sidaasi darteed wuxu buuggani noqon doonaa marjic ama diiwaan had iyo jeer loola noqdo culuumta suugaanta, gaar ahaan qaybta maansada ee uu ku fogaaday.

Buuggan culuumta maansadu waa qoraalkii koowaad ee Siciid Maxamuud Gahayr jirtoo la moodo farsamo uu ku faro-yaraystay qoraa ruug-caddaa ah oo leh sannaddo badan oo waayo-aragnimo ah. Taasi waxa ay ku bushaaraynaysaa in uu saaxada qoraalka iyo hal-abuurka ee Geeska Afrika ku soo biiray hal-abuur wacdarihiisa wataa".
Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir"
Hal-Abuur, Abwaan, Qoraa, Aqoonyahan ku xeel-dheer suugaanta.

"Waa run oo ummaddeenu waa dad hadalku u fudud yahay, warka iyo waayaheedana isugu sheegta hadal (oral society), dhaqan iyo falaadna uma laha qoraal, haddii la tiriyo inta buug ee Af-Soomaali lagu qorayna waa la koobi karaa.

Haddaba muddooyinkan dambe waxa bidhaamaya ifafaale ah in la qalleynaayo wixii inaga tagay ee wax qorid la'aana, dhalinyarada hadda waxbaratay taag ay lahaataba, waxay u qaashaarteen in ay dhaxal reebaan oo uu qof waliba hidiyo karaankii wixii uu qori karo.

Waxaan hoomayey buug magaciisu yahay "Culuumta Maansada" oo uu qoray wiil barbaar ah oo la yidhaahdo Siciid Maxamuud Gahayr "Hargeysaawi'. Haddii aan cabbaar hilaadiyey waxa ay ila noqotay in la hambalyeeyo buugga iyo qoraagaba, sababtoo ah waxa la yidhi:

"*Nin la yimi dedaalkiis*
Anigaa wax ugu dara". Hadraawi

Haddii aan hoos ugu dhaadhaco nuxurka buugga. Buuggan mawaadiic badan oo kala fog ayaa la isugu keenay kaas oo uu kaga duwanaan karo buugaagtii hore loo daabacay.

Waxa aan filayaa in uu faa'iido badan u yeelan doono dhallinyarada iyo guud ahaan akhristeyaasha, isagoo sida abla ablaynta maansada Soomaalida gaar ahaan miisaanka maansada oo lagu kulmiyay laba dariiq oo kala jaad ah, oo ay kala jideeyeen Prof Carraale iyo Prof Gaarriye.

Dhanka kalena waxa ii muuqata in qoruhu wakhti badan ku bixiyay buuggan, kana fakaray in uu ku ururiyo mawaadiic badan. Buuggani waa qaan-gaadh,

Gees kale haddaan milicsado, waxaan ku xasuusinayaa in buuggani yahay, buuggii koowaad ee qoruhu isku dubariday, runtii waxaan leeyahay "waa bilaw wacan iyo saadaal ka muuqata hibada uu leeyahay qoruhu".

Guntii iyo gebagebadii, dadka waxaan u soo jeedin lahaa in ay akhriyaan buuggan, iyo kuwa kale ee aqoontooda bili kara. Wabilaahi tawfiiq".
Axmed Aw-Geeddi Muxumed (Dheeraad)
Hal-Abuur dhaqan-yaqaan ah, kuna xeel-dheer suugaanta.

"Akhristeyaal waxa aan halkan ku soo gudbinayaa aragtidayda aan ka qabo buuggan cusub ee la yidhaahdo "Culuumta Maansada", oo qiimo wayn ugu fadhiya kala barashada suugaanta oo u kala baxda qaybo badan, oo mid waliba ay leedahay bado u gaar ah, taas oo qoraagu aad isugu taxalujiyay xeerarka ay suugaantu kala leedahay, oo dad badani aanay kala sheegi karin gabay, geeraar, iyo guuroow sida ay u kala duwan yihiin.

Waxa kale oo uu buuggani xambaarsan yahay miisaanka maansada oo muddo lagu murmi jiray cidda u horraysay ee bilawday, miisaanka maansada oo laba professor kolba mid lagu sheegi jiray oo aad buugga kaga bogan doontaan, labada professor oo kala ah:

1. Professor Cabdilaahi Diiriye Guuleed (Carraale) iyo
2.Professor Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye".

Halkan ayaad ku arki doontaa mid walba miisaankiisa maansada. Taas oo qoraaga buuggani si fiican u kala qeexayo, oo aan filayo in aad akhristeyaal aad uga faa'iidaysan doonaan jiilka soo kacaya iyo dadka wax allifaaba.

Sidaas daraadeed inkasta oo uu qoraagu ku cusub yahay qoraanimada iyo soo saaridda buugaagta, haddana waxa aan filayaa in aad ka heli doontaan waxyaabo muhiim ah oo dadka ka qarsoonaa, qoraagana ay u noqon doonto hilin toosan iyo ku dhiiranaan hadafkiisa ah si uu uga midho-dhaliyo ujeeddadiisa.

Waxa kale oo aad buuugan ku arki doontaan xilliyadii la soo maray iyo suugaantii la da'da ahayd illaa xilligii gumaysiga illaa maanta.

Qoraagu waxa uu buuggan ku xusayaa suugaan-yahanno badan oo kala xilliyo duwan, inkasta oo aanu qoraal ku wada muujin, waxa uu u soo qaadanayaa uun tusaale ahaan, ee ma aha kuwaas oo qudha ayaa abwaanno ahaa ee waa tusaale, waayo haddii la is yidhaahdo wada xusa waxa ay qaadan lahayd buugga badhkiisa, taasina ma ay yeelateen dhadhan manay dhamaystirmeen.

Waxa aan qoraaga ku hambalyaynayaa sida uu isugu taxalujiyay culuumta maansada iyo miisaanka maansada, iyadoo professor-adii miisaanka bilaabay ba ay joogaan xog wanaagsanna uu ka hayo".
Muxumed Cali Aw Jaamac "Masmas"
Hal-Abuur ku caanbaxay samaynta iyo kaydinta suugaanta.

"Buuggan Culuumta Maansadu waa buug ay u baahnaayeen dhammaan inta xiiseysa suugaanta ee weliba door bidaysa bal inay si waangsan u fahmaan baddaha kala duwan ee ay suugaanta Soomaalida kala gasho. Inta iyada qudheedu doonaysa inay hal-abuur noqoto khasab ayay ku tahay inay buuggan akhristaan. Inta rabta inay cilmi baadhis rasmiya ku samayso suugaanta Soomaalida iyaguna waxay ka heli doonaan "xog" fara-badan. Inta iyagu intaa midna rabin inay noqdaan laakiin ay dani ka hayso fahamka guud ee suugaanta Soomaalidu aad bay ula dhici doonaan.

Waa buug loo baahnaa oo aan hore meeshiisii loo buuxin. Waxaan aad ula dhacay Qoraaga buuggan Siciid Maxamuud Gahayr oo runtii dedaal aad u farabadan, dhabar-adeyg, iyo halgan dheer u galay inuu buuggan soo saaro. Siciid oo qudhiisu ah Abwaan da' yarta soo koreysa ku jira horena ugu guuleystay tartan suugaaneed dhowr ah ayaa fahmay dhinacii banaanaa ee ahaa inaan si wanaagsan hore loo lafa-gurin baddaha faraha badan ee Maansada suugaanta Soomaalidu ay ka soo kala jeeddo. Buuggan waa mid wacdaro ku soo kordhin doona Suugaanta Soomaalida guud ahaan, aadna waa looga heli doonaa.

Qof kastoo xiiseeya Suugaanta, ama doonaya inuu bal xiisaahaa laftigiisa raadiyona ku noqonaysa inuu buuggani noqdo mid uu haysto. Hadda maaha inuu akhriyo keliya, ee inuu dhigto gurigiisa si markuu dhameeyo uu kolba dib ugu noqdo oo u kula hufo baddaha ay Culuunta Maansadu ka soo kala jeeddo".

Jamaal Cali Xuseen
Abwaan, Hal-abuur, Qoraa, iyo Aqoonyahan Weyn
Gudoomiyaha Baanka Maraykanka ee Citibank qaybtiisa Tansaaniya, Bariga Afrika

"Waxaan jeclahay in aan si kooban oo guud-mar ah halkan aan ugu soo gudbiyo weedhayda qiimaynta ah ee aan ugu talo-galay in aan wax kaga iftiimiyo qiimaha, qaayaha iyo nuxurka wax-ku-oolka ah ee Buugani xambaarsanyahay.

Marka hore waxaan si weyn ugu mahad-celinayaa qoraaga buugga Siciid Maxamuud Gahayr, oo runtii muujiyey dedaal ay ku dheehan tahay xilkasnimo iyo hal-abuurnimo uu u huray in uu ummadda u soo gudbiyo buuggan uu ku soo min-guuriyey kala barashada qaybaha kala duwan ee badaha Maansadu u kala baddo iyo waliba qayb kasta waxa ay xambaarsantahay ee ay ka turjumayso.

Haddii aan intaa ka soo gudbo, oo aan u imaaddo kelmaddayda aan ugu talo-galay in aan ka bixiyo buuggan la magac-baxcay "CULUUMTA MAANSADA." Waxaan ka eegayaa oo aan iska

taagayaa dhawr dhinac oo mid kastaaba faaii'dooyink gaarka ah leeyahay, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

1- Waxa uu buuggani fure u yahay kala barashada qaybaha kala duwan ee Badaha Maansooyinka, oo runtii aad u fara badan, dadka inta taqaanaana ay iska yartay marka laga yimaaddo dadka Hal-abuurrada ah.

2- Waxa uu macallin ama bare u noqonayaan jiilalka soo kacaya ee aaney u kala soocnayn bad-weynta suugaantu.

3- Waxa uu kaalin laxaad leh ka gelayaa ilaalinta iyo weelaynta lagama maar maanka ah ee ay u baahantay Suugaanta Somalidu ee aad moodo in ay sii dhalan-rogmayso.

4- Waxa uu buugani si fiican u kala saarayaa dhammaan Badaha Maansooyinka godadkooda, miisaankooda, Shuruudahooda iyo qaababka loogu luuqeeyo.

5- Waxa uu si hufan u soo bandhigayaa hannaanka uu u shaqeeyo miisaanka Maansada Soomaalidu, ciddii ugu horaysay ee heshay iyo natiijadii ka soo baxday doodiihii laga naqay murankii ka taagnaa miisaanka Maansada.
Gees kasta oo laga eegaba buuggani waxa uu ku qalabaysan yahay macluumaad miisaan leh oo kala saaraya, isla markaana sharxaya waxa ay kala yihiin Badaha Maansadu iyo sababaha loo sameeyo.

Anigu shaqsi ahaan waxaan buuggan ku qiimaynayaa barihii iyo weeliyihii Badaha Maansooyinka Soomaalida, waana hanti ay calafsan doonaan wax-na ka faa'idaysan doonaan in badan oo baahi u qabta barashada Sugaanta, in badan oo u jeelan wax-ka-ogaanshaha qayabaha kala duwan ee Maansadu ka kooban tahay iyo diriiqooyinka u gaarka ah ee mid kasta goonideeda loogu adeegsado.

Sidaa darteed, waxaan ku boorinayaa cid kasta oo danaynaysa in ay hal-abuur noqoto, cid kasta oo baahi u qabta kala barashada Badaha Maansada iyo cid kasta oo jecel in ay fahamto nuxurada ku duugan

Badaha Maansada inay Buugan fiiro gaar ah u lahaato, kana dhigato saaxiib gaar ah Buuggan.
Waxaan si gaar ah ugu baraarujinayaa dadka da'yarta ah ee aan aqoonta fiican u lahayn Badaha Maansada in ay xooga saaraan sidii ay u guntan lahaayeen macluumaadka wax-ku-oolka ah ee Buuggani xambaarsanyahay.
Cabdishakuur Xaaji Muxumed Muuse "Heersare"
Tifatiraha mareegta Oodweynenews, Qoraa, Aqoonyahan Dhalinyaro ah.

"Waxa aan akhriyay buugga uu magaciisu yahay "Culuumta Maansada" ee uu qoray Siciid Maxamuud Gahayr "Hargeysaawi", kadibna faalladan kooban ayaan buugga ka qoray aniga oo xoogga saaray sidii aan u caddayn lahaa waxyaabaha uu buuggani soo kordhinayo, isla markaasna uu kaga duwanaan karo buugaagtii laga qoray mawduuca Maansada ee hore loo daabacay, waxaanan aragtidayda ku aaddan buuggan ku salaynayaa dhawr qodob oo kala ah:

1.**Kulminta Mawduucyada Kala Geddisan Ee Maansada**

Buugaagtii hore looga qori jiray mawduuca maansadu, waxa ay ahaayeen qaar inta badan xoogga saara si waafi hana u lafagura mawduuc ka mid ah mawduucyada maansada, sida: ujeeddada maansada loo tiriyo, miisaanka maansada IWM, laakiin buuggan Culuumta Maansadu waxa uu si qotodheer ugu gondodaadagay inta ugu badan ee mawduuc maanso ee buug qudha lagu kulmiyo, isaga oo buuggani cilmi waafi ah ka qoray qeexidda iyo shardiyada Maansada, Maansada iyo doorka ay kaga jirto taariikhda, hanaqaadkii Maansada, miisaanka Maansada, Maansada iyo adeegsiga dareennada, humaagaynta ama af-maldaha maansada, iyo badaha maansada.

Sidaas daraadeed buuggani waxa uu noqonayaa mid lagu tilmaamo karo Iftiimiyihii cilmiga Maansada, aqoonsidihii iyo u-abtiriyaha Maansada, waana buug hage u noqon doona dad badan oo ka mid ah

dadka doonaya in ay bartaan, ama ay wax ka qoraan Culuumta Maansada.

2.**Badaha Maansada iyo Magac-bixintooda**

Qoraha Buuggu waxa uu buuggan ku kulmiyay badihii maansada, ee ugu faraha badnaa, ee inta aan arkay abidkeed lagu kulmiyo buug-maanseed, isaga oo qoruhu meel isugu keenay 29 badood oo ka mid ah badaha maansada, inta aan ogahay buugga ugu badan ee hore uqoray badaha maansadu, waxa uu qoray 15 ka mid ah badaha maansada, waxaanad arkaysaa in badaha-maanseed ee uu buuggani xusay ay ugu dhawaan ku labanlaabmayaan badaha maansada ee ay qoreen buugaagtii hore loo qoray.

Qoruhuna waxa uu inbadan isku taxalujiyay, ku dadaalay, wakhti baddana ku bixiyay sidii uu abla-balayn ugu samayn lahaa badaha maansada, isaga oo maanso walba ku arooriyay badda ay ku sargo'an tahay, halkaasna waxa aad ka arkaysaa in uu buuggani noqon doono ilayska badaha madaha maansada.

Waxa uu sidoo kale qoruhu u magac-bixiyay dhammaan badaha maansada ee uu qoray, isaga oo badihii aan magaca lahayn u bixiyay magaca maanso ka mid ah maansooyinkii ay baddaasi caanka ku ahayd, taasina waxa ay kaalin laxaad leh ka qaadan doontaa in si hawlyar loo kala hormeeyo badaha maansada, maanso walbana lagu daro badda ay ku abtirsanayso.

3.**Allifida Halbeegyada Maansada**

Waxyaabaha ugu muhiimsan Cilmiyada cusub ee lagu daahfuray qoraalka buuggan, waxa koow ka ah " Curinta Hal-beegyada Maansada", Qoraha buugguna waxa uu bad kasta oo ka mid ah badaha Maansada ku arooriyay, hormoodna uu uga dhigay, tuduc noqon doona hal-beeg ka mid ah hal-beegyada lagu cabbiro badaha Maansada.

Tuducyada hal-beegga u ah badaha maansada waxa hore u jiray tuducyada lagu cabbiro badaha Gabayga, Geeraarka, Buraanburka, Heellada, Waraabka, iyo dhawr tuduc oo ah hal-beegyo-maanseed uu

curiyay Abwaanka caanka ah ee Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", dhammaan tuducyada kale ee lagu cabbirayo badaha Maansada ee buuggan ku xusanina waa qaar ka soo maaxday maskaxda iyo maanka qoraha buuggan, oo garaadka in badan ka shaqaysiiyay, soona saaray tuducyadaas hal-beegga u noqon doona badaha kala geddisan ee maansada.

Allifitaanka tuducyada hal-beegga u ah maansada waxa sahlay awooda hal-abuurnimad qoraha buuggan, oo marka laga yimaado hibadiisa qoraanimo ah abwaan curiya maansooyin kala geddisan, kuna guulaystay kaalmada koowaad iyo labaad ee tartan suugaaneedyo dhawr ah oo ka dhacay Hargeysa iyo Pakistan, taas aawadeedna waxa uu qoraha buuggani istaahilaa in uu yahay qof culuumta maansada ku soo kordhiyay allifidda qaar badan oo ka mid noqon doona halbeegyada maansada.

4.**Raadinta Asalka Erayada**

Buuggan waxa ku xusan asalka ay ka soo jeedaan erayo-suugaaneedyo farabadan oo ay ka mid yihiin Gabay, Maanso, Buraanbur, Baarcadde iyo qaar kaleba, taas oo si bayaan ah daaha uga qaadaysa meelaha ay ka soo jeedaan, lagana soo minguuriyay erayo-suugaaneed farabadan.

Guud ahaanna waxa uu buuggani fure, hordhac iyo bilawba u noqon doonaa sidii si cilmiyaysan oo ay aqooni ku dheehan tahay loogu qori lahaa suugaanta badweynta ah ee ay qaniga ku tahay ummadda Soomaaliyeed, qoraha buugguna waxa uu mudan yahay in lagu hambalyeeyo dedaalka wax ku oolka ah ee uu muujiyay intii uu ku gudojiray qoraalka Buuggan "Culuumta Maansada", dedaalkaas oo ay aniga ka horba ka maragfureen dhallinyaro aqoonyahano ah, Abwaanno, suxufiyiin iyo Qoraayo caan ah oo ay ka mid yihiin Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", Maxamed Xirsi Guuleed, Jamaal Cali Xuseen, Axmed Aw Geeddi Muxumed Cali "Masmas", Xasan Maxamed Yuusuf iyo Cabdishakuur Xaaji Maxamuud Muuse "Heersare".

Farxaan Muxumed Cige

Aqoonyahan dhallinyaro ah, Xubin ka tisan Akadamiga Waxbarashada iyo Cilmi-Baadhista "ERA".

2. HORDHAC

2.1. WEEDHA QORAAGA

Marka hore waxa mahad iska leh Ilaaha inna abuuray ee samooyinka iyo dhulalkaba ahaysiiyay. Mar labaadka buuggan uu magaciisu yahay "Culuumta Maansada" waxa aan qoritaankiisa iyo xog-raadintiisaba ku hawlanaa muddo sanado ah. Macluumaadka ku qoranina waxa ay ka kooban yihiin qaar aan ka helay dad kala jooga dacalada adduunka iyo qaar aan badnayn oo aan maskaxda ka soo saaray, oo aan hal-abuuray. Buuggan qoraalkiisa waxa igu kallifay sababahan soo socda:

1. Kaddib markii aan arkay umadda Af-Soomaaliga ku hadasha oo celcelis ahaan aqoon wanaagsan u leh adeegsiga iyo xifdiga Maansada Soomaalida, haddana u baahan in loo sii iftiimiyo culuumta maansada Soomaaliyeed sida xeerarka, shuruudaha iyo qaybaha maansada.

2. Kaddib markii aan arkay dad badan oo Suugaanta xiiseeya, laakiin aan kala saari karin farqiga u dhaxeeya maanso iyo gabay, ama kala sheegi karin waxa ay ku kala duwan yihiin masafo iyo jiifto, sidoo kalena aan caddayn karin geeraar iyo saar waxa ay ku kala geddisan yihiin.

3. Kaddib markii aan arkay in Soomaalidu hadda kala qoqoban tahay oo intii isku deegaan ahiba aanay aqoon u lahayn suugaanta iyo maansooyinka deegaankoodaas mooyee maansada deegaamaada kale. Tusaale ahaan wiilka ama gabadha dhallinyarada ah ee Hargeysa ku nool haddii la weydiiyo waa maxay Shirib ama Guuroow ? Waxa suurto gal ah in ay 90% dhalinyarada Hargeysa ku nooli garan waayaan. Sidoo kale hadii wiil ama gabadh reer Muqdisho ah la

waydiiyo waa maxay gabay iyo geeraar farqigoodu?, lama filayo sidoo kale in 90% in ay ka jawaabaan su'aashaas.

4. Kaddib markii aan arkay buugaagta Af-Soomaaliga ah ee wax ka qora badaha maansada oo aan xambaarsanayn xog badan oo laga bogan karo ama maansada Soomaaliyeed u qaybiya toddoba badood ama sideed badood ama ugu badnaan koow iyo toban badood. Waxayse maansada Soomaalidu tahay ugu yaraan dhawr iyo labaatan badood sida aan ku ogaaday markaan sameeyay cilmi baadhis iyo faaqidaad dheer oo ku saabsan badaha maansada Soomaaliyeed. Baadhistan oo isugu jirta dhaga-dhegayn, indha-indhayn labadaba, iyo weliba waraysiyo aan la yeeshay dad iyagu suugaanta ku xeel-dheer.

5. Kaddib markii aan arkay dad Suugaanta aqoon xeel dheer u leh, oo haddana maanso aan gabay ahayn gabay ku sheegaya. Tusaale ahaan waxaad arkaysaa buug uu qoray aqoonyahan suugaanta ku xeeldheeri oo maanso Geeraar ah ku sheegaya Gabay !!. Haddii dadkii suugaanta yaqaanay ay qaladkaas sameeynayaan waxa loo baahan yahay in la saxo iyaga iyo ummadda kaleba.

Si kastaba ha ahaatee buuggan qoraalkiisu waa mid aan u maray dhaxan iyo qabow, dhidid iyo kulayl, oo aan hiir iyo habeenba u soo jeeday, maskax iyo dadaal badanna aan ku bixiyay ururintiisa. Arinkaasina waxaan ku soo ururin karaa oo kuu sheegi karaaba in uu yahay "Aqoontii iyo Fikirkii garaadkayga oo hortiina yaalla". Waa buug aan la tashi kala sameeyay dad aqoon xeel dheer u leh suugaanta iyo maansada Soomaalida.

Waxaan ka cudurdaaranayaa haddii aan soo gaabiyo inta badan maansooyinka aan tusaaleha ugu soo qaadanayo buugga dhexdiisa, waayo muraadka buuggani ma aha in aan daabaco maansooyin, ee waa in aan caddeeyo habka loo hormeeyo, loo qaybiyo, ee loo kala garto maansooyinka kala bahda ah. Sidaas daraadeed waxa laga yaabaa in aan gaabiyo inta badan maansooyinka buugga ku xusan.

Buuggan qudhiisu ma noqon karo mid qaladaadka ka hufan oo lagu wada qanco, waxa aan se jecelahay in uu Culuumta Maansada wax uga iftiimin doono bulshada Af-Soomaaliga ku hadasha, gaar ahaan da' yarta soo koraysa meel kasta iyo mar kastaba ha joogeene. Wixii qaladaad ah ee buuggan ku jira aniga ayaa la ii nisbaynayaa.

Hal-abuurrada iyo qoraayada aan ku soo qaadanayo buuggani waa qaar ka soo kala jeeda qaybaha kala geddisan ee Soomaalida. Dadka Islaamka ah ee dhintay ee buuggan aan magacooda, maansadooda iyo daah-furkooda ku soo qaatana Ilaahay ha u wada naxariisto dhammaantood. Inta, guud ahaan akhristeyaasha, nafteyda iyo ummada Islaamka ahna waxaan ugu ducaynayaa in Ilaahay sida xaqa ah waafajiyo Aamiin Aamiin.

Buuggani waxa uu qayb ka mid yahay dedaalka loogu jiro kobcinta aqoonta ay bulshadu u leedahay dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida oo ka socda dalal iyo magaalooyin badan oo ku yaalla adduunka, oo ay ka qayb qaadanayaan hal-door badan oo isugu jira qaybaha kala geddisan ee dadka. Waxa aanan rejaynaynaa in uu buuggani waxtar u yeelan doono bahweynta suugaanta, gaar ahaan dhallinyarada aan ka midka ahay iyo carruurta soo koraysa oo iyaguna dhallinyarada iyo hoggaanka berri labadaba.

Ugu dambayn waxa aan dadka sharafta leh ee akhriya buuggan ka codsanayaa in ay ii gudbiyaan dhaliilaha, talooyinka, toosinta, tilmaanta iyo aragtiyaha sixidda ah ee buuggan CULUUMTA MAANSADA ku saabsan, si aan ugu daro daabacadaha dambe ee buuggan haddii Alle idmo. Fikradahana waxa la iigu soo hagaajin karaa ciwaannadan:

Siciid Maxamuud Gahayr "Hargeysaawi"
31/May/2011
Email: saedmgahair@hotmail.com, siciidgahayr@gmail.com
Tell: 0025 2 4428604
Hargeysa

2.2. MAHADNAQ

Waxaan u mahad naqayaa, hambalyo iyo bogaadin aan la soo koobi karin-na halkan uga jeedinayaa qof kasta iyo cid kasta oo taageero

qoraal, niyadeed, sixitaan, ama dhaqaaleba iga siiyay hawsha buuggan mudadii aan ku gudo jiray qoraalka buugga, dadkaas taageerada i siiyay oo agtayda ka mudan sharaf, ixtiraan, qaddarin iyo maamuus farabadan, aa leeyahayna "Alle ha idinka abaal-mariyo wanaagga aad aniga iyo ummaddaba u samayseen". Ugu horreyna waxa aan u mahad-naqayaa Shirkadaha iyo Aqoonyahannada bixiyay dhaqaalaha lagu daabacay buuggan oo kala ah

Dadka iga taageeray dhanka aqoon-ku-dariska, tifatirka, sixitaanka higaadda iyo tayayta buugga gacanta ka geystay oo si mudan ugu mahad-naqayo waxa ka mid ah: Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", Abwaan Jamaal Cali Xuseen oo kaalin laf-dhabar ka qaatay talada iyo tayada buuggan, igu xidhay dad badan oo aan xog ka rabay, sixista iyo tifatirka buuggana ugu hagar-baxay si heersare ah, Abwaan Maxamed Saleebaan Cumar, Suxufi Xasan Maxamed Yuusuf, Abwaan Axmed Aw Geeddi Maxamuud "Dheeraad", Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir", oo tifatiray qaybo aad u badan oo ah culuumta aan buugga ku qoray, dejiyay nashqadda buugga, isla markaasna saxay si hufnaan leh cilmi ahaan iyo qoraal ahaanba ugu hagar-baxay buuga. Abwaan Muxumed Cali Aw Jaamac " Masmas". Abwaan Jamaal Cali Xuseen oo ka qaybqaatay tifatirka buuggan, macluumaad aan u baahnaana ii soo diray, Intii aan buugga qoraalkiisa ku gudo jireyna ila garab istaagay taageero niyadeed, mid cilmi, iyo dhiirigalin miisaan wayn leh. Aqoonyahan Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo oo macluumaad aan u baahnaa iigu soo diray si hagar la'aan ah. Qoraaga Sayid Maxamed Yuusuf "Dhegey", Abwaan Cabdirisaaq Axmed Geeddi "Aakhiro", Abwaan Cabdirisaaq Cabdilaahi Aadan, Abwaan Faysal Aw Cabdi Canbalaash, Cabdishakuur Xaaji Muxumed Muuse "Heersare", Khaalid Jaamac Qodax, Abwaan Axmed Maxamed Faarax "Badeed", Cabdirisaaq Cali Maxamed, Cismaan Yuusuf Barre oo dalka dibadiisa iiga soo diray macluumaad aan aad ugu baahnaa. Aqoonayahan Ayaanle Maxamed Maxamuud oo daabacay nuquladii koowaad ee buuggan, taageerona iga siiyay hawlo aqooneed iyo farsamo oo buuggan lagama maarmaan u ahaa.

Bogaadin gaar ah waxa mudan **Xasan Ismaaciil Xasan**, oo ahaa Agaasmihii Guud ee Wasaaradda Dhaqanka iyo Dalxiiska Somaliland, **Prof Maxamed Cabdi Bade**, Hormoodka waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka ee Jaamacadda Hargeysa, **Prof Cabdifataax Maxamed Cabdiraxmaan,** Ku-xigeenka waaxda maamulka iyo Xisaabaadka ee Jaamacadda Hargeysa oo buugga u sameeyay waraaqo caddayn ah.

Mahad wayn waxan u soo jeedinayaa **Dr Jaamac Muuse Jaamac**, **Ayaan Maxamuud Cashuur**, ururada **Red Sea, Kayd** iyo **Ilays** oo buugga siiyay fursad aan ku soo bandhigay Bandhig-dhaqameedkii Mooge iyo Bandhiga Buugaagta ee Caalamiga ah oo Hargeysa lagu qabtay July/2010.

Cabdirashiid Maxamed Jaamac (Indho) oo sawiray, qurxiyayna ubaxa ku yaalla jaldiga sare ee buugga.

Ugu dambayn aan u mahadnaqo aqoonyahannadan oo siyaabo kala geddisan iiga caawiyay hawsha buuggan, kuwaas oo kala ah: Xuseen Foodcadde, Mustafe Maxamed Khayre, Abwaan Xasan Daahir Ismaaciil “Weedhsame”, Farduus Siciid Dirir, Abwaan Siciid Ibraahim Dool “Gurey”, Abwaan Cabdiwaaxid Cali Gamadiid, Xuseen Khadar Cilmi, Qaasin Ismaaciil Xasan, Cabdilaahi Raygal, Farduus Maxamuud Gahayr, Garyaqaan Cabdiraxmaan Xasan Nuur , Engineer Khadar Maxamuud Cigaal, Abwaan Jaamac Yuusuf Ducaale “Kaynaan”, Abwaan Maxamuud Macallin Aadan Cali, Miyir Cali Xuseen, Abwaan Mustafe-Khashab, Abwaan Cabdiraxmaan Maxamed Macallin Xasan (Baas), Axmed Ibraahim Sheekh Jaamac, Cabdiraxmaan Aadan Ismaaciil , Xamse Suldaan Aadan Faarax, Farxaan Muxumed Cige, Axmed Saleebaan Birinbir, Barkhad Maxamed Hurre, Abshir Askar Maxamed, Abwaan Maxamed Cali Cartan “Hal-Deeq”, Abwaan Axmed Saleebaan Xirsi, Khadar Cali-Xakiin, Macallin Cabdirisaaq Maxamed Guuleed, Muuse Xaaji Cabaydh iyo Abwaan Siddiiq Maxamed Burmad.

Waxaan si gaar ah ugu mahad-naqayaa bahda **Akadamiga Waxbarashada iyo Cilmi-Baadhista ERA,** oo aan si gaar ah uga xusayo **Mahad Ciise Xirsi (Boos)** oo aan ka helay taageero hiil iyo

hoo ba ah muddadii aan waday qoraalka buuggan, iyo cid kasta oo taageertay soo bixidda buuggan.

Siciid Maxamuud Gahayr "Hargeysaawi".
31/May/2011
Hargeysa

2.3.HIBAYN

Buuggan waxa aan u hibeynayaa ummadda Soomaalida ah ee jecel barashada cilmiga Suugaanta iyo Maansada, Si gaar ah waxa aan buuggan ugu hibeynayaa dhallinyarada iyo ardayda ku hawlan akhriska, barashada iyo qoraalka dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida

Tibaax Ku SaabsanAfka Soomaaliga

Bani aadamku waxa uu leeyahay astaamo uu kaga geddisan yahay nooleyaasha kale ee adduunka ku nool, astaamahaas uu dadku kaga duwan yahay nooleyaasha kale, waxa ka mid ah:

- Qaabka ay u samaysan yihiin afarta addin ee dadku.
- Habka ay u shaqayso maskaxda dadku iyo
- Doobta oo dadka u sahasha in ay sifesyo dhawaaqa. Dhawaaqa bani aadamkana waxa ka dhasha Afka.

Afka waxa lagu qeexaa in uu yahay mid ka kooban erayo la isku afgarto, la isku fahmo, xidhiidhna lagu wada sameeyo. Afka waxa isku fahma bulshada meel ku wada nool.
Afku waa qalabka lagu fikiro.

Hadal = Fikir
Hadalku waa marka dhawaaqa kor loo qaado
Fakarkuna waa marka hadalka hoos loo dhigo, ee uu qofku naftiisa oo kali ah uu la hadlo.

Afku waa baadisooc, oo waa ka ay ummadi isku garato,
Afku waa qalabka lagu keydiyo dhaqanka ay ummadi leedahay, dadka meel ku wada noolina waxa ay leeyihiin kasmo wadareed iyo erayo gaar ah oo ay isla fahmaan, Kasmo wadareedka Soomaalida waxa ka mid ah 'Caleentiisii ayaa caddaatay", eraygan waxa fahmaya markaba Soomaalida, haddii qof aan Soomaali ahayn luqaddiisa loogu turjumo weedhaas, qofkaasi ma fahmi karo uma fahmi karo weedhaas sida ay Soomaalidu u fahmayso.

Waxyaabaha uu dadku isku af-gartaa waa laba nooc oo kala ah:

1. Xidhiidh ficil ah oo ah xarakaadka jidhka sida gacmaha, lugaha, indhaha, wajiga, faraha ama labiska qofka..

2. Xidhiidhka labaad ee la isku afgartaa waa dhawaaqa hadalka. Dadkuna sidiisaba waxa uu isku afgartaa waa hadalka sidii uu **Cabdi Cali Wayd**-ba heestiisa ugu yidhi:

Xoolahaba summadaa
Lagu baadi soocaa
Dadna **weedha siman** iyo
Sawraca tilmaantaa
Lagu kala sifeeyaa

Afka iyo hadalku waxa ay ka mid yihiin nimcooyinka uu Alle subxaanahuu watacaalaa ku galladay ee uu ku sharfay dadka. Ilaahay isaga oo ka waramaya nimcooyinka uu dadka siiyay ayuu nimcooyinkaas ku daray hadalka uu dadka baray. Alle waxa uu Suuratu Raxmaan aayadeeda afraad ku yidhi *"Waxa uu dadka baray hadalka"*.

Xayawaanada kale waxa ay isku afgartaan ci`da, urta, iyo kiimikooyin ay sii daayaan sida shinida oo isku afgarata wax loo yaqaano "Phermones" oo ah kiimikooyin ay cayayaanada qaar ku wada xidhiidhaan.

Luqadaha adduunka baho ayaa loo qaybiyaa waxa jira luqada la isku yidhaahdo **"Indo-Europeans".** Bahdan luqadaha ah Af-Soomaaligu kama mid aha ee waxa ku jira luqadaha lagaga hadlo Yurub sida Ingiriisida, Faransiiska, Jarmalka, Talyaaniga iwm iyo luqadaha lagaga hadlo qaybo ka mid Aasiya sida Urduuga, Bashtuuga, Faarisiga iwm.

Afka Soomaaligu waxa uu u ka mid yahay luqadaha la isku yidhaaho **Afro-Asians**-ka oo ay ku wada jiraan luqadaha Xawsaha Nayjeeriya, Carabi, luqadda Yuhuudda, Oromada, Canfariga, Amxaariga.
Luqadahaas Afro-Asianka waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah **1.Hameto iyo 2.Sametic**. Qaybta Sametic waxa gala luqadaha ay ka mid yihiin Carabiga, Amxaariga iyo waliba luqada Yuhuudda.

Afka Soomaaliguna waxa uu ka mid noqdaa qaybta **Hameto**, waxaana kula jira qaybtan luqadaha Sawaaxiliga, Canfarta, Oromada, iyo qaar kale. Qaybta Hameto waxa ay u sii qaybsantaa **Kushitic** iyo Bantuu, markaa Afka Soomaaligu waxa uu gala qaybta Kushitic-ka loo yaqaanno, waxaana ku weheliya qaybtan luqadaha kala ah Canfariga, Oromada, Booranta, Saahuuga, iyo qaar kale. Bantuu-gana waxa ka mid ah luqadaha Sawaaxiliga.

Af-Soomaaligu waxa uu leeyahay dhawaaq u eg dhawaaqa afka Carabiga, qoraalkiisuna waxa uu ku qoran yahay farta Laatiinka, oo ah luqaddii ay ku hadli jireen Roomaaninyiintii hore. Afka Soomaaligu waxa uu ka kooban yahay kow iyo labaatan (21) shibane, iyo toban shaqal, kuwaas oo shan ka mid ahi ay yihiin shaqallo dhaadheer, halka shan shaqal oo kalena ay yihiin shaqalo gaagaaban.

Dhamaan xuruufta ku jirta luqada Soomaaliga waxa lagu soo ururiyaa weedhan uu macalinkaygii luqada Soomaaliga ee Dugsiga hoose/dhexe gaar ahaana fasalka lixaad uu ii sheegay. **Macalin Xasan Axmed Jaamac** weedhan lagu ururiyo Af-Soomaaliga xuruuftiisa, waxa uu ii sheegay in uu sameeyay Abwaan Cabdilaahi Suldaan Timacadde.Weedhina waa tan:
"Sheekheena wiilkiisa curad, gabadhuu qabi jiray foox la'aan ma heesi karto".

Xuruufta luqada Ingiriisida ahna waxa lagu soo koobaa *"The quick brown fox is jumping over a lazy dog".*

Halka xuruufta luqada Carabiga ahna lagu soo koobo weedha ah:
ابجد هوز حطي كلمن سعفص قرشت ثخذ ضظغ "Abjad, Huwaz, kalaman, sacafas, qarashat, dadiq" .

Erayada ku jira luqada Soomaaligu waxay ka kooban yihiin laba qaybood oo kala gadisan kuwaas oo kala ah:

1. Qaar asal ahaan ku abtirsada luqada Soomaaliga, oo marka la micneeyo la garan karo halka ay ka soo jeedeen sida erayadan xagga hoose ku xusan:
   - Hooyo, waxa ay asal ahaan ka timi "Hooyso" waana tii dadka hoynaysay ee dhaxanta, kulaylka iyo cidladaba wehelka uga ahayd.
   - Gashaanti oo asal ka timi "Gashaa Hanti", taas oo uu micnaheedu yahay waa tii hantida u ahayd reerka guursada ee ay gasho. Maadaama oo ay inantu inta badan nolosheeda la qaadato reerka guursada ama ay u dhaxdo.
   - Ergo, asal ahaan waxay ka soo jeedaa "Eray geeyo" waana kuwa erayada wanaagsan dadka u kala geeya.

- Wiil, oo asal ka soo jeeda wiilka indhaha, sababtoo ah wiilashu waa qaar indhuhu ama wiilalku ku doogsadaan.
- Habar, Asal ahaan waxay ka soo jeedaa "Hab-Bara", oo waa tii dadka baraysay habka loo noolaado, loo dhaqmo, iyo waxyaabo kaleba.
- Dhurwaa, oo asal ahaan ka soo jeeda "Dhuur waa" erayga dhuur waa carruurta, Dhuur waa na, waa carruur waa ama carruur ha helin, waana eray lagu habaari jiray waraabuhu marka uu wax dhaco.
- Lacag, asal ahaana ka soo jeeda "La cag" oo waa tii la cagta ahayd ama leekayd, ama la miisaan ahayd wax walba oo lagu badalanayo.
- Oday, oo asal ahaan ka soo jeeda "Ooday" oo ah kii reerka dayrka u ahaa ee oodayay.
- Libaax, oo asal ahaan ka soo jeeda "La Bax" oo waa eray la adeegsan jiray marka uu libaaxu habeenkii soo dhaco ee uu dadka iyo xoolaha la baxo.
- Soddoh, oo asal ahaan ka soo jeedda" Soo daaha" oo ah tii reerka cusub daaha u ahayd.
- Calool, oo asal ahaan ka soo jeeda "Cal iyo ool" oo la isu geeyay, Cal micnaheedu waa cuntada la calaaliyay, ool micnaheeduna waa oollid ama shay meel yaalla.Markaa micnaheedu waa meesha cuntada calaashan la dhigo.
- Xeerbeegti, oo asal ahaan ka soo jeeda "Xeer ku beegti" waa kuwii xaajooyinka iyo xeeraraka is waafajinayay.
- Xeerilaaliye, oo asal ahaan ka soo jeeda "Xeer ku ilaaliye" oo ah kuwii dadka xeerka ku ilaalinayay.
- Sabool, oo asal ahaan ka soo jeeda (Sabo-ool), waxa loola jeedaa waa kuwii dagi jiray duleedka reerka hantida leh, maadaama oo aanay lahayn hanti ay gaar ahaan isugu dabaraan.
- Fandhaal, asal ahaan waxa uu ka soo jeedaa (faro-dhaan), oo waa kii faraha wax ku cunistooda dhaamay.
- Dumaashi, asal ahaan waxa ay ka soo jeedaa (dib-u-umaashi), oo waa gabadhii ninku guursanayay, ee uu dhaqayay marka uu walaalkii geeriyoodo.

- Dameer, asal ahaan waxa ay ka soo jeedaa (dulmeer), oo waa tii duleedka reerka meeri jirtay, ee meesha dadku dagan yahay aan ka fogaan jirin, illeen waa xayawaan dabjooga ahe.
- Kurey, oo asal ka soo jeeda kore, oo ah kii korayay, ee ku jiray xilliga koritaanka.
- Doob, oo asal ahaan ka soo jeeda duub, oo ah kii wali isku duubnaa, ee aan la sarifin, carruurna aan yeelan, walina guursan.

Iyo erayo kale oo farabadan.

2. Qaybta labaad ee erayada luqada Soomaaligu waa erayo qalaad, oo ajaanib ah, oo soo galay luqada Soomaaliga kadib markii ay Soomalidu xidhiidh ganacsi, ama diineed, jaarnimo, ama gumaysi la yeelatay bulsho kale.Luqadaha kale ee erayadoodu ay ku jiraan luqada Soomaaliga waxa ka mid ah, Ingiriisida, Carabida, Urduuga,Talyaaniga, Faransiiska,Oromada IWM. Hadaan tusaaleyaal soo qaadano:

Soomaaliga iyo **Ingiriisigu** waxa ay wadaagaan erayadan, koob (cup), hudheel (hotel),fiidyaw (video), buug (book), iskuul (school), dhaktar (doctor) IWM.

Soomaaliga iyo **Carabigun**a waxa ay wadaagaan erayo badan oo ay ka mid yihiin: khudrad, sako, muus, sharaab, cilmi, dayaarad, markab, idaacad, hawo, samada, albaab, kursi, iyo qaar kale oo badan.

Urduuga oo ah luqada ay ku hadlaan dalalka India iyo Pakistan waxa ay wadaagaan Soomaaliga erayo dhawr ah. Ereyada Urduu ga ah ee luqada Soomaaliga ku jiraa waa:

baraf= urduu, sidoo kale baraf= Soomaali.
Gaadhi=Urduu, sidoo kale gaadhi= Soomaali,
Bandoo=Urduu, sidoo kale bandoo=Soomaali.
Saambuuse =Urduu. Sidoo kale Saambuuse= Soomaali
Badhasaab waa eray Soomaali ahaan aynu u naqaano guddoomiye gobol. Laakiin asal ahaan ka soo jeeda Urduu oo uu macnahiisu yahay badhaa=wayn, iyo saab= mudane. Markaa waa eray uu macnahiisu yahay mudanihii waynaa. Erayo kalena way jiraan.

Luqada **Sawaaxiliga** ayaa iyaduna la wadaagta afka Soomaaliga erayo ay ka mid yihiin
Yaanyo =Sawaaxili, sidoo kale Yaanyo waa Soomaali
Kuumi waa eray Sawaaxili ah oo macnahiisu yahay toban" Soomaaliduna ay sidaas u adeegsato

Luqada **Oromoda** ayaa iyaduna erayo la wadaagta luqada Soomaaliga erayadaas oo ay ka mid yihiin:

Koow, Lama, Saddex (Sadi), Afar (Afur) Shan.
Luqada Talyaaniga ayaa iyaduna saamayn badan ku yeelatay goboladii dhulka Soomaalida ee uu Talyaanigu gumaysan jiray. Luqadda Faransiisku waxa ay aad ugu milantay lahjada Soomaaliga ah ee ay ku hadlaan Soomaalida Jabuuti ku nooli. Waanay jiri karaan afaf kale oo ay erayo wadaagaan luqadda Soomaaliga. Erayadaasi asal ahaan Soomaali ha ahaadeen ama luqado kale ha ku abtirsadeen'e, Muhiimaddu waxay tahay in la ogaado in luqada Soomaaligu ka samaysan tahay erayo ay leedahay iyadu, iyo erayo soo galooti (ajanabi) ku ah.

Abwaan Siciid Ibraahim Dool (Gurey), oo ka mid ah abwaanada dhallinyarada ah oo sameeyay eray bixin ku saabsan labadaas qaybood ee ay ka kooban yihiin erayada ku jira luqadda Soomaaligu, ayaa eray bixinta u dhigay habkan:

1.Erayada ku jira luqada Soomaaliga ee asal ahaan ka soo jeeda luqada Soomaaliga waxa loo yaqaanaa **'Xer-U-Dhalan",** erayadaas waxa loo macnayn karaa laba waddo oo kala ah:

B.In erayga loo macneeyo si dhamaystiran, markaas erayga waxa loo macnaynayaa isaga oo ah **(caleen).** Tusaale ahaan marka la macnaynayo erayga biyo, waxa uu ka soo jeedaa asal ahaan erayga (biiyaa), waana kuwii biinayay haraadka, uskaga iwm. Eraygii biyo waxa la macneeyay isaga oo dhamaystiran, haddii la macneeyo erayga oo dhamaystiran, waxa la odhanayaa waxa la macneeyay eraygii oo ah (Caleen)

T. Haddii eraygu u baahdo in la kala qaado marka la micnaynayo, oo loo qaybiyo dhawr qaybood, erayga waxa la micneeyaa isaga oo ah

(**qurub**), oo ah shay kala qaybsan, tusaale ahaan marka la doonayo in la macneeyo erayga Abwaan, waxa loo kala qaadaa laba eray oo kala ah: Ab: oo macnaheedu yahay aabo ama isir, iyo waano: oo macnaheedu yahay waxsheeg, erayga abwaan waxa uu ka samaysan yahay labadaas eray ee ab iyo waano oo la isu geeyay, waxaanu micnihiisu noqonayaa (aabbihii wax-sheegga). Laakiin taas macnaheedu ma aha in dhamaan erayada xer-u-dhalanka ahi ay yihiin qaar is macneeya, ee waxa la heli karaa erayo badan oo xer-u-dhalan ah oo aan is macnayn karin.

3. Erayada ka soo jeeda luqadaha qalaad ee afkeena dibada ka soo galay, waxa la yidhaahdaa (**Xigasho**), oo waa qaar aynu ka soo xiganay ummado kale oo aan Soomaali ahayn. Erayada xigashada ah ee ku jira luqada Soomaalgu waa la-macneeyayaal aan iyagu is fasiri karin

QEEXIDDA SUUGAANTA

Afka Soomaaliga dhuuxiisa waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah:

1. **Tix** iyo iyo
2. Tiraab

Tixdu, waa hadalka leh dhawaaqa gaarka ah ama luuqda, xaraf-raaca**,** miisaanka, iyo habdhaca sugan.
Tiraabtuna, waa hadalka ka kooban erayada la isku fahmi karo ee aan habdhaca lahayn.
Nuxurka iyo xikmadda tixda iyo tiraabta marka la isu geeyo ayaa la isku yidhaahdaa “Suugaan”.

Farqiga u dhexeeya tixda iyo tiraabta

1.Tixda waa la soo xigtaa, oo waxa la isticmaalaa erayadii qofka tixda sameeyay uu adeegsaday, tiraabta se erayada uu qofku doono ayuu ku tabin karaa, waxase mihiim ah in macnihii la rabay uun la sheego.

2.Tixdu waxa ay leedahay xaraf-raac, tiraabtana xaraf-raacu shardi uma aha.

3.Tixdu waxa ay leedahay hab-raac(hab-dhac) iyo cabbir sugan, tiraabtu malaha hab-raac iyo cabbir sugan

Mar kalena Afka Soomaaliga waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah :**Hadal** iyo **Hawraar**

Hadal :Hadalku waa inta caadiga ah ee lagu wada hadlo la iskuna fahmo, waa hadalka qaraxa ah ee aan suugaanta ahayn, waxa la yidhaahdaa "Hadaloow ninba in ku yidhi", mar kale Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa "Hadalna la kala odhan og, Allena la kala baryi og", dadkana hadalkoodu waa kala soocan yahay, qaar waxa ay ku hadlaan hadal dabka bakhtiiya, dadka isu soo dhaweeya, nuxur badan xambaarsan, aadna loogu diirsado, dadka qaar waxa ay ku hadlaan hadal qallafsan oo aan faa'iido badan lahayn

Hawraar: Hawraar, ama murti ama suugaanina waa eray kasta oo xikmad leh, waxaanay hawraartu ku timaaddaa xaalado gaar ah iyo wakhtiyo gaar ah sida xilli guurka, wakhtiga gar-naqsiga iyo xaaladaha kale ee la midka ah.
Hawraari waxa ay asal ahaan ka soo jeedaa, waayadii hore marka qof lagu yidhaahdo "Hebeloow sidaas yeel", waxa uu qofku ku jawaabi jiray "Hawraarsan", erayga hawraarsan waxa uu ka kooban yahay laba eray oo la isu geeyay oo kala ah "hawraar" iyo "san", taas oo macnaheedu yahay "waa hadal wanaagsan".

Haddaba waxa is weydiin leh

- Maxaa lagu qeexaa erayga suugaan?
- Soomaalidii hore imisa siyaabood oo kala geddisan ayay u taqaannay erayga suugaan?

Soomaalidii hore siyaabo kala duwan ayay u qeexi jirtay erayga suugaan, siyaabahaas oo ay ka mid ahaayeen:

1. **Suugaan,** waxa loo yaqaanay "hadalka gunuuska ah" oo ah hadalka lagu yidhaahdo cod hoose ee aan si wanaagsan dhagtu u maqli karin, waxaana jirtay Maahmaah Saddexley ah oo odhanaysa:

Hilib sooryo ma aha

Socod raaxo aha
Suugaanina hadal ma aha (Erayga Suugaan halkan waxa uu ugu jira micne u dhigma, “Gunuusku hadal ma aha”).

2. **Suugaan** waxa kale oo loo yaqaanay oo ay reer guuraaga ama xoolo dhaqatadu u taqaanay madawga geedaha , waxaana la odhan jirey “Meel Heblaayo Suugaan ayay leedahay” oo uu macnaheedu yahay meeshaasi waa dhul daaq leh.

3. **Suugaan**ta waxa kale oo loo yaqaanay, oo ay beeralaydu u taqaanay qaybta budada ah ee soo hadha marka garawga (badarka) la ridqo.

4. **Suugaanta** waxa kale oo meelaha qaar looga yaqaanay “Saxansaxada”, oo marka ay saxansaxo dhabanayso waxa la odhan jiray “Suugaan ayaa dhabanaysa”

Inkasta oo siyaabahaas kala duwan loo sharixi jiray erayga Suugaan, imaka waxa la odhan karaa micneyaashaas hore may hana qaadin waxaana hadda Suugaan loo yaqaanaa:

1. Suugaani waa ta ka aloosanta marka aadmiga dhexdiisa ay ka dhashaan wada dhaqan, wada noolaansho, isbahaysi, wax is weydaarsi iyo garaad ururis si uu u daryeelo jiristiisa iyo kor u qaadka noloshiisa ugana guuleysto dabeecada aan u jixinjixayn haddii aanu karti ugu jilib dhigin.

2. **Suugaanta** waxa lagu qeexaa in ay tahay mid ka kooban Maansada, riwaayadaha, halxidhaaleyaasha, halqabsiyada, maahmaahyada, murtiyaha, iwm.

3. **Suugaanta** waxa kale oo lagu sharraxaa in ay tahay iidaanka dhadhanka u sameeya hadalka, si la mid ah sida ay milixdu dhadhanka ugu samayso cuntada, ama ay sonkortu u macaanayso una wanaajiso tayada shaaha. Suugaantu waa kuruska hadalka, waa qaybta ugu qiimo badan Afka.

4. Suugaani waa eray kooxeedka kulmiya qoraal iyo odhaahba wax kasta oo la xidhiidha nolosha, dhaqanka, hiddaha, sooyaalka iyo dadnimada bulsho inta ugu qiimaha iyo qaayaha

roon ee dhaxal u gasha ummad. Suugaani waa qoraal ama odhaah la qabo inuu leeyahay qiime naf ahaaneed.

Goorma ayaa erayga Suugaan uu qaatay micnahan hadda loo yaqaano? Yaase u bixiyay?
Erayga suugaan waxa uu qaatay micnahan hadda loo yaqaano, wakhti aan sii fogeyn waxaana eraygaas sidan aynu hadda u naqaano markii koowaad u adeegsaday, Xuseen Xasan oo noolaa dhamadkii Qarnigii 19aad illaa bilawgii Qarnigii 20aad, **Xuseen Xasan** ayaa beri lagu xidhay "meel doonni ah", ama Markab dhexdiis, kadib markii la is yidhi waxa uu carqaldayn doonaa heshiis la rabay in uu dhex maro Beeshiisa iyo Beel kale oo diriray, waayo Xuseen waxa uu ahaa Abaanduule Dagaal geliye ah , isla markaana ah Hal-Abuur curin kara Colaad. Xuseen xidhitaankiisaas isaga oo aad uga xun ayuu tiriyay Gabaygan oo uu u adeegsaday Erayga Suugaan macnaha aynu hadda u naqaano.

Suugaanta Gabay maalintaan sadar ka sheegaayo
Weligey ma saranseeriyee waan susumiyaaye
Soofaha lab-baan kaga jaraa saxalka baallaaye
Anigoo siyaakhadiyey bay sare u qaadaane
Markaasay safruhu ula kacaan sabo Mareexaane
An sifeeyo maantana tixdaan saaxi u abbaaro

Ninba sadada meel buu Ilaah, uga sameeyaaye
Anse taydu waxay saaran tahay, sud iyo geel waabe
Senge dhabarki saymiyo colbaan saami ku lahaaye
Weligayba saar iima qaban suudhan Doonyaha'e
Si alliyo faduul baan ku imi, sabadan xeebeede
Anba waan ka soo saari jirey saymo kii galaye
Sahlanaa amuurtaydu sow lalama sooyaamo

Taariikhdaas ayay ahayd markii koowaad ee erayga suugaan loo isticmaalay micnahan aynu hadda ku sharaxnay.Waxaana si rasmi ah (caalami ah) loo qaatay erayga Suugaan 1972 markii la qorayay Af-Soomaaliga.

2.4. QAYBAHA SUUGAANTA

Suugaanta siyaabo kala gedisan ayaa loo qaybiyaa waxaana ka mid in suugaanta loo qaybiyo qaybahan:

1.Hal-shidaad iyo
2.Hal-ladaad

Halshidaad : Halshidaadku waa suugaanta loo adeegsado tacabka iyo hawsha, loona isticmaalo si loogu illaawo daalka iyo tacabka ay hawshu leedahay, hal-shidaadka waxa ka mid heesaha la qaado marka mooyeha hadhuudhka ama galleyda lagu tumayo, marka haanta la lulayo, marka maqasha la raacayo, marka geela la waraabinayo, iyo hawlaha kale ee la midka ah.

Hal-ladaad : Hal-ladaadku waa suugaanta la adeegsado marka aan hawl la qabanayn, waa suugaanta loo adeegsado maaweelo, haasaawe, iyo madadaalo ahaanba, hal-ladaadka waxa ka mid ah heesaha la adeegsado marka dhaantada, baarcaddaha, batarka, saylicida, jaandheerta iyo ciyaaraha kaleba la ciyaarayo

Mar kale suugaanta kale waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah

1. **Hal-duggaal iyo**
2. **Hal-duleed**

Hal-duggaal: Hal-dugaalku waa suugaanta laga adeegsado inta lagu gudo jiro oodda guriga, dugaalna waa dugsi, oo haddii la yidhaahdo “meel dugaal leh ina gee”, waxa loo jeedaa “meel dugsi leh ina gee”. Suugaanta hal-duggaalka waxa loo adeegsadaa hawlaha lagu qabto inta gudaha ugu jirta oodda ama dayrka guriga, hal-dugaalka waxa ka mid ah heesaha la adeegsado marka haanta la lulayo, mooyaha la tumayo, carruurta la seexinayo, hararka (cawska) la samaynayo, iyo hawlaha kale ee oodda guriga dhexdeeda lagu qabto.

Hal-duleed: Hal-duleedku waa suugaanta la adeegsado marka dibada looga baxo oodda guriga, suugaanta hal-duleedka waxa ka mid ah suugaanta la adeegsado marka maqasha la raacayo, dhaanka la aroorinayo, geela la carraabinayo, ciyaaraha habeenimada la ciyaarayo, geedka la fahiyo, iyo hawlaha kale ee lagu qabto duleedka iyo dibadda guriga.

Siyaabaaha kale ee suugaanta loo qaybiyo waxa ka mid ah, in suugaanta loo qaybiyo laba qaybood oo kala ah:

1. **Suugaan dhab ah iyo**
2. **Suugaan male awaal ah**

Suugaanta dhabta ahi: waa ta ka waranta dhacdooyin xaqiiqo ah oo dhacay, oo khuseeya nolosha aadamaha ama adduunka guud ahaanba. Sida suugaanta ka waranta dhaqanka, diinta, wadaniyadda, mabaadiida Iyo aqoonta.

Suugaanta male awaalka ahi: waa suugaan khayaali ah oo aan ku fadhiyin kana turjumin xaqiiqo jirta. Sida in uu qof iska sheegto libin aanu lahayn iyo awood aanu lahayn. Sidoo kale waa Suugaan khuraafaad oo aan biyadhaceedu sal iyo raad toona lahayn.

Mar kale suugaanta waxa loo qaybiyaa:

1. **Suugaan la dhaxlay iyo**
2. **Suugaan la curiyay**

Suugaanta la dhaxlay: waa Suugaan aan la sheegi karin ciddii koowaad ee alliftay ama samaysay. Laakiin la isugu soo gudbiyay uun sheeko ama war ahaan. Sidaasna ay isugu tabiyeen facac badan oo kala dambeeyay. Waxa suugaantaas ka mid ah maahmaahyada aynu naqaano badankood iyo sheeko maaweeleedka carruurta lagu sabo.

Tusaale ahaan maahmaahyada soo socdaa waxa ay noqonayaan suugaan la dhaxlay maadaama oo aan la garan karin ciddii rasmiga ahayd ee tidhi erayadan:

- Far kaliyi fool ma dhaqdo
- Midho geed saaran midho gunti ku jira looma daadiyo
- Waraabihii hooyadii cunay, habar-yartii ma daayo iyo qaar kaleba.

Suugaanta la curiyay: waa suugaanta la garan karo cidda samaysay ee hal-abuurtay. Waxaana ka mid ah Maansooyinka kala geddisan ee ay sameeyeen abwaanada Soomaaliyeed, Riwaayadaha ama buugaagta ay qoreen qoraayadu IWM. Sidan tuducan oo kale:

- Dugsi ma leh qabyaaladi waxay, dumiso mooyaane.

Marka gabaygaas la arko waxa markiiba la xasuusanayaa abwaankii sameeyay oo ah Cabdilaahi Suldaan Timacadde.

Iyo waliba tuducan kale ee ah:

- Xag uun labada daarood ku daran, ha is xakabin meele

Tuducaasna waxa sameeyay Ismaaciil Mire oo ahaa abwaan Suugaantiisu aad u caan baxday.

Suugaantu way Qaybo badan tahay, qaybaheedana waxa ka mid ah:

1. **Maanso:** Maansada waxa aan ku tilmaami karaa lafdhabarta suugaanta. Waxaana lagu sheegi karaaba in ay tahay qaybta ugu mihiimsan ee Suugaanta. Maansadu waa tix isku sar go'an oo leh cabbir ama miisaan, sidoo kale leh xaraf ay ku aroorto. Sidoo kale leh luuq ama hab gaar ah oo loo qaado. Maanso kastaaba waxa ay leedahay hab gaar ah oo loogu dhawaaqo isla markaana lagu garto judhaba. Maansada oo faahfaahsan waxaad ku arki doontaa insha Allah qaybaha dambe ee buugga.

2. **Hal-Xidhaale** oo ah shay Masalo ah oo la rabo in dadka garaadkooda lagu tijaabiyo, sidoo kalena lagu tijaabiyo heerka aqooneed ee uu ruuxu leeyahay, waxaana Halxidhaalaha inta badan la weydiin jiray caruurta si ay maskaxdoodu u kobocdo oo ay uga fikirto micnaha dahsoon ee la weydiiyay, sidoo kale wax hal xidhaalayaasha is weydiin jiray Doobka iyo Gashaantimaha wada haasaawaya ee ku kulma gagooyinka ciyaaraha oo ah goobaha Guurku ka aasaasmi jiray. Ciyaaruhu waxay ahaayeen fagaare ay dhallinyaradu isku aragto oo ay ku haasaawdo.

3. **Riwaayad:** Riwaayaddu waa qayb ka mid ah Suugaanta, waana hab bulshada lagaga dhaadhiciyo in ay fahmaan dhaqankooda, diintooda iyo hadba wacyiga kale ee markaas taagan. Waa qaab ama hannaan ummadda lagu baraarujiyo oo ama si toos ah ama si dadban loogu dareensiiyo xaajo u baahan ka hadal oo markaas aloosan.

Riwaayadaha Soomaalida ee hanaqaadka noqday ee aadka looga yaqaan gayiga Soomaalidu dagto waxa ka mid ah:

a. Riwaayada magaceedu yahay, 'Masiibadu aduunyada, iyadaa u macallina" oo uu sameeyay Xasan Xaaji Cabdilaahi "Xasan-Ganay". Riwaayadan waxa lagu tilmaamaa in ay ka mid tahay riwaayadaha ugu xikmadda badan riwaayadaha illaa hadda la alifay.
b. Riwaayada Shabeel-Naagood, oo uu allifay Xasan Sheekh Muumin, riwaayaddan waxa ay ka mid ahayd manhajka duruustii lagu baran dugsiyadii Soomaaliya, waxaana luqada Ingiriisiga u turjumay Guush Andarafiski.
c. Riwaayadda Qabyo ee uu sameeyay Maxamuud Cabdilaahi "Sangub", waa riwaayad ka mid ah riwaaydaha waayahan dhawayd soo baxay, waxaana illaa hadda soo baxay laba qaybood oo ka mid ah.

Riwaayadaha Soomaalidu waa qaar aad u fara badan, xambaarsanna micne iyo xikmad ballaadhan.

4. **Maahmaah;** Maahmaahdu waa hadal kooban oo nuxur ballaadhan oo ku soo baxay dhacdo timi oo dabadeed laga hadlay, inta badan lama yaqaano Maahmaahda ruuxii ay ka soo fushay ama ku tiraabay, waxayse ka mid tahay Suugaanta la kala dhaxlo ee uu facba fac u tebiyo. Maahmaahyada ku soo baxay qisada waxa ka mid ah

a. Midho geed saaran midho gunti ku jira looma daadiyo
b. Hal libaax arkaysaa ma godlato, iyo qaar kale oo fara badan.

Sidoo kale waxa jira maahmaahyo ay dhawaan sameeyeen qaar ka mid ah abwaanada Iyo suugaan yahanada Soomaaliyeed ee hadda nool.

Maahmaahyada waxa loo qaybiyaa saddex qaybood oo kala ah

1. **Hal-dhudle (dhudkaliyaale)**
2. **Laba-dhudle (laba-laagle) iyo**
3. **Saddex-dhudle (saddex-laagle**)

Dhuda, waxa Af-Soomaali ahaan loo yaqaanaa, inta u dhaxaysa laba kurtin, ee shuban, haweenkana waxa qaarkood loo bixiyaa magac ah dhudi, taas oo macnaheedu yahay "Gabadh bilaa turxaan ah, shuban, oo dhud kaliya ah", marka ay habluhu jiraan afar iyo toban sanno ee ay yihiin seeman, waxa loo keeni jiray maro ka kooban laba dhudood, marka ay habluhu waynaadaan, ee ay noqdaan gashaantina waxa loo keeni jiray maro ka kooban saddex dhudood
Haddii aan tusaaleyaal u soo qaadanno saddexdaas nooc ee maahmaahyada ah

1.Hal-dhudle (dhudkaliyaale): Maahmaahyada hal-dhudleha ahi waa qaar ka kooban hal-dhud, tusaalena waxa u ah weedhii uu yidhi Aadan Galaydh ee ahayd "Adduun I qatal" iyo weedhii Warsame Kamadage ee ahayd "Bari dambe ayaa laga sheekayn"

2.Laba-dhudle (laba-laagle): Maahmaahyada laba-dhudleha ahi, waa qaar ka kooban laba dhudood oo la isu geeyay, tusaalena waxa u ah, adhi been waa didaa, beense ma dhuitiyo
3.**Saddex-dhudle** (**saddex-laagle**) : Maahmaahyada saddex dhudleha ahi waa qaar ka kooban saddex dhudood oo la isu geeyay, tusaalena waxa u ah maahmaahdan saddexleyda ah:

Saddex ayaa ragga u liita

- Nin tagaya oo aan la celin
- Nin jooga oo aan la tirin iyo
- Nin maqan oo aan la tabin

Maahmaahyadu sida ay kala dheer yihiin, una kala dhudo badan yihiin ayay u kala xeer dheer yihiin.

5. **Odhaah:** Odhaahdu waa hadal ku aroora dhacdo timi oo laga hadlay, odhaadhu ma xambaarasana micne ballaadhan oo la mid ah micnaha ay xanbaarsan tahay
   Maahmaahdu, waxaana inta badan la yaqaana dhacdadii ay ku soo baxday, odhaahyada caan baxay ee geyiga Soomaalida ku faafay waxa ka mid ah:

A.La jiifiyaana bannaan la joojiyaana bannaan
B.Suldaanoow, saydh tagayay ayaan sor ka reebayay
C.Nin ku arkaya looma sare joogsado

D. Dani waa seeto

6. **Sheeko:** sheekadaasi ama ha ahaato sheeko gaaban, ama sheeko dheer. Sheekadu waxay ka warantaa fal rasmi ah oo la arkay ama mid male awaal ah oo ka unkamay maskaxda ruux. Sheekooyinka waxa loo adeegsan jirey Maaweelo ahaan waxaana ay inta badan sabaalo u yihiin carruurta. Sheekooyinka qaarna waa qaar wax tar u leh bulshada dhamaan qaybaheeda kala duwan, oo ka hadlaysa mawduuc xasaasi ah.

Tusaale ahaan, bal hadda u fiirso sheekadan qosol murtiyeedka ah ee aan ka soo daalacanay buugga "Diiwaanka Qosolka" ee uu qoray Jamaal Cali Xuseen. Sheekadan qosol murtiyeedka ahi waana maaweelo, fariina wey dhiibeysaa qudheedu ee bal u fiirso; **Aw Xasan – Sheekadii Tuugga**

Maalin maalmaha ka mid ah magaalada Burco ayaa Aw Xasan Sheekh Cismaan Nuur oo magaalada maraya meel cidhiidhi ah oo lagu buuqsan yahay, ayaa tuug jeebka bidixda ee Aw Xasan intuu makiinad ku jaray kala baxay lacag ku jirtey si badheedh ah oo dadka qaar arkaayeen oo ay moodayeen in Aw Xasan qudhiisu arkayo oo uu iska qaban doono. Markuu ninkii si deg-deg ah lacagtii ula cararay ee dadkii arkayey ay ku qayliyeen ayaa Aw Xasan lagu yidhi "Aw Xasan maxaad ninka iskaga qaban weydey illayn wixiisu badheedh baabay ahaayeene?" Sidii caadada u ahayd Aw Xasan sangaabta ayuu ka soo qabtay jawaabtii ku munaasibka ahayd isagoo yidhi**: "** Eesh qiyaasak, wadnahaaban uga baqanayey inuu isagana igala cararo**."** Isagoo Aw Xasan wadnahiisa ka ilaashanaya. Markaa isagu danba kamuu lahayn lacagtee, bal yaanu adiga wax ku yeelin ayaan is lahaa.

Hab adeegsiga Sheekada

Sheekadan waxa la adeegsan karaa marka adigoo khatar ku jira aad is furatid oo wixii aad hayseyba aad goobta dhigtid oo dadka qaar la yaabaan **"**Eesh qiyaasak waar wadnahaaban uga baqay**."**

7. **Ciyaar dhaqameed:** Ciyaar dhaqameedku waa qayb aad u mihiim ah oo ka mid ah Suugaanta Soomaalida. Waxaana inta badan la qabtaa gooraha xuska ama xafladuhu ay jiraan sida madalaha arooska ama madasha lagu abaabulayo duulaanka, sidoo kale waxa lagu soo bandhigaa gooraha wadaniyada la

muujiyo. Waxa kale oo ay yahiin meelo kulmiya barbaarta gayiga ku wada nool oo xilliyada guga ah ayaa lagu caweeyaa. Ciyaaraha dhaqanku way badan yihiin waxaana ka mid ah Waalo, Wiglo, Hirwo, Dhaanto, Batar, Jaandheer, Heello, Bariyo,Saylici, Shandhaco, Beerey, Shoobe IWM.

Ciyaarahaasina waxa ay leeyihiin munaasibado kala duwan oo la qabto tusaale ahaan:

- **Beerreyda** waxa la qabtaa xilliyada **barwaaqada** ah.
- **Shoobeha** waxa loo qabtaa madadaalinta **boqorada**
- **Wigladu** waa ciyaar **haasaaweed** dhallinyaradu isugu duurxusho.
- **Shandhacoda** waxa la qabtaa xilliyada **arooska.**
- **Waaloda** waxa ciyaara geeljiraha xilliga **caweyska**.
- **Jaandheerta** waxa la abaabulaa xilliyada **dagaalka**

8. **Hal-qabsi**: Waa hadal uu qof yidhi amin.Hadalkaas oo la soo qaato marka la arko arrin u dhaw ama la mid arrinkii uu hadalka qofku ka yidhi.Waxaa ka mid ah halqabsiyada caanbaxay kii Cigaal Shiidaad ee ahaa *"Geedyahaw ma waxa aan ku mooday, mise waxa aad noqotay, mise waxa aan loo noqon doonin?"*.

Sidoo kale Halqabsiyada waxa ka mid ah eraygii Suldaan Diiriye ee ahaa *"Waayeel ha gurinee wax aqoon gura"*.

9. **Hal-ku-dheg**: Waa eray uu qof had iyo goor isticmaalo sida "*Ta rabbay noqon"* ama *"Waar dhago quustee indhoow maxaad maqasheen"*.

10. **Hal-kula-bax:** Hal-kula-baxu waa shay aan hadlin, laakiin Soomaalidu ay wax kula baxdo ama ay ka dhigto mid hadlay. Tusaale ahaan halkula baxa waxa ka mid ah:

- Dhurwaa ayaa hadlay oo yidhi *"Ma anigaan roorayn, mise raybadkii baan raybadkii ahayn, mise rimaygu ka soo dhacdii ayaan run sheegahayn"*. Waynu ognahay in aan Waraabuhu hadal laakiin Soomaalida ayaa hal kula baxday.
- Halkulabaxa waxa ka mid ah Geed ayaa hadlay oo yidhi *"Gudin yahay haddaan badhkay kugu jirin imaad gooyseen"*.Waan

wada ognahay in aan geedku hadal laakiin Soomaalida ayaa hal kula baxday geedka hadalkiisa.

4.2 Hana-qaadkii Maansada Soomaaliyeed

4.2.1 GUMAYSTAHA KA HOR(… … ….-1884)

Maansada Soomaalidu waxa ay la bilaabantay dhalashadii luqada Soomaaliga, laakiin luqada oo aan qornayn darteed maansooyinka la hayaa waa qaar la curiyay qarnigii siddeed iyo tobnaad ama intii u dhaxaysay 1700-1800 Taariikhda miilaadiga ah. Xilligaas waxa ibo-furnaa samaynta gabayada iyo geeraarada iwm. Maansooyinka la sameeyaana waxa ay u badnaan jireen qaar ka hadlaya reer guuraanimada iyo dagaaladii dhex mari jiray qabiilada Soomaaliyeed iyo mawduucyo kale oo khuseeya nolosha aadamaha. Waayadaas gumaystaha ka hor waxa loo yaqaanaa '**Waayadii dahabiga".** Ragga maansada qayb libaax ka qaatay xilligaasna waxa ka mid ah:

- Garaad Xirsi Garaad Faarax oo loo yaqaanno "Wiil-Waal" oo ku noolaa agagaarka Jigjiga.
- Raage Ugaas Nuur oo ku noolaa Carro-ogaadeen
- Muxumed Liibaan Jadeer oo ku noolaa agagaarka Hargeysa, waxaana Muxumed in badan ku hal-qabsada Cabdilaahi Timacadde
- Xirsi-Boqonlow, oo ku noolaa dhulka "Reserved Area"

Iyo qaar kale oo badan.

WAAYADII GUMAYSIGA IYO XORNIMO DOONKA(1884-1960, 1884-1977)

Waa xilligii ay Soomaalidu gashay gacanta gumaystaha reer Yurub ee dhulkii Soomaalidana loo qaybiyay shanta qaybood ee kala gadisan. Maansada xilligaasna waxa u xoog badnaa suugaantii Ingiriiska lagaga soo horjeeday iyo suugaantii xornimo doonka ahayd. Sidoo

kalena waxa jiray silsilado maanseed ku qotomay xifaaltan qabiil oo dhex maray abwaanada Soomaalida sida silsiladii Guba.

Waayadan Gumeysigu Taariikh ahaan way ku kala duwanayd dhulka Soomaalida, tusaale ahaan:

Waayadii Gumeysiga ee Soomaalida uu Talyaanigu haystay, waxa ay noqonaysaa 1884-1960
Waayadii Gumeysiga ee Soomaalida uu Ingiriisku gumeysan jireyna, waxa ay noqoneysaa 1884-1960.
Waayadii Gumeystuhu gacanta ku hayay Jamhuuriyadda Jabuutina waxa ay noqonaysaa 1884-1977.
Dhulalka Soomaalidu degto ee Ogaadeeniya iyo NFD, ma ay helin xornimo, goboladaasina waxa ay noqdeen dhulal ka tirsan oo illaa hadda ay maamulaan dalalka Kenya iyo Ethopia.

Ragga xilligaas gumeysiga iyo xornimodoonka aadka loo xasuusto waxa ka mid ah:

- Sayid Maxamed Cabdulle Xasan
- Faarax Nuur
- Qamaan Bulxan
- Saahid Qamaan
- Salaan Maxamed Aadan “Salaan-Carrabay”
- Cabdi Warsame Baanje ‘Cabdi-Gahayr”
- Maxamed Cumar Dage
- Cusmaan Hande
- Carraale Axmed
- Cali Cubeesh
- Cabdi Buubaal
- Cumar Cali Qaash(Cumar-Hadalle)
- Cali Jaamac Haabiil
- Maxamed Nuur Fadal
- Cumar Maxamed “Ustareeliya”
- Qawdhan Ducaale
- Ismaaciil Mire Maxamed

Iyo abwaanno kale oo aad u tiro iyo qiimoba badan oo aan halkan ku sheeganayn.

4.2.3 Waayadii Madaxbannaanida (1960-2011, 1977-2009)

Suugaanta waayadan la tiriyey, waa mid xambaarsan arrimo bulsho, siyaasad, dhaqan, diin, guubaabo wadaninimo sida gabayadii Xaaji Aadan Axmed 'Af-Qallooc" iyo Suugaan lagaga soo horjeedo iyo suugaan lagu taageersan yahay maamuladii xilligaas jiray. Ragga xilligan aadka loo xasuusto waxa ka mid ah:

- Cabdilaahi Suldaan Timacadde
- Cali Cilmi Afyare
- Xasan Sheekh Muumin
- Maxamed Ismaaciil Baasarce "Barkhadcas"
- Cabdiqaadir Xirsi Yamyam
- Ibraahim Sheekh Saleebaan "Ibraahim-Gadhle"
- Siciid Saalax Axmed
- Cabdi Iidaan Faarax
- Careys Ciise Kaarshe
- Muuse Cali Faruur
- Muuse Aaye
- Mustafe Sheekh Cilmi
- Cabdi-Dhuux Yuusuf
- Cabdilaahi Cabdi Shube
- Abshir Nuur Faarax "Bacadle"
- Cabdi Aadan Xaad "Cabdi-Qays"
- Cabdilaahi Macallin Axmed "Dhoodaan"
- Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasim"
- Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi"
- Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye"
- Jaamac Muuse Meecaad
- Xasan Cilmi Diiriye
- Jiilaal Buraale
- Cigaal Diiriye Cali(Cigaal-Shiilaad)
- Ismaaciil Muuse Xasan
- Cumar Daahir
- Cumar Macallin

Iyo abwaanno kale oo aad u tiro iyo qiimoba badan oo aan halkan ku sheeganayn.

Xilligan waa xilligii ay aadka u xooganaayeen masrixiyadaha ama riwaayaduhu. abwaanada iyo jilaayada riwaayadaha doorka ka qaatayna waxa ka mid ah:

Cabdilaahi Maxamed "Qarshe
Xasan Sheekh Muumin
Maxamuud Tukaale
Maxamuud Cabdilaahi 'Singub"
Xuseen Aw Faarax
Cali Sugulle "Dun-Carbeed"
Saxardiid Maxamed Jabiye
Axmed Saleebaan Bide
Ismaaciil Basbaas
Maxamed Cumar "Huuryo"
Meecaad Miigane Aw Maacaleesh
Xasan Xaaji Cabdilaahi "Xasan-Ganay".
Maxamed Cali Kaariye
Maxamed Aadan Dacar
Boon Xirsi "Bawdyo-Gaab"

Iyo abwaanno kale oo aad u tiro iyo qiimoba badan oo aan halkan ku sheeganayn.

Xilligii dambe ee ay dhacday dawladii dhexe ee Soomaaliya, waxa lagu tilmaami karaa in uu yahay xilligii uu hoos u dhaca ugu balaadhani ku yimi maansada Soomaalida, waayo dadkii ku hawlanaa habaynta, samaynta, ururinta, iyo kor u qaadida maansadu waa ay kala firdheen.

Dad badani waxa ay u socdaaleen qurbaha, qaar kalena waxa ay ku kala baaheen dhulalka ay Soomaalidu dagto ee kala gadisan, taasina waxa ay sababtay in milgihii maansadu hoos u dhaco.

Muddooyinkii u dambeeyay, waxa horumarka, kobcinta, iyo ururinta Suugaanta horseed u noqotay, dadaal aan la qiyaasi karina ku bixisay

suugaanta Soomaalida, Dawlada Jamhuuriyada Jabbuuti, oo daabacday buugaag badan oo suugaaneed.

4.3 Ujeeddooyinka Maansada Loo sameeyo

Maansada curinteeda waxa sababa dareen ku dhashay qofka, Carabtuna waxa ay qofka gabayaaga ah u taqaanaa magac ah 'Shaacir", oo macnihiisu noqonayo kii wax dareemayay, maansooyinka dhaxal-galka ahna waxa lagu tilmaamaa kuwa ka dhashay dareen dhab ah oo ka dheer hunguri, qof-jeclaysi iwm.

Guud ahaana, maansada Soomaaliyed waxa loo sameeyaa ujeeddooyin kala gedisan kuwaas oo ay ugu muhiimsan yihiin lix iyo tobankan qodob ee uu **Aw Jaamac Cumar Ciise** ku soo ururiyay buuggiisa la yidhaahdo **"Hilimida Maansadii Hore Ee Soomaalida**" iyo Dhawr qodob oo kale. Ujeeddooyinka maansada loo tiriyaa waxay noqonayaan guud ahaan kuwan soo socda:

1. **Ammaan**: Waa maanso lagu ammaano cid loo dan leeyahay, la waynaynayo sida, madax, qof la jecel yahay, macallin, hooyo, aabbo iyo qof bulshada ku dhex leh door lama illaawaan ah.

2. **Calaacal**: Waa maanso tiiraanyo ah oo qofku ku qoomamaynayo dhacdo soo wajahday oo xanuun badan ku reebtay, ama uu ku guuldarraystay ama wax uu jeclaa oo uu waayay. Dhacdadaas oo maskaxda qofka kaga tagay murugo iyo niyad xumo.

3. **Faan**: Waa maanso tookh ah oo uu qofku ugu faanayo cid markaas uu u arko in uu ka heer sarreeyo ama uu ku buunbuuninayo awoodihiisa shaqsi ahaaneed isaga oo isu yeelaya awood ka badan awoodiisa.

4. **Hanjabaad**: Waa maanso cagajuglayn ah oo uu qofku ku cabsigalinayo qof ama ummad ama waa maanso uu qabiil ku

cabsigalinayo qabiil kale, si aanay u soo farogelin oo ay uga baqdaan.

5. **Cay iyo Xifaale:** Waa maanso lagu caayayo qof ama qaran ama qabiil ama koox, taas oo la soo bandhigayo sifooyinka xunxun ee cidda maansada cayda ama xifaaleda ah loo tirinayaa ay leedahay.

6. **Dood iyo Ergo :** Waa maanso dood ah oo la isku waydaarsanayo aragti lagu kala duwan yahay ama waa maanso dhexdhexaadin ah oo la rabo in lagu heshiisiiyo laba dhinac oo is haya.

7. **Talo iyo Tusaale:** Waa maanso wax loogu sheegayo qof ama qabiil ama koox ama dad la rabo in la waaniyo oo wax loo sheego ama waa maanso lagu timaamo cid la rabo in wax loo sheego.

8. **Abaal-dhac:** Waa maanso la yaab wadata oo uu tiriyo qofku marka uu abaal ka waayo cid uu wanaag ka sugayay ama uu wanaajiyay oo uu ka filayay dhiggeedii, laakiin ugu jawaabay xumayn aan qabanin.

9. **Waydiisasho**: Waa maanso uu qofku wax ka maqan cid wax ku waydiisanayo taas oo uu sii qaybsamaysa **Baryo** oo ah marka uu qofku waydiisanayo shay cid ka awood badan sida Ilaahay oo kale oo waa maansada Alle bari ga, ama waa maansada uu qofku wax ku wadiisanayo cid u madax ah sida Boqor, Madaxweyne IWM. Waydiisashadu waxa kale oo noqon kartaa '**Codsi**" uu qofku wax ku waydiisanayo dad ay siman yihiin oo aan ka awood badnayn sida saaxiib oo kale.

10. **Farriin:** Waa maanso warsheeg ah oo xog lagu siinayo cid aan markaas warkaas la sheegayo haynin.Maansaduna waxa ay waagii hore ahayd idaacadda warka lagu faafiyo ama lagu baahiyo.

11. **Hal-xidhaale:** Waa maanso daboolan oo aan micnaheeda la sheegin oo ay adag tahay in la furfuraa.Waa maanso caajis

galin ah oo uu hal-abuurku ku muujiyo awood maanso curineed oo heersare ah.

12. **Sarbeeb**: Waa maanso xambaarsan micne ka duwan micnaha muuqda ee sadarada maansada laga dheehan karo.Waa maanso duur xul ah oo iyadoo geel ama faras laga hadlayo loola jeedo rag ama dumar ama waa maanso iyada oo jacayl laga hadlayo loola jeedo ruux.

13. **Habaar :** Waa maanso habaar ah oo Ilaahay laga baryayo in uu masiibo ku rido meel, qof,qabiil ama koox. Waa maanso aanay wanaagsanayn samaynteedu.

14. **Naftii hafar:** Waa maanso uu qofku ku sheegto fal iyo libin aanu lahayn.Waa maanso uu abwaanku ku sheegto guul aanu lahayn sida inuu duullaan ka soo hooyay libin oo uu gamta u joogsaday cadawgii ay is hayeen.

15. **Guubaabo:** Waa maanso kicin ama dajin ah oo la rabo in bulsho arrin lagaga dhaadhiciyo. Bulshada waxa lagu guubaabin karaa in ay dagaal galaan, nabad qaataan, diintooda si wanagsan u haystaan, waxa kale oo ay guubaabadu noqon kartaa maanso ka hadlaysa inay umaddu waxbarashada, caafimaadka, deegaanka ku dadaalaan.

16. **Digasho:** Waa maanso loogu diganayo qolo awood darro la soo daristay oo dagaal lagu jabiyay, masiibo kale ku soo habsatay ,ama geeriyiba ku dhacday.

17. **Amar :** Waa maanso uu qof darajo sare hayaa ku amro cidda uu taladeeda leeyahay sida mid hoggaanku ku amro askarta ama waalidku ku amro ubadkiisa xaajo markaas taagan.

18. **Xikmad:** Waa maanso lagu soo bandhigo xikmad iyo fikirro jira oo cilmi ah

19. **Dhaliil:** Waa maanso lagu sheegayo cid waxqabadkooda la dhaliilsan yahay ama hawl loo diray aan uga soo bixin sidii loogu talogalay.

20. **Maad:** Waa maanso majaajileed uu Abwaanku ugu talogalay in uu ku maaweeliyo bulshada markaas dhagaysanaysa ama uu hadalkiisu mar uun gaadho. Waa maaweelo qorshaheedu yahay in marka ay ummadi maqasho ay qosol raftaan.

4.4 Qeexida iyo Shardiyada Maansada

Erayga "Maanso", waxa loo qeexaa laba hab oo kala geddisan, kuwaas oo kala ah:

1. Hab ah eray bixinta afka iyo
2. Hab ah eray bixinta cilmiga ah.

Maansada waxa lagu qeexaa Af-Soomaali ahaan "Eray ka yimi labada eray, ee maan iyo so, oo la isku daray, marka la isku daro labada eray ee maan iyo so, waxa ay sameeyaan erayga maanso". Erayga "*maan*" waxa uu la micno yahay caqliga ama garaadka dadka, erayga "*so*'"na waxa uu la micno yahay hilibka jiidhka ah. Sidaas daraadeedna, Maanso waa mid ka timi laba eray oo macnahoodu yahay " *Jiidhka Caqliga*", eraygan waxa loo macnayn karaa in ay maansadu tahay hadalka ugu qiimaha badan ee ka soo baxa maskaxda dadka sababtoo ah, jiidhkuba waa ka u qiimo badan hilibka. Mar kalena Maansadu waxa lagu sharixi karaa "*koriyaha maskaxda*".

Abwaannada qaar ka mid ahina, waxa ay soo jeediyeen, in erayga maanso uu ka yimi erayga ah "*Wuu muusooday*", oo markii dambeba loo beddelay erayga ah "Wuu Maansooday". Muusoodku waa marka uu qofku hadlo hadal ku yimi dareen ballaadhan oo qofku dareemo. Maansaduna waa hadal ku yimaadda dareen uu dareemo hal-abuurka maansada allifay.

Kolka loo qeexo habka cilmiga ahna, Maanso waa magac guud oo kulmiya koox ka mid ah suugaanta. Maansada qeexitaankeedu waa: *"Maansadu waa shay leh: Xaraf-raac, Luuq iyo Jaan".* Erayga "*Maanso",* waxa ay isku macno yihiin, erayga "*Tix*", labada eray ee Maanso iyo Tixna, waa qaar isku macne ah, oo isku ujeeddo loo wada isticmaali

karo. In kasta oo ay aqoonyahannada qaarkood xusaan in aanay tixda shari u ahayn mid ka mid ka mid ah shuruudaha aasaasiga ah ee maansada, oo ah xaraf-raaca. Haddii aan sii qeexno saddexdaas shardi ee maansada:

2) **Xaraf-raac:** Had iyo Jeer Maansadu waxa ay ku wada aroortaa xaraf ka mid ah xuruufta Af-Soomaaliga, xarafkaasi waxa uu maansada soo galaa hal mar haddii ay maansadu gaaban tahay. Haddii ay Maansadu dheer tahayna sida gabayga, waxa uu soo noqdaa ugu yaraan Laba mar. Sidoo kale waxa uu xarafku maansada ku soo noqdaa saddex ama afar goor. Waxa ay soo noqnoqashada xarafku ku xidhan tahay awoodda midho samayneed ee hal abuuraha maansada allifaya.

Haddaan Tusaale u soo qaato maanso ay lagama maarmaan tahay in xarafku hal mar ku jiro waxaad ila akhridaan Maansadan magaceedu yahay "Dhugta waxa idiin qoran" ee uu allifay Qoraaga Jaamac Muuse Jaamac taariikhdu markii ay ahayd 2/5/2008. Maansadan Jaamac waxa uu ku dhiirigalinayay Naadiga Akhristeyaasha Hargeysa oo u dabbaal dagayay sanad-guuradii labaad ee ka soo wareegtay aasaaskooda. Sidoo kalena waa dardaaran uu siinayo dhamaan bahda dhalinyarada ee aqoonta ku guda jirta.Waxa uu yidhi Jaamac:

Naadigaan ku dhaatee
Ehel iigu dhow een
Dhab wax u wadaagniyo
Dhallintii Hargeysaay

Maya! dhaha qabiil dhiga
Kulligiin mar wada dhaha
Dhista waxa idiin dana.

Riyadii dhabowdiyo
Dheehdii labeentiyo
Dhuuxii wanaaggiyo
Dhallaankii aqoontow

Maya! dhaha jahliga dhiga
Dhufta qalinka oo dhiga
Dhugta waxa idiin qoran.

Inta dhaadday garashiyo
Dhaayihii dadkaygoow
Dhiiggii naftaydoow

Dhaqashadii tisqaadkiyo
Dhambaalkii samaantow

Dhulkoo wada barwaaqiyo
Dharab xays ku reeboow

Dhawaaq sida wanaag iyo
Timaaddada dhabeeyoow

Dheddig iyo labkiinuba
Bulshadayda dhabar iyo
Dhardhaarraaw tihiine

"Maya"! dhaha qabiil dhiga
Kulligiin mar wada dhaha
Dhista waxa idiin dana.

"Maya"! dhaha jahliga dhiga
Dhufta qalinka oo dhiga
Dhugta waxa idiin qoran.

Maansooyinka ay lagama maarmaanka tahay in uu xarafku labada jeer soo noqdana waxa ka mid ah maansadan uu sameeyay Cabdi Faarax "Cabdi-Malaw" ee kaftanka iyo qosolka leh.Waxa la yidhi "Cabdi-Malaw ayaa subax ka habsaamay shaqadii uu lahaa, hurdo la tagtay darteed. Kaddibna intii aan la canaanan ayuu isku furtay maansadan gaaban", waxaanu yidhi:

Sidii bahalkii Biriishka ka dhacay
Birtiyo jiidhay labada baallood

Baraarugay goor la soo baxay
Ilaahay ballankii barqaan kacay

Maansooyinka qaar ka mid sida heesta kebedda waxa shardi ah in xarafku soo noqdo saddex jeer ugu yaraan, maansada Kebbedu waa maansada ugu meeriska dheer maansooyinka Soomaalida, sida aad ka arki kartaan tuducanba:

Koronkor cuni maynoo, **k**ariba maynee, **k**aruur geel ma la hayaayeey.

Sidoo kale Maansooyinka uu xarafku soo noqdo saddex jeer, Laakin aanay lagama maarmaan ahayn in xarafku saddex goor soo noqdo, waxa ka mid ah Gabaygan uu sameeyay Sayid Maxamed Cabdulle Xasan:

Hanfi iyo hunriga soo dhiciyo, hinif dabayl baa leh
Hanqadh iyo hillaac bililigliyo, halalac roob baa leh
Cir habqamay xareed laga hirqaday, haradiggeed baa leh

Xiin hawle iyo heego huran, hogol daruuraa leh
Hirdoogliyo caleen hamasha iyo, habatac ciid baa leh
Maal hooray ciir laga hanfaqay, seben hagaagaa leh

Maanso uu xarafku ku soo noqdo afar goor mar walba waxa ka mid ah Gabaygan aan sameeyay, ee aan u sameeyay qof igu lahaa waxaad iska daysaa gabayada samayntooda iyo faaqidooda anna aan leeyahay *"Dayn mayo gabayga illaa aan ka jibbo keenee in uu jid wanaagsan ila maro, cibaadadana aan ku wanaagsanaado Ilaahay ii bari"*. Gabaygan oo soo baxay 4/December/2008 ayaa ah kan kooban:

Dahab iyo haddii ay dad lacag, doolar adag dooni
Dar kaleeto darajiyo aqoon, dibad u doonteenba
Duhnigayga deexdii gabaa, doorkan daar ku lehe

Anigoo an daabicin diwaan, duulkan wada deeqa
Dibad iyo dalkeeniyo dunjiga, dagalka Soomaali
Anigoon dabuub wacan u dirin, doodna ugu deeqin
Ka dilaacshay daahee ha dayin, daynta maansada e

Daayin inu dariiq door leh iyo, daw san igu raacsho
Dikrigoon dushaas iyo dahriga, abid ku soo duubto
Diintoonan daayicin docdeed, oo an dadaal siiyo
Duco igu dar dalandoolka waan, sii diyaar ahaye

Maanso laba xaraflay ah "Daahfur Maanseed Cusub".

Intii aan ku guda jiray barashada iyo wax ka ogaanshiyaha maansada. Waligay ma arag maanso inta ay ku bilaabanto laba xaraf haddana ku dhamaata laba xaraf.

Laakiin waa aan arkay tuduc ka mid ah maanso oo leh laba xaraf-raac, sida tuducan ku jira gabayga uu magaciisu yahay "Geela", oo uu sameeyay Cumar Maxamed "Usteeliye", tuduca ayaa ah;

Waa dhabarka seedaha ku yaal, sidigta Dhaameele

Tuducani waxa uu wataa laba xaraf-raac oo kala ah "**Dh iyo S",** laakiin gabayga Geelu guud ahaan waxa uu leeyahay hal xaraf-raac oo ah "Dh".

Badhtamihii sanadka 2008 ayaan arkay Maanso ay ku jiraan dhammaan tuducyadeeda laba xaraf, tuducyadeeduna ay ku wada bilaabmayaan kuna wada dhamaanayaan laba xaraf-raac oo kala gooni ah. Maansadan waxa sameeyay Abwaan Axmed Saleebaan Xirsi, oo ah hal-abuur dhalinyaro ah, kana mid ahaa wakhtiga uu Maansada sameeyay, ardayda wax ka barata dalka Suudaan.
Abwaan Axmed waxa uu maansadiisa ku qotomiyay oo uu waafajiyay labada xaraf ee ***"Deel"*** iyo ***"Shiin".*** Tuduc kasta oo ka mid ah maansada uu Abwaan Axmed sameeyay waxa lagu arki karaa, kuna jira, labadaas xaraf-raac ee Deel iyo Shiin.
Sidaas daraadeed, Axmed waxa uu mutaystay in uu ahaado abwaankii koowaad ee Soomaali ku maansooda ee sameeya maanso laba xaraf-raacdo ah. Maansada Axmed oo la yidhaahdo "*Dun iyo Shaal*" oo uu Axmed kaga qayb galay silsilad Deelley ahayd oo ka socotay mareegta wararka iyo arrimaha bulshada ee www.hadhwanaagnews.com,

Daahfur-Maanseedka farshaxanka ah ee uu soo kordhiyey Abwaan Axmed Saleebaan Xirsi, waa guul suugaaneed mawduuca maansada ah, oo u soo hoyatay guud ahaan hal-abuurka dhallinyarada ah ee nool qarniga koow iyo labaatanaad (21).
Tuducyada iyo erayada maansada ***"Dun iyo Shaal"*** waxa ay noqonayaan kuwan:

Shaaruba dukhaanlihii
Shicibkaaga dala´saday
Shilkii looga daw galay

Wixii diric shahiidiyo
Wixii doob ku shaaxiday
Dulmiguu sharaystoo
Darajadii shanjeer kacay
Dalkiibuu ka shidanyoo

Dadku muu shidaysane
Daacad bay u shifaysteen

Ma dareenkii shidayaa
Dus-dus iyo shaxaad iyo
Dufan lagu shifeeya ?

Dulucdeeda sheekadu
Waxay daarantahay sheeg?
Ma dil iyo shirqooliyo
Doogiyo shilbaa dhacay ?
Ma duumiyo sharbaa jira?

Dadwaynii shibtuu galay
Ragna dogobyo sii shiday
Dahab bay ku shiilan
Shan kun oo dillaalbaa
Ilaa Shaariqiyo Dubay
Sheerkooda daabula

Dulmibaa i sheeg yidhi
Dibintaa ka sheex tidhi
Danbaa tidhi ha shaacine
Maansadan dun iyo shaal
Dadka ugu shafeecoo
Dareenkii shidaadiyo
Dookhooda shaandhee

Maansadu duciyo sharaf
Waa dubaalad shidanoo
Shicibkiyo dadwaynaha
Dareenkii shidaayiyo
Danta loogu sheegaa

Ninka deel ku shawriyo
Ninka shiin ku daba gala
Docna lama sharaystoo
Caawaba shaxdaan degay
Shaqalkiyo dawaarkii
Shicirkeenu daayimay
Shay buu ka duwantahay
Sharciguna ma diidana

Shaacirkuna ma daalee
Kolba sheeko dedan iyo
Dabin iyo shirqoolbuu
Intuu sheed ka daawado
Duur xulkeeda shiilaa

Anna shayga ii daran
Dulmar aan ku sheegee
Duudsigii shalaytiyo

Shaamareerka daba yaal
Shiinaw daryeelkii
Shalaw buu ka duuloo
Da,yartiyo shabaabkii
Darxumay la shoogeen

Shaadh ay dabaqableeyiyo
Shamis dayn ku siisay
Shilin shilin u diiqaan

Waxaan doodeey kugu shubay
Sharcigiyo dastuurkiyo
Daacadnimadaad sheegtaa
Danyartiyo shaqaalaha
Da,may shaafiyaysaa ?

Tilmaamo la xidhiidha Xaraf-raaca:

Xaraf-raaca waxa leh dhamaan tixaha kala gedisan, haddii aanay tixdu xaraf-raac lahayn waxa ay noqonaysaa jacbur, haddii uu hal-abuurku ka tago xaraf-raaca, qaladka uu sameeyo waxa loo yaqaannaa "Deelqaaf".

Xaraf-raaca waxa kale oo qaata qaar ka mid maahmaahyada, mana aha shardi in maahmaah kastaa ay xaraf-raac yeelato. Maahmaahyada xaraf-raaca leh waxa ka mid ah:

- Qunyar socde, qodixi ma mudo
- Far kaliyi, fool ma dhaqdo

Xaraf-raaca waxa kale oo yeesha qaar ka mid ah erayada lamaaneyaasha isu raaca sida

- Dooc iyo dareen,
- Dixi iyo dareen,
- Raq iyo ruux
- Jiif iyo joog
- War iyo wacaal,
- Lud iyo laf ,
- So iyo saan.
- Xilo iyo xoolo

Faaiidooyinka Xaraf-raaca

1. Xaraf-raacu waxa uu qurxiyaa hadalka.
2. Xaraf-raacu waxa uu fududeeyaa xasuusta.
3. Xaraf-raacu waxa uu muujiyaa hodantinimada afka,

Xaraf-raaca Maansada

1.Erayga uu hal-abuurku ku adeegsanayo maansadiisu waxa uu noqon karaa eray culus ama eray fudud sida tuducan, oo marna uu Ismaaciil Mire uu ku adeegsaday eray culus, kolna eray fudud

"*Ragoow kibirka waa lagu kufaa, kaa ha la ogaado*"

Tuducan waxa uu Ismaaciil Mire ku adeegsaday qaybta hore ee Gabayga laba eray oo culus, kuwaas oo kala ah "Kibirka iyo Kufaa", qaybta dambe ee Gabaygana waxa uu ku adeegsaday xaraf fudud oo ah "Kaa".

2 .Si cabbirka maansadu u ahaato mid sax ah, Abwaanku waxa uu dheereeyaa erayada qaarkood, qaarna waa uu gaabiyaa. Tusaale ahaan waxa aynu u soo qaadan karnaa Gabaygan uu Cabdilaahi Suldaan "Timacadde" dheereeyay erayada ku jira tuducan ee ah ee kala ah "dhacaayaa, oo marka aan la dheerayn noqon lahayd, dhacaya" iyo erayga "diraayaane, oo marka aan la dheerayn noqon lahayd, dirayaan", labada erayba waxa uu Abwaanku ku daray shaqallo dheeraad ah, si aanu habdhacca Gabaygu u lumin. Abwaan Timacadde waxa uu yidhi:

"*Dabaylaha dhacaayaa warbay, kala diraayaane".*

Sidoo kale haddii uu eraygu dheeraado si cabbirka maansada loo ilaaliyo, abwaanku waa uu soo gaabiyaa erayada qaar ka mid ah sida gabaygan uu sameeyay Abwaan Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin", Axmed tuducan waxa uu soo gaabiyay erayga, waxa, isaga oo ka dhigay, wax, si habdhacca Gabaygu aanu u qalloocan, laaxinna galin. Axmed-Qaasin waxa uu yidhi:

"Wax la yidhi gol daayeer cabbay, habari gaysaaye"

3.Erayga xaraf-raacu uu ku jiraa waxa uu weedha ka gali karaa meelo kala gadisan oo ah xagga hore, xagga dhexe iyo xagga dambeba. Eraygii xaraf-raaca watay oo ku jira bilawga tuduca maansada, waxa tusaale ah Maansadan uu sameeyay Abwaan Xasan Xaaji Cabdilaahi "Xasan-Ganay" ee Sayla, sadaradeedana ay ka mid yihiin:

"Sayloo gu'yaal badan
Soo baxa kaliishii
Seelseelna loo dagay
Sannad geelu badi dhalay"

Erayga xaraf-raacu uu ku jiraa waxa uu gali karaa xagga dhexe ee maansada, waxa taas tusaale u noqon kara gabaygan uu allifay Abwaan Cabdirisaaq Aw Cilmi Xuseen, ee ah:

"Shacbigana ka gees iyo ka gees, godan kastuu joogo
Hambalyaa la gaadhsiinayaa, guud ahaanimo"

Erayga xaraf-raacu uu ku jiraa waxa uu maansada tuduceeda ka gali karaa halka dambe, tusaalena waxa ah maansadan uu sameeyay Abwaan Axmed Ducaale "Xiiray" ee ah

"Waan ku doonayaayoo
Anigana daraadaa
Indhihii i daalee"

Laakiin waxa lagama maarmaan ah in xarafku erayga kaga jiro mar walba xagga u horreysa.

4. Xuruufta aanay ku dhammaan erayada Soomaaliga ahi waa xarafyada kala ah **J, K** iyo **T,** erayadan Af-Soomaaligu kuma dhammaado hadii aanu shaqal ka dambayn.

Farqiga u dhexeeya Xaraf-raaca iyo Qaafiyada

Qaafiyadda micnaheedu waa in maansadu ay ku wada dhamaato xaraf isku wada mid ah, waxaana qaafiydada leh luqadda Carabiga iyo luqado kale oo ay ka mid yihiin luqadaha lagaga hadlo Geeska Afrika sida Oromada, Canfarta iyo qaar kaleba. Xaraf-raacuna waa in erayada maansadu ay ku wada bilaabmaan xaraf isku mid ah. Sidaas darteed afkeennu malaha Qaafiyadda ee waxa uu leeyahay Xaraf-raac. Luqadaha lagaga hadlo Bariga Afrika sida Oromada, Canfarta iyo kuwa kaleba waxa ay dhammaantood leeyihiin Qaafiyad,mana laha Xaraf-Raac. Af-Soomaaliga oo qudha ayaa leh xaraf-raac. Waxaana hadda la baadhayaa sababta uu Af-Soomaaligan arrinkan ugaga gadisnaaday luqadaha ay dariska yihiin.

Maansadu haddii aanay lahayn xaraf waxa loo yaqaannaa "**Jacbur**". Qalad-maanseedka dhaca haddii laga tago Xaraf-Raaca waxa loo yaqaannaa "Deelqaaf". Jacburka waxa inta badan sameeya

Maansoyahanada aan lahayn karti badan oo ay ku sameeyaan Maanso Xaraf leh, ama maansoyahanada aan garan karin muhiimada uu xaraf-raacu u leeyahay qaab-dhismeedka maansada.

Sidoo kale abwaannada qaar ayaa Jacburada u sameeya in ay maad iyo madadaalo ka dhigaan. Iyaga oo samayn karaya Maanso xaraf leh. Abwaanada u sameeya Jacburka in lagu madadaaloodo waxa ka mid ah Abwaan Cabdilaahi Macalin Axmed "Dhoodaan" iyo Abwaan Maxamed Ibraahim Warsamse "Hadraawi" iyo abwaanno kale.

Jacburka Abwaan Dhoodaan, oo aad ugu caanbaxay samaynta Jacburka waxa ka mid ah:

"Qalanboosh seedigay buu ahaa, beerka lagu jiidye
Waagaan lacagta siiyeen, gabadha waydiistay
Lacagta ha iska qaatee hadduu, gabadha ii diido
Xadhigaas la sheegsheegayaa, maba yimaaddeene
Sidii garaw cammuud lagu daroo, gawska lagu ruugay
Saliidyoodayeey waxan ka baqay, inay i toogtaane
Gargariirka waxa iigu wacan xadhigay sheegeene"

Jacburka Hadraawi-na waxa ka mid ah:

"Carmal yahay garoob yahay
Qaadka adigu naayaa
Iima aanad qaadinee
Qushbal baan ku leeyahay
Maxaad aniga huunooy
Ii qashiinsanaysaa
Maba cunno hadhuudhkee
Maxaad nagu hafraysaa
Naagtan waalan yaa qaba?
Horta mee ninkeedii?
Muxuu noogu soo diray?
Saw kabuu ma gooyaan?"

Maanso kooban oo jacbur ah, ayaa waxa sameeyay Suxufiga Maxamed Xasan Cali 'Weji". Jacburka Weji oo ah mid kooban oo kaftan ah ayaa u dhigan sidan:

"Weji waa nin wanaagsan
Ma yaqaanno dagaalka
Marka uu se xanaaqo
Shaarubkaa dhaqdhaqaaqoo
Dhulkaasuu ka dusaayoo
Cirkaasuu u baxaayoo
Dad waxay is arkaanna
Digaduu ka dhigaa"

Marka laga hadlayo xaraf-raaca maansada, maansooyinka laga sameeyo xaraf-raac ah "shaqalada", shardi uma aha abwaanka samaynaya maanso ku qotonta shaqalada in uu qaato hal-shaqal, waxaana u banaan abwaanka maansadiisa ka allifaya xaraf-raac ah shaqal, in uu adeegsado dhammaan tobanka shaqal ee Af-Soomaaliga ku jira.

Gabay Dheega ama Gabay Xayirka

Waa gabay intuu qofi ujeeddo u tiriyey uu qofkale ujeeddo kale u sameeyo iyadoo habdhacii iyo luuqdii aanay is badelin. Haddaba waxaan halkan ku soo qaadanayaa tusaale ku saabsan farshaxannimadaasi oo aan ka soo xigtay buugga "Diiwaanka Qosolka". Waxaan ka soo qaadanayaa midkiiba tuduc. Waa marka hore ee gabay uu tiriyey nin la odhan jirey Ilaahay ha u naxariistee Cumar Ustareeliya oo uu geela u gabyaayey, kuna ammaanayey, ayaa waxaa gabaygiisii geela dheegaya nin isaguna Reer Hargeysa caan ku ahaa oo hantiile iyo maqaaxi aad caan ugu ahaan jirtey maraqii karaaciinka ku lahaa magaalada Hargeysa.

Ninkaas oo qudhiisu gabyaa ahaa waxaa isagana Ilaahay naxariistii janno ha ka waraabiyee la odhan jirey Ismaaciil Rusheeye. Dadku waxay aad ugu garanayaan masaajidkan weyn ee Rusheeye ee ka soo horjeeda cajab badhtamaha Hargeysa ee ilaa maanta magaalada Hargeysa ku yaalla oo ay isaga iyo awlaaddiisu dhistay. Ka dibna isaga loogu magac daray.

Bal markaa laba tuduc aynu eegno siduu gabaygii hore ahaa iyo sida kii uu dheegtay noqdayba.

Gabaygii Cumar Ustareeliya tuducii ku jirey wuxuu ahaa;

"Dhool caano laga soo lisay, oo yara dhanaanaday
Marka aad dhadhamisaa jidhkaba, dhididku qooyaaye
Nin dhadhamiyey wuu garanayaa, dhul ay qaboojaane
Waxa dhaba habeenkaa ninkii, dhama galxoorkooda
Qodxihii dhalaanimo ku galaa, kaaga soo dhiciye".
Cumar Ustareeliya

Ismaaciil Rusheeye waa kan gabay dheeggiisii uu ku sameeyey gabaygii geela ee Cumar Austraaliya, isaga oo Ismaaciil Rusheeye halkii geela u adeegsanaya oo ku bedelay Makhaayadiisii Hargeysa ku taalay ee caanka ku ahaan jirtay maraqii karaaciinka, halkii caanahana uu Cumar Ustareeliya gabaygiisa ugu jirtayna, uu Ismaaciil Rusheeye ku bedelayo maraqii karaaciinka ee uu Makhaayadiisa ku samayn jiray isagoo si farshaxnimo iyo layaab leh u dhigay. U malayn maayo xayaysiis uga wanaagsanaa kani in cid kale u sameeyn karaysay Ismaaciil Rusheeye makhaayadiisa xilligaasi. Hibadii gabayaanimada ee Ilaahay siiyey ayuu si qurux leh u isticmaalay. Waxaanu yidhi **Ismaaciil Rusheeye**;

"Dhuuxaa karaaciinka iyo, dhiraha qooshaayo
Nin dhadhamiyay wuu garanayaa, dhul ay qaboojaane
Dhufsashada malqacadda farxadi, kugu dhammaataaye
Dhumuq markaad ka siisaa jidhkaba, dhididku qooyaaye
Waxa dhaba habeenkaa haddii, roodhi lagu dhuuqo
Qushkii dhallaanimo kugu gala, kaaga soo dhaca e"

2. **Luuq:** waxyaabaha maansada lagu garto waxa ka mid ah luuqda ama habka loogu dhawaaqo oo Maansadu waxa ay leedahay qaab loogu dhawaaqo oo ka duwan qaabka hadalka aan Maansada ahayn loo yidhaahdo. Waxa inta badan taas laga arkaa luuqda gaarka ah ee ay Abwaanada qaar ku akhriyaan maansooyinkooda. Abwaanada luuqda gaarka ah ku caanka ah waxa ka mid ah: Cabdilaahi Macalin Axmed "Dhoodaan", Careys Ciise Kaarshe iyo Cabdilaahi Suldaan Timacadde.

Sidoo kale luuqda maansada waxa lagu qaadi jiray hees hawleedyadii kala duwanaa ee loo adeegsan jiray in lagu illaawo dhibta hawsha uu qofku hayo. Hees hawleed kastaana waxa ay lahaan jirtay luuq u gaar ah. Luuqdu waxa ay ka mid tahay waxyaabaha nuxurka ama dhadhanka macaan u sameeya maansada. Haddii aanay maansadu qaadan karin luuq, waxa ay noqonaysaa mid aan buuxinin mid ka mid ah shuruudihii maansada.

3. **Hab-raac(Habdhac, Jaan)**: Hab-raaca oo ah cod ka kooban jiib iyo jabaq ay cagta iyo gacantu samayn jireen, wakhtigan xaadirka ahna lagu macneeyo dananka ay sameeyaan aaladaha muusigu, ayaa iyaduna ka mid ah astaamaha ay maansooyinku leeyihiin, oo waa ay adag tahay in hadal loo sameeyo Jaan iyo jiib.

Hab-raaca, Hab-dhaca, ama jaanta waxa kale oo lagu macnayn karaa, “In ay Maansadu leedahay dherer ama cabbir sugan, oo ay isleegyihiin wadarta erayada Maansada ee bayd walba ku jiraa”. Haddii aanay Maansadu lahayn baydad is leeg bilaw illaa dhammaad, ama uu abwaanka maansada samaynayaa maansadii isugu geeyo tixo aan isku god ahayn, waxa la odhanayaa “waa maanso leh cabbiro is badbadalaya”, u guuritaanka uu abwaanadu guuraan bad kale ama god-maanseed kale waxa la yidhaahdaa “bad-guur”.

Haddii uu qallooc galo hab-raaca maansada, waxa dhaca qalad loo yaqaanno “Laaxin”, haddii uu maansada laaxin galona, maansadu waa ay ka baxaysaa shuruudihii tixda lagu yaqaanay, maansaduna waxa ay noqonaysaa tiraab.
Habka erayada la isugu xidho, habdhacana loogu sameeyo, ayaa hadalka qaarna ka dhiga tix, qayb kalena ka dhiga tiraab. Tusaale ahaan bal eeg weedhan loo dhigay saddexda hab ee kala geddisan:

1. Dalkeenni wuu horumaray
2. Horumaar dalkeennii
3. Dalkeennina horumaryoo

- Weedha koowaad malaha habdhac, sidaas daraadeed waa tiraab

- Weedha labaad iyo weedha saddexaad habdhac ayay leeyihiin, sidaas daraadeed waa tix. Weedha labaad waa tix jiifto ah,
- Weedha saddexaadna waa tix Saar (Baarcadde) ah.

Maansada iyo adeegsiga dareennada

Bani-aadamka iyo nooleyaal kale oo badaniba waxa ay leeyihiin xubno u qaabilsan dareenka tiradooduna ay tahay shan xubnood, kuwaas oo kala ah:

1.Indhaha, oo qaabilsan dareenka araga
2.Dhegaha, oo ka masuul ah dareenka maqalka
3.Sanka, oo u xilsaaran dareenka urta
4.Carrabka, oo lagu ogaado dareenka dhadhanka iyo
5. Maqaarka (Dubka), oo ah shaqadiisu tahay dareenada taabashada, qabawga, kulaylka, cadaadiska iyo xanuunka.

Waxa jira dareen lixaad oo la sheego in ay dadka qaarkood leeyihiin kaas oo lagu tilmaamo ”garba-salaaxda”, afka Ingiriisigana lagu yidhaahdo ”Extra Sensory Perception”. Laakiin dareenkaas lixaad kuma jiro dareennada mawduucani waafidayo

Wax kasta, cilmi kasta, ama dhacdo kasta oo ku jira/jirta maskaxda dadku waxa ay maskaxda ku gashay iyada oo soo martay marka hore shantaas dareen mid ka mid ah. Tusaale ahaan, in cadarku udgoon yahay sanka ayaynu ku barannay, sidaas ayaanay maskaxda ku gashay oo uu maankeennu ku xasuusan yahay udugga cadarka, in dabku kulul yahay maqaarka ayaynu ku ogaanay sidaas ayaanay maskaxda ku gashay oo uu maankeenu ku xasuusan yahay kulaylka dabka, in dhirtu midab cagaar ah leedahay indhaha ayaynu ku ogaanay sidaas ayaanay maskaxda ku gashay. In malabku macaan yahay, dacartuna qadhaadh tahay, waxa aynu ku ogaannay dhadhaminta carrabka, sidaas ayaanay maskaxda loogu gudbiyay, looguna kaydiyay.

Abwaannadu marka ay maanso samaynayaan, waxa ay maansadaas fahamkeeda sii mariyaan waxyaabo uu qofku ku garan karo shantaas dareen ee aynu soo sheegnay, haddii aanu qofku lahayn

dareennadaas mid ka mid ah waxa adkaanaysa in laga dhaadhiciyo fahamka waxyaabaha qaar, tusaale ahaan sidee ayaad qof indho-laawe ah, oo aan waligii waxba arag, ugu sharxi lahayd farqiga u dhexeeya midabada?. Sidee ayaad qof aan waligii waxba urin ugu sharixi lahay udgoonka cadarka ?.Kuwaasi waa qaar aan suurtogal ahayn.

Haddii aynu soo qaadano, abwaanno kala adeegsanaya shantaas dareen, waa kuwan:

1.4 Adeegsiga dareenka maqalka

Dareenka maqalku waa ka u badan ee aynu ku helnay aqoonta aynu naqaano, waayo waxa ay sheeko ahaan ku haynaa taariikh ku salaysan markii uu Ilaahay abuuray Aadam illaa maanta.

Abwaannada adeegsaday dareenka maqalka waxa ka mid ah Raage Ugaas. Gabayga uu Raage ku adeegsaday dareenka maqalka waa gabayga uu magaciisu yahay "Sida koorta yucub", oo uu tiriyay mar uu libaax cunay afadiisii Faadumo/Xaddiyo. Raage isaga oo fasiraya taahii habeenkaas geerida afadiisa ka baxay, waxa uu soo qaatay tusaaleyaal sanqadh ah oo dadku garan karo, sida dhawaaqa koorta, sawaxanka reeraha guuraya, cabaadka iyo isu ololka geela ka-reebka ah, waxaau yidhi:

"Sida koorta yucub oo la sudhay, koromo buubaal ah
Ama beelo kaynaan ah oo, kor u hayaamaaya
Ama ceel karkaarada jabshiyo, wabi karaar dhaafay
Ama geel ka reeboo nirgaha, laga kaxaynaayo
Xalay kololo'aygii ma ladin, kaamil reeruhuye".

Waxa kale oo ka mid ah hees-sabaaleed ay hooyadu ku muujiso sida ay u faraxdo marka ay maqasho codka dhalashada dhallaankeeda taas oo ah:

"Markaad dhalateed dhawaaqday
Markuu dhulku kuu iftiimay
Dheegoow dhaxan bayga duushay"

Maansooyinka la xidhiidha dareenka maqalka, waxa fasirkooda iyo nuxurkooda fahmi kara qof dhago leh.

2.4 Adeegsiga dareenka arraga

Xasan Yuusuf Qawdhan, waxa uu ka mid yahay abwaannada adeegsaday dareenka arraga, oo ah dareenka labaad ee aynu ku helno aqoonta u badan. Yuusuf isaga oo suuraynaya quruxda uu leeyahay qofka uu maansadan kula hadlayay, kuna shabahaya haro biyo leh, dhinaceedana doog iyo ubax ku yaallaan, waxa uu yidhi:

"Sida haro gimgimanoo
Biyo galac ka leeyiin
Geestaana dooggiyo
Ubaxii is gaadheen
Laga guurin waligeed
Waxad tahay gaddeeddii"

Haradaas biyaha leh iyo ubaxa iyo doogga is gaadhay quruxooda waxa fahmi fara qof indho qaba, oo laxaadkiisii arragu u dhan yahay.

3.4 Adeegsiga dareenka urta

Dareenka urta waxa loo adeegsadaa marka la doonayo in la sheego waxyaabo wanaagooda lagu garan karo urta. Maansooyinka lagu adeegsaday dareenka urta waxa ka mid ah heesta Sayla ee uu allifay Xasan Xaaji Cabdilaahi "Xasan-Ganay" ee ay ka mid yihiin erayadani:

"Sideedaan jaleecada
Saxansaxo udgoon badan
Sanka kuula raacaa"

Tusaale kale waxa ah heestan uu curiyay Axmed Maxamed Good "Shimbir", ee ah :

"Sidii ubaxii
Udgoon badaneey"

4.4 Adeegsiga dareenka dhadhanka

Marka la adeegsanayo dareenka dhadhanka, waxa ay abwaannadu tusaale u soo qaataan, waxyaabo wanaaggooda iyo dhibkoodaba lagu ogaan karo uun dhadhanka. Abwaannada adeegsaday dareenka dhadhanka waxa ka mid ah Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin" oo yidhi:

"Dacartuba marbay malab dhashaa, muudastaa dhabaqe
Waxan ahay macaan iyo qadhaadh, meel ku wada yaalle"

Waxa isna adeegsaday dareenka dhadhanka waxa ka mid ah Maxamed Maxamuud Yaasiin "Dheeg", oo hees ku yidhi tuducan oo ay gabadhi ku luuqayso:

"Inanyahaw dushaadaa
Laygu daadshay malaboo",

Tuducaas ay gabadhu qaadayso waxa jawaab u ah, tuducan uu wiilku qaadayo:

"Inanyahay dushaadaa
Lay mariyay dacaroo"

Macaanka malabka iyo dhabaqa iyo qadhaadhka dacartaba waxa lagu ogaan karaa dhadhanka carrabka.

Abwaannada adeegsaday dareenka dhadhanka waxa ka mid ah Cumar Maxamed "Usteeliya", oo sharxayay macaanka caanaha geela, waxaanu yidhi:

"Dhoor caano laga soo lisoo, yara dhanaanaaday
Nin dhadhamiyay waa garanayaa, dhul ay qaboojaane
Goortaad dhantaabaa jidhkaba, dhididku qooyaaye
Waxa dhaba habeenkaa ninkii, dhama golxoodkeeda
Dhallaanimo qodxii kugu mudaa, kaaga soo dhaca'e
Ragga laxaha sii dhawrayoow dhaqasho waa geele".

5.Adeegsiga dareenka taabashada

Dareenka taabashada waxa ka mid ah gabaygan ka warramaya dhibta waxyaabaha kululi maqaarka u leeyihiin ee ah:

"Ma anaa intaan fuud kabbado, kor uga soo booda
Dibnahayga ma anaa kulayl, kaw iskaga siiya?"

Hummaageyn: Milicsiga Maldahaneha Soomaaliyeed

Afmaladaha Maansada, mararka qaarna loogu yeedho 'Hummaageyn'; waa qalab-suugaaneed af weliba leeyahay, loona adeegsado fududeynta gudbinta farriimaha, sahlidda is-fahamka iyo kasbashada laabo kaa sii jeeda. Waxay fududeeyaan xidhiidhka (Communication) aadamaha u dhaxeeya, nooc uu yahayba. Waxay iidaamaan, koosaaraan, far-shaxannimo iyo bilicna ku gaasheeyaan hadalka/hawraarta. Marar bandanna, waxay badhi-taaraan hab-dhigaalka asluubeen ee tiraabta/tixaha. Xabbaadheennan, waxaynu si dul-ka-xaadis ah ugu miliilici doonnaa, hal iyo halal ka mid ah, mucda iyo muceedyada af-sandahaneha Maansada.

1. Ekeysiin (Smile):

1.1: Qeex:

Ekeysiinta waa qalab la adeegsado marka la doonayo in xidhiidh laga dhexaysiiyo laba shay. Looma jeedo in ashyaa'daas laysku ekeysiinayaa si kasta isugu dhigmaan, waa se inay wax uun wadaagaan. Haddii isku-ekeysiintu u dhaxayso laba shay oo aan la aqoonnin isku-ekeysiini ma dhicin; sida se shardiga u ah, waa inay ka dhaxaysaa laba shay oo midna la yaqaanno, ka kalena aan la aqoon, haddii aanay ka dhexayn labo macruuf ah. Isu ekeysiintu waxay leedahay afar tiir: U Eke,[1] Loo Eke,[2] Qalab[3] iyo Qaab[4]. **U Eke & Loo Eke;** waa muhiim inay mar walba jiraan, **Qalabka iyo Qaabka** se, shardi maaha joogitaankoodu. Ekeysiinta ay afarta tiirba u dhan yihiin waxa loo yaqaannaa **Ekeysiin buuxda**. Si taas hore ka duwan, Ekeysiinta la' mid ka mid ah labada ay bannaan tahay maqnaanshahoodu (Qalab iyo Qaab) waxa la odhanayaa, **Ekeysiin kala dhiman**.

Tusaale: Badda midabkeedu waa sida cirka.

Innaga oo tusaalahaas ku dabbaqayna tiirarka aynu kore ku xusnay;

U Eke: Badda,

Qaabka: Midabkeedu waa,

Qalabka: Sida,

Loo Eke: Cirka.

Haddii aynu inyar kala saafno tusmeeyahaas: Baddu waa **U Eke** oo waa ka loo eg' yahay midabkeeda, Midabku waa **Qaab**; wejiga ay iska shabbahaan badda iyo cirku, Ereyga 'Sida' ee la adeegsaday waa **Qalabka** suurto-geliyay isku-ekaanshahan, halka Cirku ka yahay **Loo Eke** ha midabkiisa baddu u eg'tahay.

1.2. Quruxda Ekeysiinta:

Dhawr marin oo kala geddisan ayaa la raacaa si loo helo Ekeysiin qurxoon. Qaar ka mid ah jidadkaas, bal aynu hoos ku halaanbaynno:

1.2.1. Faahfaahinta Loo Ekaha:

Si loo ficillo-geliyo helitaanka Loo Eke faahfaahsan, waxa la tarmiyaa Loo Ekeha, iyada oo U Ekahana lagu cabbirayo tuducyo aad u kooban.

Tusaale: Mar uu Abwaan C/laahi Suldaan Tima-Cadde, si uu u muujiyo murugo haysatay, adeegsanayay kaalintan, waxa uu U Ekaha ku cabbiray tuduc madiyaysan, halka uu Loo Ekehana ku muujiyay meerisyo badan. C/laahi Suldaan Maxamed waxa uu gabaygaas ku yidhi:

F.G: Meerisyada ku qoran farta jiifta (Italic), waa U Eke, halka inta badan ee kalena ka tahay Loo Eke.

Sida inan mabsuudoo rug wacan, Maalik ku abuuray,

Oo oday masaa'iibi dhaloo, laga mildhaabaayay,

Oo inan ku meeraysan jirey, meel fog ka ilaaqday,

Oo habar-malcuunaw diroo, moqoddinkaw saartay,

Oo aan ka maanicin wuxuu, uga muraad yeeshay,

Oo farakh makaankeed galoo, madax wareeraysa,

Madoobaadayeey xalay miyey, murugtay laabtaydu!

Abwaannada kale ee sida wanaagsan u adeegsaday tarminta loo ekaha, waxa ka mid ah Abwaan Maxamed Jaamac Cabdioo loo yaqaanno "Macallin Gaaxnuug", abwaan Gaaxnuug waxa uu tiriyay gabay uu magaciisu yahay Gantaal, isaga oo shabahaya ciil hayay kuna shabahaya geesi la jabiyay oo cadho la madoobaaday, iyo gabadh markaas uun curatay oo ninkeedi geeriyooday, waxa uu yidhi:

Sidii geesi hiil dirirayoo, guluf u heenseeyay,

Oo gaas digtoonaa col iyo, guuto qabadsiiyay,

Oo goob dagaal laysku helay, laga gol roonaaday,

Oo gacanta lagu soo dhigoo, gibil madoobaaday,

Ama curad ninkeedii go'oo, galabta loo sheegay,

Oo gocashadiisii qalbiga, meeli gubanayso,

Oo inay nin kale guursatiyo, godob ka yaabaysa,

Xalay gelin dhexaadkii hurdada, goohi maan ledine,

1.2.2. Tarminta U Loo Ekaha:

Tarminta loo ekuhu waa iyada oo tuducyo badan lagu sheego tuducyo dhawr ah lagu sheego loo ekaha, tusaaleyaal door ahna la adeegado. Halka loo ekaha u ekaha hal tuduc laga dhigo, Raage Ugaas isaga oo doonaya in uu cabbiro taah ka baxay habeen ay dhimatay gabadhiisii Faadumo, oo uu Libaax cunay, waxa uu taahiisa ka dhigay u-eke, uu ku cabbiray hal tuduc, loo-ekahana waxa uu ka dhigay shanqadho badan, oo uu ku cabbiray tuducyo badan, Raage Ugaas waxa uu yidhi:

"Sida koorta Yucub oo la sudhay, korommo buubaal ah,

Ama beelo kaynaan ah oo, kor u hayaamaaya,

Ama ceel karkaarada jabshiyo, wabi karaar dhaafay

Ama geel ka reeboo nirgaha, laga kaxaynaayo

Xalay kololo'aygii ma ladin, kaamil reeruhu e".

1.2.3. Faahfaahinta Loo Ekeha & U Ekeha:

Waa iyada oo loo ekaha iyo u-ekahaba lagu cabbiro tuducyo badan, bal u fiirso gabyaaga tixdiisu hoos ku sheegan tahay iyo sida uu isaga oo U Ekeha ah iyo Loo Ekeha uu u adeegsanayo meel-marinta ujeeddadiisu ay labaduba u faahfaahsan yihiin:

Hal godlani gujada Yuusufoow, way ka gubataaye,

Way gaagaxdaa – lagama helo, gobo'da caanood'e,

Gorof-legedka iyo lawyaday, kugu garaacdaaye,

Aniguna siddeeddaa Gambaan, gaadhka ku hayaaye,

Guhaad iyo afxumo waxan ku qabo, waanad garanayne,

Haddii Eebbe igu kaa galladay, hayska kay gudhine,

F.G. saddexda meeris ee hore waa Loo Ekeyaal Faahfaahsan, halka saddexda ku qoran farta jiiftaana (Italic) ka yihiin U Ekeyaal.

1.2.4. Tarminta Loo Ekeha & U Ekeha:

(b): Loo Ekeyaal Isku Dhinac ah & U Ekeyaal Isku Dhinac ah;

Cabdulle Xasan inankuu dhaliyo, Caarshe iyo Laaran,

Colaaddii dhex tiil oo kalaa, teennu ka cuslaan'e,

Halkan, dhinac waxa wada maray Loo Ekeyaal, dhinaca kalena U Ekeyaal. Cabdulle Xasan inankuu dhalay, waxa looga jeedaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Caarshe iyo Laaran waa laba ka mid ah madaxdii Gumeystaha u qaabilsanayd carradan. Sidaas daraaddeed, si Gabyaagu u muujiyo inuu colaad adag la gelayo qofka uu la hadlayo ayuu ugu ekeysiinayaa tii ka dhaxaysay Gumeystaha iyo Daraawiish.

Daraawiish + Gumeyste = Annaga + Idinka

Daan iyo qadhiidh baannu nahay, Qaranka Daa'uud

Si uu Faarax Nuur inoo fahamsiiyo colaaddii ka dhaxaysay iyaga (Arab) iyo Qaranka Daa'uud (Ciidagale), waxa uu u adeegsanayaa khiyaal cajiib ah. Daan iyo qadhiidh, waad garan kartaa in waxa ka dhaxayn karaa uu yahay uun inay is calaliyaan oo is budliyaan. Daan iyo qadhiidh waa Loo Ekeyaal isku dhinac ah, Annaga iyo qaranka Daa'uudna waa U Ekeyaal isku dhinac ah.

(t): Isku Lammaanaynta Loo Ekeyaasha iyo U Ekeyaasha Is leh:

Waa iyada oo loo ekayaasha iyo u ekayaasha lagu sheego isku tuduc, sida maansadan uu allifay Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye":

Dibnaheeda – culayga ah,

Cirridkeeda – dhuxusha ah,

Sanqaroorka – caynab ah,

Camankeeda – xaadda ah,

Sunayaasha – cawsha ah,

Dhexda – caara-dhuubta ah,

2. Ekeysiinta Kala Dhiman:

Isu ekaynta kala dhimani, waa iyada oo uu maqan yahay mid ka mid ah afarta qaybood ee ay isu ekaysiintu

2.1. Marka Qaabku Maqan Yahay:

Ekeysiinta noocan ah, ma cadda wejiga ay labada shay ee laysku ladhayaa iska shabbahaan, waa se laga yaabaa inay siyaalo kale qurux u samayso. Bal si feegijan u dheeho, iskuna day inaad wax ka guntato:

Cabdi Gahayr oo gabadh six eel-dheeri leh u ammaanaya, waxa laga hayay:

"Lagu mood dhirtii maacaleesh, midhihii saarnaa!"

Tuducan markaynu fiirinno, ma cadda qaabka ay isaga eeg yihiin qofka lala hadlayo, iyo midhaha saaran dhirta maacaleeshku. Haddii

se aynu kala yara qaad-qaadno, Lagu Mood waa **Qalab**kii, Dhirtii maacaleesh midhihii saarnaa, waa **Loo Eke**, halka **U Eke**huna ka yahay qofkan lala hadlayo. Ogobeey, in ereygii ahaa "Adigu" la xadfay oo uu ku hoos lammaan yahay "Lagu Mood." Tusaale kale waxa aha tuducan

"Turki baa la moodaa ninkaan, taaban naagaha!"

Ma cadda qaabka ay isaga eegyihiin Turkiga iyo ninka la sheegay ee aan naagaha taabani. Turkigu halkan waxa uu ugu jiraa **Loo Eke**, La Moodaa waxay ugu jirtaa **Qalab**, Ninkaan Taaban Naaguhuna waa **U Eke**.

Yuusuf Xaaji Aadan Qabille ayaa isna sifeeyay gabadh oo yidhi:

"Sidii cir ku hooray meel cosob loo,

Cadceedi u soo baxdaad tahay!"

Si la mid ah misaalladaas aynu kore ku soo sheegnay, ma cadda qaabka ay iskaga egyihiin deegaanka la sifaynayo, iyo qofka lala hadlayaa.

2.2. Marka Qalabku Maqan Yahay:

Waa marka aan qalabka Ekeysiintu ahayn mid muuqda, laakiin ay isu-Ekeysiini dhacday. Sida, gedda, Lagu mood, i.w.m. Dhamaan tusaaleyaashan hoos ku xusanna waa kuu ka maqan yahay qalabka Ekeeyuhu:

Nin sabool ah iyo awrba way, sibiq-dhaqaaqaan'e,

Labaduba haddaan seeto celin, socod ma daayaan;

Salaan-Carrabay ayaa isna yidhi

"Xubin rag isku waajahay markay, xaylka ka caddaato

Afku wuxuu la xoog yahay magliga, xawda kaa jara",

Maxamed Ismaaciil Baasarce "Barkhad-cas ayaa ku maansooday:

"Nimcooy adigiyo nalkaa Mijirkoos,
Noolaada'e magaalada waydin nuurteen"

Maahmaahyadan ayaa iyaga ay ka maqan yihiin qalabkii ekeeyuhu:

- **Nin reer u weyn iyo naag naag ka umulisay midna sida uu wax u og yahay uma sheego,**
- **Awr awr wado iyo nin naagi waddo, midna kaama beydho,**
- **Hilib mindi leh iyo hadal marag leh, midna laguma mergedo;**
-

2.3. Marka Qalabka iyo Qaabkuba Maqan Yihiin

Ekeysiin aanay jirin Qalabkii iyo Qaabkii ay wadaagayeen, misana suurto-gal ah, far-shaxannimona dhaliso; bal u fiirso maansooyinkan qalabka iyo qaabkuba maqan yihiin:

Cali waa libaax

Waa dhabarka seedaha ku yaal, sidigta dhaameele, Cumar Usteeliya

Aduun waa hadh labadiisa gelin, waana la hubaaye,
Hir markii lagaadhaba mid baad, ku hindisootaaye,
Hal galgalatey waxaa looga dhigay, yaanay midnaw hadhin,

Inkastuu dhabcaal daran yahuu, dharabo kuu diido,
Isagoo dharaar maqan mar uu, dumar wax kuu dhiibo,
Dhan aad uga dhacdaba maal ku xiga, waad dhadhamisaaye,
Waa dhaawac kugu yaal xidigtada, dhaqasho diidaaye,

2.4. Ekayaasha Dahsoon

Ekeyeyaasha dahsoon laguma xuso qalabka ekeeyaha, qaabka

ekeenta, u eke iyo loo eke midnaba. Si dadban ayaa se loo fahmaa. Fiiri tusaaleyaashan:

"Dacartuba mar bay malab dhashaa, muudsataa dhabaqe,
Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh, meel ku wada yaal'e",
Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin"

"Dirxiilaha madheedh waa cas yahay, daawashada guude,
Dawliilka baas waxaad ku hodi, duul aan ku aqoon'e"
Cabdilaahi Muuse

3. Ekeysiinta Hummaagyo Kala Fog: Waa ekeysiin la isu ekeysiinayo laba hummaag oo aad u kala durugsan. Tusaaleyaashan ayaana ka mid ah:

(a): Hummaagyada La Taaban Karo (Concrete images)
"Higlooy timahaaga hawdka ah,
Wixii ku hallaaba lama helo",

"Sidii geed ku yaal bankii Geriyaad,
Goonidu waa mid laygu talo galay"

"Afku wuxuu la xoog yahay magliga, xawda kaa jara'e,
Xaashe'e nin libin kaa xistiyey, xumihii waa yaab'e", **(**Salaan-Carrabay**)**

"Dhudiyeey nin dhalasho huwani,
Dhexda wuxuu ku xidho mooyee,
Dharka muxuu ku falayaa"

(b): Hummaagyo Male-awaal ah oo Kala Fog: Waa isu-ekeysiin

hummaagyo aan suurto-gelin ahayn. Waa buunbuunin xad-dhaaf ah: Tusaaleyaashan eeg:

"Indhoolaha ay agtiisa martaa,
Siduu arkayuu u eegaa"

Derajooyinka Ekeysiinta:

Cali geesinimada waa sida libaaxa, Grade C,

Cali waa sida libaaxa, Grade B,

Cali waa libaax, Grade A,

Fool-Xumada Ekeysiinta:

Ekeysiintu waxay fool-xumaataa marka laysku ekeysiiyo laba shay oo isku eg; sida

Biyuhu waa sida biyaha,

Qurux badani kuma jirto inaan isku shabbaho laba shay oo isku mid ah.

Waxa kale oo isku ekeysiintu fool-xumaataa marka laysku Ekeysiiyo laba shay oo aan la aqoon. Taasi waxay keenaysaa in aan faham immanin.

"Magaalada geed ku yaal muxibbooy,
Ayaad midabkiisa leedahay";

Marka laysku isku ekeysiinayo hummaagyo aan is lahayn:

Saynabeey jacaylkaagu waa sida sunta abeesada oo kale

Xus (Allegory):

Waa marka dhacdo hadda taagan lagu xidho dhacdo hore taariikhda u gashay, ama sheeko beryo hore dhacday. Waxa aad xasuusnaanaysaa in: Dadka isku diinta ah iyo kuwa siku Afka ahiba

ay ka mid yihiin dadka leh Xusuus-Wadarreedda.

Timacadde oo qiso hore ugu xusnayd taariikhda Islaamka ku xidhay mid ammintaas uu gabyayo taagnayd, waxa uu yidhi:

"Waraabihii diyada loo qabsaday, waagii Nebi Yuusuf ,
Walaahi baan ku dhaartaye dadkuu, sheegay waa kuwan'e",

"Hal libaax dharqadayuu laf iyo, dhayba ka idleeyey,
Ha u dhuran dhurwaagii laftuu, dhuuxay Eersaday'e", (Axmed-Qaasin)

"Maskii good ahaa iyo ninkii, loo gar qaadahayey,
Guudtidii kolkii loo wacee, taladii loo guulay,
Cid gun gaadha xaajada kolkii, goobta laga waayey,
Waxay gocatey ooy eersatoo, gebagebow diiday,
*Waa maansaartu xididkay gashiyo, gabantey aaseen'e,!" (*Dhoodaan*)*

"Habartii docdeediyo,
Dagalkay ku noolayd,
Daruuruhu ku hooreen,
Dadka wada hel mooddoo,
Daad wararac bay tidhi,
Waa se dumar'e yeelkeed", (Cabdi Iidaan Faarax)

"*Cawl baa midgaan soo gambiyey, soo gabraar tegaye*
Isagoo wax lagu gawraciyo, Gaarisaba haysan,
Jeenigay geef siisoo minday, qodatey gaarray'e,
Adiguba geddii baad tahoo, waa se gumadiiye'e" **(Cali-Dhuux)**

Bal u fiirso tixdan Hadraawina:

"Hawraar iyo sheeko,
Haween laga reebay,
Beraa habar guurtey,
Hayaan rareygeeda,
Culaab iyo haamo,
Waxay hilif saartay,
Haldhaa kici waayey,
Hiyeeda gadh jiidka,

Markuu hollan waayey,
Ayey hindiskeeda,
Halaanhal ku keentay,
Midaan kolla haabka,
Markaa lagu haynin,
Waxay tidhi: "hoogey,
Hayaay Cabdul-Qaadir,
Hareer qabo awrka!"
Markuu hayinkeedu,
Hagaag isu taagey,
Ayay tidhi: "haakah!"
Hebloo gabanteed ah,
Hilowna basteeda,
Malaa u han weynna,
Karaamadan hiirta,
Ku soo hormanaysa,
Hilmaamina weydey,
Wadaadka hoggiisa,
Ka soo hangallaystay,
Siduu ugu hiishey,
Ayaa tidhi: "hooyo,

Muxuu horta sheekhu,
Inoo yahay haybta?"
Waxay tidhi: "heedhe,
Hibooy ratigeennu,
Markuu hinqan waayo,
Ayaan huriwaaga,
Haleel cuskadaaye,
Habeen ma wadaagno;
Haddaan magaciisa,
Dantaydu higgaadin,
Ma soo hadal qaado!"

Duur-Xul ama Shareere (Metaphor):

Duurxullida ama Shareeridu waa marka ereyga laga soo raro macnihiisa asalka ahaa ee si ku meel-gaadh ah loo siiyo macno kale.

"Guuguulihiiyoow hadaad, gu'ga u ooyeyso,
Haddaad mooddey keligaa inuu, gubayo jiilaalku,
*Ama aad **gabooyaha** ku madhan, gama' la diidayso"*, (Ismaaciil Mire)

Ereyga Gabooye oo macnihiisu yahay Kiish, hadda macnihiisii waxa looga raray si ku meel-gaadh ah, waxaana uu u taagan yahay calool. Tusaale kale

"Intuu igama liibsannine, way ladaabsadaye", (Maxamed Nuur Fadal)

Ereyga **Ladaabsi** oo loo isticmaalo waraabka geela, Maxamed Nuur Fadal waxa uu hadda u adeegsanayaa nin ku soo noq-noqday oo adduun ka rabay.

Astaamayn (Symbolism):

Waa marka marka fikrad aad gudbinayso aanad toos u

sheegin/Abbaarin ee aad astaan tibaax ka bixinaysa uun sheegtid.

- Dhexda ayaad farta ka qaniini doontaa,
- Indhaha ayaan yar casaysanayaa,
- Wuxuu noo soo galay isagoo madaxa is haya,
- Lix aan haanta biyaha iska waraabin karin,
- Maalintaan hal naaskeed gaadhay,
- Laf cad buu toobin ku hayaa,
- Oo miyaan badhiba laf ka dayey,

Maansada anoo gaban yaraan, gaadh ka hayn jiray'e,
Gunti keliya anigoo lehbaa**, geedka lay diray! (Timacadde***)*

Calool jilicsanaa **caruurtayda aabbahood,**
Intuu I canaantay buu haddana Caasha-Luul i yidhi,

"Mar haddii raggu is galo,
Gallad kala dhaqaaqee,
Maradii gondaha tiil,
Waxaan geeyay lowgee,
Adiguna guntiga xidho", "Xasan-Ganay"
.
"Dhiishayda caanaha taqaan, taababkaa go'an'e,
Iyadaba tolliin waw eeg yahay, waa se kala taal'e,
Taydaa I cuslaysee maxaan, taray nin ii cawday?"
,
*"Waxba foox ma taro ruux jannada, **fara ka yaaliine**"*
(C/Raxmaan-Luggooyo)

Legaaddo (Irony):

Waa isa seegga ama iska hor imaadka ka dhaxeeya laba hummaag oo isku tuduc/kala tuduc ku sheegan.

F.G. Legaaddadu inta badan ma aha macquul, Sillan-Sugantu se waa macquul.

- Cay ka tagis leh iyo amaan tixraac leh,
- Dhalaankii hooyadii dhalmada baray,
- Ciirtaa dhamaa caydaa yaqaan,
- Sidaan kuugu lisay iigumaad hanbayn,
- Aar Qoyay dacawaa la moodaa,
- Waa car ee ha liqin waa caanee ha tufin,
- Uur hooyo ayaa eex laga bartaa,

Sillan-Sugan (Paradox):

Waa isa seegga laba xaajo oo hadana macquul ah, waxaanay isku bah yihiin ba legaaddada.

Hadday fooli timaaddo, gudo-qarsiimo hadhay,

Dayro <u>hore</u> deeq kama dhacdo,

Raganimo dantaa moogi bay ku jirtaa,

"Dhashaadeey sugtaa xaajadaad dhowrtaa abid'e,

Nin dhirbaaxo-quudheed dugsaday, dhaqayadeed maalye,

Haddaad dhimato geeridu <u>marbay,</u> nolosha dhaantaaye,

Dhaqashiyo mar bay kaa yihiin, dhareggu xaaraane", (Salaan-Carrabay)

"*Nin abaar ku geeddiya hadaad, oollin kari weydo,*

Iska aamuskaagaa ka roon waxaad og tahay sheeg," Salaan-Carrabay

"Intuu dubur hawd ka xulo,

Intuu bahalaha dugsado,
Ayuu dadku doonayaa,
Dugaaggu inaannu cunin", Hadraawi

"Maxaa iga qabyo ah hawl,
Wax-ka-qabashadeeduna,
Qayrkay ku xidhan tahay;" Hadraawi

4.6. Maansada iyo doorka ay taariikhda kaga jirto

Maansada waxa loo adeegsadaa in lagu calaamadiyo dhacdooyinka la yaabka leh ee amakaaga keena waxaana badi dhacdooyinka la yaabka leh laga sameeyaa Maanso la soo qaato marka la soo hadal qaado dhacdadaas. Sidoo kale maansadu waxa ay door lama illaawaan ah kaga jirtaa Taarikhda, waayo badi falalka dhaca waxa ku suntan maanso.

Tusaale ahaan **markii koowaad ee ay Soomaalidu** isu adeegsatay xabbad xilli dagaal, waxa ay la yaab ku noqotay qabiilkii la xabadeeyay, dabadeed nin ayaa tiriyay gabaygan isaga oo xabbbada magaceeda ku sheegay **Farriin,** waxaanu yidhi;

"Farriin baa raggii lagu dilee fool is may arage
Wuxuun baa fadhiga nagu qabsaday buurti fagaraade"

Nin kale oo isna aad uga xun raggaas laga soo toogtay qiyaasta aadka u fog iyadoo aanay rag xafiiltamin ama aanay seefaha iyo warmaha is weydaarsan ayaa isna ku calaacalay:

"Nimankaa la xaaqiyo raggaas xalay la soo sheegay
Ee xoolo daaq laga dilaan xayski duubnahaye
Xanuun may lahaateen hadday, rag is xamaasaane"

Markii la samaynayay xadka u dhaxeeya Ethopia iyo Somalia oo ahayd ku dhawaad 1935-kii, ayaa waxa xadkaas ka muraara dillaacay,

Maxamed Cabdi Aw Xaashi oo ku dhashay tuulada Libaax-Qawdhama oo ku taalla koondurta Hargeysa sanadkii 1885,waxaanu ku yidhi Gabaygan aan tuducyada yar ka soo qaadan doono:

."Qoto iyo Taleex baa la simay, qaydka seeraha e
Sidii qaalmo booliya dhulkii, waa la qaybsadaye
Isba qiil bannaysuu u yimi, qoortan dooga lehe
Wuxuu kuu qabtaba daaye wuu, idin qalaayaaye
Min qooreedkan lay dhigay wadadan, lay qoqobadeeyay
Haddii aaw u qushuucdeen barruu, qaadan waa imane
Qoonsada halkaa waxa ku jira, qabar laxaad weyne"

Amintii koowaad ee la arkay Gaadhi, kuna began xilligii la sameeyay xadka ayuu Maxamed Cabdi Xaashi mar kale tiriyay gabaygan. Gaadhiga waxa barigii hore loo yaqaanay "Moodhar/Moodhikaar", waxa uu ninkaasina yidhi:

"Kol hadii dhulkeenii xadkaas, dhereran loo yeelay
Oo moodhikaar lagu dhib tiray, wada dhabaynaayo
Dhallaan weeye kii fiiriyaa, dhaqasho xoolaade"

Markii Daraawiishta uu ingiriisku ku weeraray dayuuradaha, Sayid Maxamed Cabdille Xasan waxa uu la yaabay waxan duulaya ee cirka kaga yimi waayo waxa ay ahayd markii Koowaad ee meel Afrika ka mid ah lagu weeraro Diyaarado, waxaanu Sayidku dayuuradihii ku tilmaamay Coomaadayaal, isaga oo tiriyay gabaygan:

"Coomaadayaal duulayay Cadan ka keene
Cirkii iyo dhulkii bays qabsaday cadhadhaqdoodiiye
Caamir waa salleellee anaa haatan caymadiye
Adiguba caqlaad leedahee carar maxaa dhaaama?

Markii koowaad ee calan Soomaaliyeed laga taago dhul Soomaaliyi leedahay oo ahayd 26/June/1960 oo calanka laga taagay Hargeysa, ayuu Cabdi Ii daan Faarax sameeyay gabaygan uu calanka kaga waramayo, Abwaanku waxa uu yidhi :

"Isticmaar wax badan baan ku jiray, lay addoonsado e
Waagay eebada qabiyeen, eedda laga booday
Ayaankaa la kala roonyihiyo, ubadka xoolaaye
Inaggaa Alleylehe ka dhigan, awliyoo kale e

Dadba middaanu kaga aarsanoo, aayalaad tahaye
Durba waadigaa nagu anfacay, aammin nabadeede
Amley iyo warmii qarinay iyo, agabti shaydaane
Ayaantuu qiyaamuhu dhacee, suurta la afuufo

Allayliyo Alleylehe malaa, adiga weeyaane
NFDii kuwii joogey iyo kuwii, in uga baalleeyay
Alambaqa kuwii lagu ridee uubta lagu hooyay
Iyo kaa ifka u soo baxee, maanta ku arkaaya
Iyo kii Qurbaha ku ambadiyo, odayadii raagey
Idilkoodba adigawga dhigan, Aabbe iyo wiille
Insha Allahu Soomaali waad, ururin doontaaye"

Sidoo kale isla habeenkaas ayuu Cabdilaahi Suldaan Timacadde sameeyay geeraarkan uu calanka farxaddiisa ku sharxayo ee ah:

"Sibyaanka iyo carruurtu
Calankay sahadsheenoow
Cidna kaanay na siinee
Saatir noogu yaboohayoow
Samada kii u ekaayee
Xiddigaha mid la siiyoow
Sarreeyoow ma nusqaamoow
Aan siduu yahay eegnee
Kaana siib, kanna saar"

- Sarreeyoow ma nusqaamoow
- Aan siduu yahay eegnee
- Kaana siib kanna saar

Markii la dilay gaalkii Richard Corfield oo ay soomaalidu u taqaannay Koofil ee ay Daraawiishtu dishay, waxa uu Sayid Maxamed Cabdalle Xasan ka sameeyay gabay taariikhi ah oo Koofil loogu magacdaray kaas oo ay erayadiisa ka mid ahaayeen:

"Adaa Koofiloow jiitay, oon dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu dilay, jimic la'aaneede

Jahanama la geeyoow haddaad, aakhiro u jahato
Kuwii naarta joogiyo haddaad, jananadii gaadho
Daraawiish jikaar nagama dayn, tan iyo jeerkii dheh".

4.6.2 MIISAANKA MAANSADA

Miisaanka Maansadu waa furaha lagu kala saaro qaybaha Maansada. Miisaanka Maansadu waa hal-beega lagu cabbiro dhererka tixaha kala gedisan sida: gabayga, geeraarka, shiribka IWM. Miisaanka Maansadu waa cilmiga fududeeya kooxaynta Maansada iyo in Maansada loo qaybiyo bado kala gadisan.

Miisaanka Maansadu waa cabbiraha sheega maansada uu laaxinku ku jiro ama aanay meerisyadeedu u allifnayn sidii saxda ahayd, inkasta oo dhawaaqa Maansadu yahay ka markiiba lagu garan karo Maansada laaxinka leh. Miisaanka Maansada waxa ay dad badani ku tilmaamaan in uu yahay, daah-fur suugaaneedkii ugu qiimaha badnaa ee ay Soomaalidu samaysay Qarnigii Labaatanaad.

Yaa daah furay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed? Su'aashaas jawaabteeda waxa ka taagnayd dood aad u kulul. Labada aqoon yahan ee Professor Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Abwaan Professor Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" ayuu mid kastaaba warbaahinta, iyo goobaha cilmiga ahba gaarkiisa uga sheegay in uu yahay "Daahfuraha koowaad miisaanka maansada". Meelaha ay dooddaasi ka soo farcantay waxa ka mid ah

- Maqaalo ka hadlaya Miisaanka Maansada oo uu Gaarriye ku daabacay wargeyskii Xiddigta October 17/January/1976.
- Buug la yidhaahdo "Gorfeynta Gabayga", oo uu Carraale sheegay in uu dhamaystiray 1976.
- Buug la yidhaaho "Miisaanka Maansada" oo uu Carraale sheegay in uu dhameeyay 1977, labadaas buugba waxa uu Carraale sheegay in ay ka iibsatay Jaamacaddii Ummadda Soomaaliyeed. Labada buug waxa uu Carraale isugu geeyay buug la yidhaahdo " Miisaanka Maansada Soomaaliyeed", oo la daabacay 2003, oo uu Cismaan Xamari googol-dhiga buugga ku xusay in Carraale yahay daah-

furaha koowaad ee Miisaanka Maansada.Daabacaadda buuggan miisaanka maansada waxa lagu tilmaami karaa sababta u weyn ee sii hurisay doodda labada aqoonyahan, intaas kadibna waxa jiray maqaalo iyo hadallo la isku weydaarsan jiray saxaafadda, hadaladaas iyo maqaaladaas saxaafadda la isku weydaarsanayayna waxa ay sii huriyeen muraankii ka taagnaa qofka loo aqoonasanayo "Daahfuraha koowaad ee miisaanka maansada Soomaaliyeed".

- Maqaal uu dooddan Jan/2006 ka qoray Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo, oo uu ciwaankiisu ahaa Kuma ayaa loo aqoonsanayaa Aabbaha miisaanka maansada Soomaalida ? Ma Carraale mise Gaarriye"

4.6.1.1 ARAGTIDA CARRAALE EE AABBAHA MIISAANKA MAANSADA

Waraysi ay mareegta Wardheernews.com la yeelatay Carraale 20/May/2008, ayaa mar kale xamaasadda dooddan ku saabsan daahfuraha koowaad ee Miisaanka Maansada sare u qaaday. Wareysigaas waxa uu Carraale ku sheegay in uu yahay Aabbaha miisanka maansada, wareysigaas waxa uu nuxurkiisu noqonayaa mid ka waramaya in uu Professor Carraale yahay daahfuraha miisaanka maansada, waana kan wareysigii oo u dhigan qaab warbixin ahi:

Cabdilaahi Diiriye Guuleed Carraale, waxa uu dugsigiisa hoose/dhexe ku qaatay gobolka Togdheer 1958-1965, dugsiga sarena waxa uu ku qaatay National Teacher Education College "NTEC', shahaadada Jaamacada ee BSC waxa uu ku diyaariyay kulliyadii macalimiinta ee Lafoole, shahaadada MA waxa uu Carraale ku diyaariyay University of California and Los angels "UCLA", imakana waxa uu dagan yahay dalka Demark.

Carraale oo ay waraysi la yeelatay mareegta Wardheernews.com, ayaa sheegay in uu yahay daahfuraha miisaanka maansada, Carraale waxa uu tibaaxay in sanadkii 1972-kii loo dhigay meter-ka gabayga Ingiriisiga, isaguna uu ku fakaray in uu helo miisaanka maansada Soomaalida.

Carraale waxa kale oo uu caddeeyay in ay u suurogashay helitaanka miisaanka maansadu, isaga oo miisaanka maansadana u dhigay saddex xeer, sanadkii 1975-kiina uu dhameeyay buug magaciisu yahay "Gorfaynta Gabayga", 1976-kiina uu wargeyska xiddigta Oktoober ku daabacay maqaalo ka hadlaya miisaanka maansada, 1979-kiina uu aqoon iswaydaarsi ka dhacay Jubba Hotel uu ka akhriyay warqad ka turjumaysa miisaanka maansada.

Mar Carraale la waydiiyay su'aal ku saabsanayd in dad badani Gaarriye u aqoonsan yihiin daahfuraha miisaanka maansada, iyo sida uu arrinkaas u arko, waxa uu Carraale ku jawaabay "Kolkii aan "Gorfaynta Gabayga" dhameeyey, ayaa Faarax Abokor Khayrre (Faarax-askari) oo qoraalkayga la socdey, Marka-na ka wada shaqayneyney, ayaa Xamar inta uu tegey, hawshayda warkeedii faafiyey. Isaga ayaa markaa u sheegay Gaarriye in aan helista miisaanka ku guuleystey. Isla toddobaadkaa dhexdiisii, waa 1976, ayaa Gaarriye jariidaddii Xiddigta Oktoobar qoraalkiisa ku bilaabay. Anigu marka qoraaladaasi soo baxayaan waxaan joogaa Marka oo Xiddigta Okboobar ma heli jirin".

Carraale waxa uu intaas raaciyay magacyada dad uu ku tilmaamay in ay goob ka ahaayeen daahfurkiisa miisaanka maansada kuwaas oo ay ka mid yihiin;

Faarax Abokor Khayrre- bare
Faadumo Axmed Caalin "Cureyja" (agaasimihii qaybta maaliyadda ee Jaamacadda Ummada Soomaliyeed)
Xasan Aw Daahir Qaalib - bare(maamulihii xafiiska manaahijta)
Siciid Saalax Axmed - bare (Maamulihii Kooxda Iftin ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta),
Maxamed Ibraahim Warsame – Hadraawi
Prof. John William Johnson
Dr. Xuseen M. Adan

Si kastaba ha ahaatee Carraale waxa uu aad u xoojiyay in uu yahay daahfuraha miisaanka maansada Soomaalida, oo uu diyaar u yahay dood lagu kala saaro muranka ka taagan cidda daahfurtay miisaanka

maansada ee u dhexeeya isaga iyo Gaarriye, iyo waliba tayada labada miisaan ee ay soo kala saareen isaga iyo Gaarriye.

Carraale iyo Gaarriyeba waa laba aqoon yahan, oo hawl badan galiyay, wakhti badan, fikir iyo dadaalna u hurey soo saarista iyo horumarinta Miisaanka Maansada, cilmiga ay daahfureenna dadku waa ku intifaacay. Labadooduba waxa ay mudan yihiin in looga mahad-naqo hawshaas ay qabteen. Su'aasha taagan ayaa se ah kuma ayaa markii koowaad daahfuray miisaanka maansada?

Aqoonyahanno badan ayaa aragtidooda ka dhiibtay qofka daahfuray miisaanka maansada, dadkaas hadlay qaar ka mid ahi waxa ay rumaysnaayeen in Carraale daah-furay miisaanka maansada, qaar badan oo kalena waxa ay aaminsanaayeen in Gaarriye daah-furay miisaanka maansada.
Dad kooban oo faro-ku tiris ah ayaa arrintan uga hadlay si dhexdhexaad ah, hubsiimona leh, waxaana dadkaas ka mid ah Qoraaga Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir", oo aragtidiisa soo bandhigay

4.6.1.2 Aragtida Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir" ee Aabbaha miisaanka maansada

Maxamed Xirsi Guuleed "Abdibashir", waxa uu aragtidiisa ku soo bandhigay maqaal uu ciwaankiisu yahay "Yaa loo aqoonsanyahay Aabbaha miisaanka maansada Soomaaliyeed? Ma Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) mise Cabdillaahi Diiriye Guuleed (Carraaale)?", maqaalkaas oo soo baxay 3/062008.

Maxamed waxa uu ugu horreyn qoraalkiisa ku caddeeyay in aanu Miisaanka Maansadu ahayn suugaantii koowaad ee lagu murmo cidda daahfurta ama allifta, isaga oo tusaale u soo qaatay suugaantan lagu muransan yahay cidda curisay:

- Gabayga uu tuducyadiisa ka mid yahay " Qab qab dhaafay bay laba qabiil, Qaran ku waydaaye.
- Gabayga " Muslinnimo nimaan kugu dhaqayn muumino khaas ah,

Gaal maxasta kuu dhawra ood, magansataa dhaama" iyo

- Heesta Calanka Soomaalida ee "Soomaaliyeey toosoo, toosoo isku tiirsada eey, hadba kiinna taag daraneey, taageera waligiineey", heestan cidda alliftay waxa lagu kala sheegaa Yuusuf Xaaji Aadan Qabille, Qaasim Hilowle, iyo Cali Mire Cawaale.

Maxamed Xirsi waxa uu tibaaxay in uu ka war helay muranka ka taagan cidda daahfurtay Miisaanka maansada sannadkii 2004, xilligaas oo uu helay buugga 'miisaanka maansada Soomaaliyeed" ee uu qoray Carraale, sanad kadibna waxa uu Maxamed la kulmay Abwaan Gaarriye oo safar ku marayay dalalka Yurub, xilligaas waxa uu Gaarriye xaqiijiyay muranka ka taagan daahfurka koowaad ee miisaanka maansada.

Maxamed Xirsi waxa uu caddeeyay in Gaarriye yahay mudduci, oo ah qof wax tabanaya, Carraalena uu yahay muddaacale, oo ah wax laga tabanayo, waxa la isku haystaana uu yahay daahfurka koowaad ee miisaanka maansada.
Maxamed Xirsi waxa uu tilmaamay in loo baahan yahay in la kala saaro labada aqoonyahan ee daahfurka isku haya, iyada oo kala saaristana ay ka qaybqaadanayaan :

- Xeerbeegti kala saarta labada aqoonyahan
- Xeer ilaaliyeyaal, ilaaliya cidda jebisa xeerka
- Qareenno u hadla, afhayeenona u noqda labada aqoonyahan
- Caddaymo, ay soo bandhigaan labada halabuure oo raadraac ah, si guurtidu wax u xukumi karto
- Markhaatiyaal, mawduucan waxa markhaati ka noqon kara qoraalada la hayo

Maxamed waxa uu sheegay in Abwaan Gaarriye uu sanadkii 2003-da goleyaal badan ka sheegay lahaanshihiisa daahfurka koowaad ee miisaanka maansada, iyo in uu daahfurkaas koowaad ku qabsaday Carraale, sanadkii 2006-na uu Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo, qoray maqaal ciwaankiisu yahay "Kuma ayaa loo aqoonsanayaa Aabbaha miisaanka maansada Soomaalida ? Ma Carraale mise Gaarriye", qoraalkaasna uu ku ladhay nuquladii wargeyska xiddigta October ee uu Gaarreiye ku daabacay miisaanka maansada 17/01/1976, Carraalena uu ku daabacay 1978.

Maxamed isaga oo ka hadlaya maqaalkaas caddaymaha wata ee uu qoray Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo waxa uu yidhi "Marka aad si weyn u dhuuxdo qoraalka Cabdiraxmaan Barwaaqo, waxa inoo caddaanaya in aynu helnay qareen wax ku ool ah oo labada hal abuure mid ahaan u soo baxay. Taasi waa sidii la rabay –Marraa waaxid. Marka aad ka dheregto tabashadii Gaarriye iyo tafatirka qareen Barwaaqo, waxay indhahaagu eegayaan dhinaca macalin Carraale adiga oo leh: "Carraaloow soo gar bax ama Gaarriye u qir"." Guntii iyo gebagebadii waxa uu Maxamed Xirsi qoraalkiisa ku soo gunaanaday habkii loo kala saari lahaa labada aqoonyahan ee Carraale iyo Gaarriye, iyada oo caddaymo laga raadinayo qoraalada ay labada aqoonyahan sameeyeen.

Aragtida Abwaan Gaarriye ee Aabbaha miisaanka maansada

Wakhtigi waa socdaa, wali Gaarriye wax jawaab ah lagama hayo, dadka qaarba su'aalo ayaa maskaxdooda ka dhex guuxaya, su'aalahaas oo ay ka mid yihiin:

1.Miyaanu waraysiga Carraale bixiyay ee jawaabta u baahani gaadhin Gaarriye?
2.Muxuu Gaarriye u jawaabi waayay muddo dhan laba bilood?
3.Miyuu is dhiibay Gaarriye, illeen aamusku waa calaamad raali ahaansheed e?
4.Miyuu Gaarriye gaashaanka u daruuri doonaa hadalka Carraale?
5.Caddaymo iyo hadalo sidee ah ayuu Gaarriye bulshada tusi doonaa?

Wareysiga Carraale laba bilood kadib oo ku beegan 28/September.Ayuu Gaarriye waraysi siiyay shabakada wardheernews.com, wareysigaas oo uu Gaarriye si adag ugu difaacay hadaladii Carraale, isla markaana uu ku sheegay in uu yahay ninkii koowaad ee daahfuray miisaanka maansada.

Abwaan, Professor Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" waxa uu ku dhashay magaalada Hargeysa, waxbarashadiisa dugsiga sarena waxa uu ku qaatay Sheekh, waxaanu ka qalin-jabiyay jaamacaddii Lafoole, waxa uu ka tirsanaa akadamiyaddii cilmiga iyo fanka, 1977-kii ayuu

macallin ka noqday kulliyadii suugaanta Soomaalida ee Lafoole, wakhtiga ay dooddani socoto oo ah sanadka 2008-na waxa uu Gaarriye wax ka dhigaa jaamacadaha Hargeysa, Camuud iyo jaamacad ku taalla magaalada Oslo ee dalka Norway.

Gaarriye waxa uu ku sheegay waraysiga ay la yeelatay mareegta Wardheernews.com in sanadkii 1969-kii loo dhigay wasniga "miisaanka" maansada carabiga ah oo uu helay Khaliil Axmed Al-Faraahiidi, isaguna uu isla sanadkaas ku fakaray baadhitaanka iyo helista miisaanka maansada Soomaalida, laakiin taasi ay u suurtogali wayday Af-Soomaaliga oo aan xilligaas qornayn awgeed. Markii Af-Soomaaliga la qoray sanadkii 1972-kii, ayay Gaarriye sida uu sheegay u suurtogashay in uu helo miisaanka maansada Soomaalida, isaga oo miisaanka maansada ku daabacay wargeyskii xiddigta Oktoober taariikhdu markii ay ahayd 17/Jenawari/1976- 29/May/1976, hawshana waxa ku dhiirigaliay Xaaji Muuse Galaal iyo Guush Andarawiski.

Gaarriye waxa uu ku dooday in uu yahay qofkii koowaad ee helay miisaanka maansada Soomaalida, taaasna ay qoraaladiisu marag ka yihiin, mar Gaarriye wax laga waydiiyay hadalka ka soo yeedhay Carraale, ee uu Carraale ku tilmaamay in uu daahfuray miisaanka maansada waxa uu yidhi "Carraale waxa uu goob ka joog ka haa marar badan oo aan arrintan kaga hadlayay jaamacadda Lafoole, waxa kale oo uu naqdin lahaa qoraaladii aan sameeyay Jenewari-May 1976, sidii ay dad kaleba doodooda wargeysa ugu soo bandhigeen ee aan aniguna isla wargeyska qudhiisa ugu jawaabay".

Gaarriye waxa uu tibaaxay in uu jiro farqi u dhexeeya miisaankiisa iyo miisaanka Carraale, waxaanu tibaaxay in uu diyaar u yahay dood loo qabto isaga iyo Carraale, doodaasna uu ku soo bandhigi doono daah-furkiisii miisaanka maansada iyo waxbaabo kale oo ku saabsan suugaanta oo uu ku ogaaday cilmibaadhistii uu sameeyay. Si kastaba ha ahaatee Gaarriye waxa uu ku nuuxnuuxsaday in uu yahay daahfuraha miisaanka maansada.

Markii ay wareysidaas kala-maanka ah bixiyeen labadaas aqoonyahan suurtogal way ii noqon wayday in aan u garsooro labada aqoon

yahan, waayo xilliga ay labada aqoon yahan soo bandhigeen hawshan maba aan dhalan anigu.

Dadwaynuhuna guud ahaan aad ayay ugu jahowareereen, weedhaha iska soo horjeeda ee ka imanaya labada aqoonyahan waa Abwaan Gaarriye iyo Professor Carraale. Bulsho badanina waxa ay dhursugaysay insha Allah inta dood fool ka fool ah, la isku soo horfadhiisinayo Gaarriye iyo Carraale. Garsoorna lagu kala saarayo iyada oo la eegayo caddaymaha uu mid walbaaba haysto. Garina laba nin kama wada qoslisee, labadooda mid ka mid ahna loo aqoonsanayo "**Daahfuraha koowaad ee miisaanka maanada Soomaaliyeed".**

Waxa ay dad badani aad u farxeen markii mareegta hadhwanaagnews.com lagu arkay Ogeysiis sheegayay in Gaarriye iyo Carraale loo qaban doono dood ku saabsan cidda daahfurtay miisaanka maansada. Dadwaynahana lagu martiqaaday in ay ka soo qaybgalaan. Doodaas oo 2/December/2008 ka dhacaysay magaalada Oslo ee Caasimadda dalka Norway.

4.6.1.4 Qabashadii Doodda iyo Garsoorkii Guddiga

Dooddan oo aad loogala socday saxaafada kala geddisan, gaar ahaana warbaahinta qoraalka ah, sida mareegaha internetka, iyo jaraa'idkaba, waxa ay warkii ka soo baxay, natiijadii ay ku dhamaatay iyo war-murtiyeedkii laga soo saarayba u dhignaayeen sidan:

"29kii November (Sabti), ayay labada aqoonyahan iyo gudigu isugu timi guri ku yaalla Oslo, Norway, waxaanay gudigu dhagaysteen dood dhex martay labada aqoonyahan, waxayna arkeen qoraallo la socday bandhigga markhaati ahaan, qoraallada gudigu aragtay waxa uugu muhiimsanaa kuwan:

(2) Maqaal ka hadlaya miisaanka Maansada Soomaaliyeed oo ku soo baxay wargeyskii la odhan jiray "Xiddigta October" cadadkiisii 17l/Jenawari/1976-kii. Maqaalkaas waxa lahaa Gaarriye.

(3) Buug aan la daabicin, oo la yidhaahdo "Gorfeynta Gabayga", buuggan waxa qoray Pro Cabdilaahi Diiriye Guuleed "Carraale", waxaanu Carraale ku dacwiyay in uu buuggaasi dhammaaday 1976, kadibna uu Jaamacaddii Soomaaliya ka iibiyay.

(4) Buug kale oo uu qoray Pro Carraale, oo isna aan la daabicin kuna saabsan miisaanka maansada, taariikhdiisuna tahay 1977.

(5) Buugga daabacan oo uu Pro Carraale yidhi "Waxaan isugu geeyay, labada buug ee kor ku xusan".Buuggaas waxa la daabacay 2003.

Markii labada aqoon yahan dhamaysteen doodda ayay guddigi u soo jeedisay in arrintaas loo abbaaro, sidii oodo dhacmeed loo kala guri jiray. Arrinta ku saabsan tayada miisaanka labada aqoonyahan, waxa ay u baahan tahay in dad suugaanta yaqaanaa ka gar naqaan. Waxa kale oo ay gudigu soo jeedisay dood dhexmarta labada aqoonyahan oo dadwaynaha oo la isu dhagaysto, wanaaga iyo sida ay u kala tayo roonyihiin labada miisaan, waxa kala saari kara dadwaynaha Soomaaliyeed iyo aqoonyahanno si khaas ah ugu xeel dheer barashada suugaanta.

Sidaas awgeed waxay gudigu ku talisay in arrintaas dhextaalla labada aqoonyahan, loo qaybiyo laba qaybood.

1. Ta ku saabsan yaa hor curiyay miisaanka maansada, way ka garniqi kartaa guddigani, iyadoo markhaati looga raadinaayo qoraaladii lagu soo bandhigay doodda labada aqoonyahan.

2. Arrinta ku aaddan tayada, sida ay u kala waafisan yihiin labada miisaan, ha loo daayo dadwayne isu dhagaysta labada aqoonyahan, waana sida caalamkaba caadiga ah, laba ama

ka badan oo wax isku mid ah wada qora, akhristeyaasha ayaa kala saara.

Markii qeexiddaa lagu heshiiyay, ayaa guddigu gooni u baxday si ay go'aan uga soo gaadho, labada aqoonyahan, kooda loo aqoonsado, curiyaha miisaanka maansada, gudigu waxay ka dooday qoraalladii la keenay ee kala ahaa: Maqaal lagu daabacay Xidiggta October, iyo buugagga aan la daabicin, keebaa loo aqoonsan karaa, qoraalka ka markhaati kici kara, kala horraynta soo saarka miisaanka maansada??.

Dood dheer kadib waxa ay guddigu isku raacday, in aan qoraallada la daabicin loo aqoonsan Karin markhaati, qoraalkii ku soo baxay Xiddigta October 17/January/1976 ee uu lahaa Abwaan Gaarriye ayay markaa gudigu u aqoonsatay in uu yahay markhaatiga qiray cidda soo hor saartay miisaanka maansada, iyadoo isugu dhan, ayay gudigu go'aankaa ku maqashiisay labada aqoonyahan.Waanay aqbaleen.

Golahaa koobnaa ee gudigu isugu keentay Carraale iyo Gaarriye, wuxuu meesha ka saaray qodobkii ugu xasaasinaa ee ahaa "Yaa hor daahfuray miisaanka maansada". Wuxuu noqday gole lagu guuleystay, oo aad isugu soo dhaweeyay labadii aqoon yahan ee muranku dhexyaallay.

2/Dec/2008 oo ahayd maalin Salaasa ah, ayaa Jaamacada Oslo, laga diyaariyay dood ballaadhan dood ballaadhan oo dhex marta Carraale iyo Gaarriye, waxay ahayd dood cilmiyeed aad iyo aad u qiimo badan, oo labada aqoonyahan si heersare ah ugu soo bandhigeen aqoontooda iyo daraasada ay ku sameeyeen miisaanka maansada Soomaaliyeed iyaga oo wata abbaar ama hab kala duwan.Hayeeshee labadooduba waxa ay soo bandhigeen xisaab nuxurkeedu isku mid yahay oo lagu miisaamo maansada.

Labada aqoonyahanba way sii guda galeen gorfaynta miisaanka maansada, waxaanay soo bandhigeen daraasado culus oo aan hore loo maqal, waxay mujiyeen in ay yihiin aqoonyahanno isu haya ixtiraam iyo is qadarin, oo isu qiraya midba waxa uu ku soo kordhiyay cilmigan ku cusub suugaanta Soomaaliyeed.

Ugu dambayntii Maxamed Xaashi Dhamac Gaarriye, oo Xiddigta October ku qoray maqaalo ka hadlaya Miisaanka Maansada Soomaaliyeed 17/January/1976 ayaa loo aqoonsaday "Daahfurihii koowaad ee Miisaanka Maansada Soomaaliyeed".

Gudiga ka garsoortay doodani waxa ay ahaayeen sagaal xubnood oo kala ah

1.Professor Xuseen Xasan Guuleed-Gudoomiye
2.Cabdilaahi Saleebaan Bide
3.Axmed Cawad Ismaaciil
4.Axmed Warsame "Axmed Dheere"
5.Cali Cismaan Cige
6.Cabdirisaaq Cismaan Fadal
7..Aadan Looshade
8. Axmed Xaaji Nuur iyo
9.Maxamuud Xaaji Ibraahim

Taariikhdu markii ay ahayd 27/7/2009, iyada oo la joogo gebagebada bandhig-dhaqameed loogu magacdaray Maxamed Mooge, oo lagu qabtay magaalada Hargeysa, waxa Abwaan Gaarriye marag kale u furay Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", oo sheegay in uu Gaarriye yahay ninkii koowaad ee Hadraawi uu ka maqlo daah-furka miisaanka Maansada bilawga sanadkii 1973, ka hor intii aan Hadraawi lagu xidhin xabsigii Qansaxdheere bishii May/1973, xabsigaas muddo oo uu Hadraawi ku xidhnaa muddo dhawr sanno ah.

Abwaan Gaarriye isaga oo ka hadlaya daahfurka miisaanka maansada waxa uu yidhi " Anigu waan daahfuray markii koowaad miisaanka maansada, kadibna rag kale oo farabadan ayaa sii horumariyay, qoraalana ka sameeyay, mana ahi qofka ugu aqoonta badan miisaanka maansada, waa laga yaabaa in ay jiraan dad badan oo iiga aqoon badan miisaanka maansadu,waayo ?, imakadanba marka ay dhallinyarada qaarkood su'aalo i weydiiyaan, candhuufta ayaan dib u yara liqaa, maskaxdaydana waxa ku soo dhaca, in ay raggaasi yihiin, kuwii na beddeli lahaa.

Miisaanka maansadu ma aha wax aniga ii xidhan, oo aanay cid kale ka hadli karin, cid kasta oo miisaanka maansada ee aan daahfurey naqdiyeysa, ama wax cusub ku soo kordhinaysana waan soo dhawaynayaa, horumarinta miisaanka maansaduna waa cilmi uu qof kastaaba ka qayb qaadan karo, laakiin taariikhda lama qariyo, ee waxa aad ii xasuusnaataan, in aan ahay qofkii koowaad ee daahfuray miisaanka maansada".

Miisaanka Maansada Ee Gaarriye

Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", markii uu dajinayay miisaanka maansada ee uu soo saaray, waxa uu miisaamida maansada u dhigay shuruudahan:

1.Eraygu waxa uu ka kooban yahay shaqallo iyo shibaneyaal, labaduba miisaanka way sameeyaan
2. Shaqalka gaabani waxa uu qaataa (1), shaqalka dheerina waxa uu qaataa (2)
Tusaale ahaan kan:

Adiguna Gobaadeey
1 1 1 1 (1) 2 2 (9 shaqal)
Qurux baad u tahay gabadh
1 1 2 (1) 1 1 1 1 (9 shaqal)
3.(ay) iyo (aw), labadaasi waxa ay mararka qaarkood u dhigmaan sidii shaqal gaaban, marna waxa ay u dhigmaan sidii shaqal dheer.
4.Inta aanad bilaabin miisaanka maansada, waa in aad garanayso godka/badda maansada ah ee aad miisaamayso.
5. Waa in baydka aad miisaamayso aad u qortaa si sax ah.
6. Waa inaad baydka sida loogu dhawaaqo u qortaa.
7. Waa inaad la kaashato cid dhagta ku garanaysa laaxinka ku jira maansada.

4.6.2. Miisaanka Maansada ee Carraale

Bare Sare Cabdilaahi Diiriye Guuleed Caraale, waxa uu helay hab xisaabeed gaar ah, oo heersare ah, oo lagu miisaamo maansada Soomaaliyeed, isaga oo dhigayo shardiyo marka uu maansada miisaamayo. Maansada oo ah ta ugu qiimaha badan Suugaanta , oo ah

bahda ay ku arooraan tix kasta oo dhiskeedu ku qotomo saddex heer oo kala ah:

1. Dheelitir alan iyo shaqal dheere

Meelaha qaarkood alanada waxa lagu bedelan karaa shaqal dheere sida

- Geed buu ku saaraa kolkuu kuu gol leeyahaye
- Gacan buu ku saaraa kolkuu kuu gol leeyahaye

Xuruufta 'H" iyo "W' mararka qaarkood waxa ay u shaqeeyaan sidii shaqal marna sidii shibane. Marka ay shaqal ahaan u shaqaynayaan waxa lagu badali karaa shaqal kale sida:

Aabboow sidii Hoorri-gaab, Diiriyay gabaye
Aababa sidii Hoorri-gaab, Diiriyaa gabaye

Geeluba Ugaasooy kolkuu, ayda miranaayo
Geeluba Ugaasaa kolkuu, oodda miranaayo

2. Tusmayn sugan oo shaqal dheerayaasha meeriska dhexdiisa ah. Haddii la is weydaariyo shaqal dheerayaasha waxa dhacda in meeriska maansadu jabo, oo laaxin galo.

3. Hormayn u dhiganta meeriska la adeegsanayo. Haddii la iswaydaariyo alamada gabayga, waxa dhacda in u gabaygii ka tago, oo uu nud kale noqdo sida

Hojis gabay: dal wanaagsanaydaa war dheer
Heello sida: War dheer dal wanaagsanaydaa

Marka uu Carraale miisaamayo maansada, waxa uu tiriyaa sida aan u fahmay shaqalada ku jira meeriska uu miisaamayo isaga oo shaqalka gaaban, ama dhawaaqyada, iyo shaqalka dheerba siiya tiro ah (1), kadibna waxa uu gaar u tiriyaa shaqalada dhaadheer bal eega tusaalahan:

5,4=Saadaasha mooyee
5,4=Ruux aad sugaysoo
5,4=Saarkaagu kaa hayn
5,4= Suulkaaba gaadhee

4.7. BADAHA(QAYBAHA) MAANSADA

Maansadu waxa ay leedahay qaybo kala gedisan, waxaana qaybaha Maansada lagu kala gartaa dhawaaqyada kala gedisan ee ay leeyihiin badaha (qaybaha) Maansadu. Maansooyin kasta oo yeesha habdhac gaar ah, oo ay kaga duwan yihiin maansooyinka kale, waxa ay noqonayaan bad gaar ah oo ka tirsan badaha Maansada.

Badaha Maansadu waa qaar ka kooban noocyada Maansada oo maansada u qeybiya qaar leh magacyo gaar gaar ah. Qaybaha Maansada, badaha, noocyada iyo godadka maansada waxa ka mid ah kuwan soo socda:

1. **Gabayga (Boqorka, hal-doorka maansada).**
2. **Geeraarka.**
3. **Jiiftada**
4. **Masafoda (Maanso Culimeed)**
5. **Buraanburka (Maanso haweeneed, Boqoradda maansada)**
6. **Guuroowga**
7. **Weglada(Balwo, Heello, Hirwo, Dhaanto)**
8. **Shiribka Iyo**
9. **Saarka (Baarcaddeha)**

Kuwaasi waa Badaha magaca leh, waxa jira iyaguna Bado ama Miisaanyaal ay Maansadu leedahay oo aan wali magac la isku raacsan yahay loo samayn, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. **Badda Haanta**
2. **Badda Maqasha**
3. **Badda Kebadda**
4. **Badda Caddaloolka (Halaanhal)**
5. **Badda Shallaadka**
6. **Badda Hagarlaawe**
7. **Badda Salliga**
8. **Badda Sayliciga**
9. **Badda Salsalka**
10. **Badda Hees Carruureedda**

11. Badda Hayaayda
12. Badda Waraabka
13. Badda Dikriga
14. Badda Dabahuwanta
15. Badda Mooyaha
16. Badda Biitada
17. Badda Geeljireha
18. Badda Lixleyda
19. Badda Daaqsinta
20. Badda Jiibta, iyo
21. Badda cawska

Haddaynu badahaas kolba mid ka mid soo qaadanno, oo aynu gudo-galno abla ablaynta, falanqaynta, iyo faaqidaada badaha kala gedisan ee maansada, waxa uu sharraxa badaha maansadu noqonayaa sidan:

4.7.1 GABAYGA

Gabayga waxa loo yaqaanaa "**Boqorka Maansada",** waa ka ugu qiimaha badan Maansada, isla markaana waxa uu ka mid yahay maansooyinka ugu adag ee la allifo. Waxa uu ahaa warbaahin lagu faafiyo dhacdooyinka meel ka jira. Waxaana uu ahaa saxaafad qiime badan oo bulshadu kaga haqab beesho hadba wixii soo dersa. Gabaygu waa hal-doorka maansada.Waana tiirka koowaad ee laf-dhabarta u ah maansada Soomaaliyeed.

Suugaanta waxa u xeeldheer badda gabayga iyo maahmaahyada, gabaygana waxa sameeya inta dadka u da'da wayn, ugu waayo-aragsan, ee leh aqoon ay ku kasbadeen waayo-aragnimadooda iyo cimriga dheer ee ay jireen. Gabaygana waxa inta badan laga tirin jiray geedka, waxaana la odhan jiray "Gabay geed baa leh".

Inta la ogyahay taariikh ahaan, badaha maansada waxa u dambeeyay gabayga, badaha kale ee maansaduna waa qaar ka da'wayn gabayga lana isticmaali jiray intii ay jirtay ummadda Soomaaliyeed, inta la ogyahay taariikh ahaan lodkii u horreeyay ee gabay sameeyaa waxa ay ahaayeen lodkii noolaa xilligii Raage Ugaas.

Abwaan Raage Ugaas waxa uu gabayga ku soo kordhiyay tuduc in badan la adeegsado marka gabayga lagu luuqaynayo, kana mid tuducyada hal-beegga u ah gabayga, tuducaas oo ah:

Hoyalaayey hooyaalayeey, hooyaalayey hooye

Kadibna waxa lagu yidhi "Raagoow maxaad uga jeedaa Hoyalaayey hooyaalayeey, hooyaalayey hooey?", isaguna waxa uu ku jawaabay

"*Hooyaalayeey gabayga way ugu horreysaaye*
Halna kama tirsana maansaday, soo hirgalisaaye"

Hoyaaleyda waxa loo adeegsadaa si dareenka dadka loo soo jeediyo, dhagta dadkana loogu diyaariyo dhagaysiga gabayga, dadkana loogu baraarujiyo in gabaygi uu bilaabmayo.
Gabaygu darajo ahaan, tayo ahaan, qiime ahaan, micne ahaan, iyo xikmad ahaan waxa uu kala leeyahay saddex darajo, kuwaas oo kala ah:

1. **Hal-dhac:** hal-dhacu waa inta gabayga ah ee ka hooseeysa darajadii uu gabaygu lahaa, ee jilicsan, xikmad badan aan lahayn, nin heesayayna waa kii yidhi

"*Sidaasaa loo habeeyaa*
Hal-dhaca looga dhawraa"

2. **Hal-taraar** : hal-taraarku waa inta gabayga ah ee leh xikmaddii gabayga looga baahnaa, waa inta u badan gabayada, ee xambaarta ujeeddada gabayga

3. **Hal-Kudheg (Hal-Muceed)** : hal-kudhegga iyo hal-muceedku waa inta gabayga u shilis, u xikmadda badan, u tayada wanaagsan, ugu heerka sarreeysa, ugu nuxurka badan, ugu dhadhanka wanaagsan. Hal-kudheggu waa tuducyada ugu tilmaaman ee hal-doorka ah gabayga.

Sidee ayuu gabaygu kula baxay magaca ah "Gabay" ?. Sida la sheego markii koowaad ee Af-Soomaali gabay lagu sameeyo, nin ayaa nin gabay u tiriyay, ninkii gabayga loo tiriyay ayaa awoodi kari waayay

in uu ka jawaabo gabaygii loo tiriyay. Markaas waxa uu yidhi "*Aniga afkaygii ayaa i* ***gabay****, isagana afkiisii ayaan gabin*". Cidda uu afkooda gabaa ma gabaydo, cida aanu afkooduna gabina waa ay gabaydaa. Gabayguna ma aha mid dadka ka wada dhaxeeya ee waa hanti hal-abuurrada maansadu gaar u leeyihiin, sidii uu Hadraawiba u lahaa:

"Dadka uma gudboonee ragbay duunyadiis tahaye"

Aragtiyo kale oo ku aaddan halka uu asal ahaan ka soo jeedo erayga Gabay, waxa ay sheegaan in Gabaygu asal ahaan ka soo jeedo "*Gobay*", Gobaygu waa askari ku hubeysan hub, waxa kale oo Gobay loo yaqaanaa, qofka xilliyada arooska dadka ku xukuma in ay soo kacaan, oo ay arooska kaga qayb qaataan tix iyo tiraab waxa ay hayaan. Aragtidan waxa ay ubucdeedu tahay, in qofka Gabayaaga ahi uu ku hubaysan yahay Gabay, sida uu askariga Gobayga ahiba uu ugu hubeysan hubka, Gabayguna uu noqon karoba mid ka khatarsan hubka sidii uu Salaan Maxamed Aadan "Salaan-Carrabay"ba gabaygiisa ugu yidhi:

"Afku wuxu la xoogyahay magliga, xawda kaa jara e."

Tuduca halbeegga u ah gabayga:
Gabaygu waxa uu qaadan jirey oo uu caan ahaa tuduc halbeeg u ahaa gabayga, dhawaaqiisu ahaa

"Hoobaalayeey hoobaalayeey hoobaleey hoobe"

Waxase tuducaas beddelay Raage Ugaas kuna beddelay tuduc kale oo ah:

"Hooyaalaayey hooyaalayeey hooyalaayey hooye"

Gabayga waxa sidoo kale halbeeg u noqon kara tuduc kale, oo uu gabaygu waafaqo marka lagu luuqeeyo, tuducan ayaa isaguna ah:

"Hoobaalayoow heedhe, hoobalayoow heedhe"

Tuduca/meeriska gabayguna waa bilawga iyo illaa dhamaadka sadar ka mid ah sadarada gabayga. Tusaale ahaan tuduca gabaygu waxa uu noqonayaa

"Sidii Dhidar xabaalaha qoduu, ceeb u dhacayaaye"
Waa tuduc ka mid ah gabay uu sameeyay Yuusuf Cismaan Cabdulle "Yuusuf-Shaacir".

Gabaygu waxa uu leeyay tuducyo ama meerisyo dhaadheer oo ka kooban laba qaybood oo kala ah:

1. Qaybta koowaad ee gabayga waxa loo yaqaanaa **Hojis** waana qaybta ka ho**r**reysa barta uu gabayaagu ku nasto marka uu gabayga akhriyayo
2. Qaybta Labaad ee ka dambeysa meesha uu hal abuurku ku nasto waxa loo yaqaanaa **Hooris.**

Fiiro Gaar ah: Meelo ka mid ah dhulka ay Soomaalidu dagto qaybta hore ee gabayga waxa looga yaqaanaa "***Hakis***", waxa se la qaatay eray bixinta ah Hoojis iyo Hooris, xilligii ay socotay magac-bixinta Soomaaligu.

Waxa lagama maarmaan ah in xaraf isku mid ahi ku jirto hooriska gabayga iyo hoojiska {hakiska}gabayga. Sidaas daraadeed waxa ay tahay in xarafku laba jeer ku jiro gabayga ugu yaraan haddii kale gabaygu waxa uu noqonayaa jacbur.

Haddaan tusaale ku muujiyo Hooriska iyo Hoojiska gabayga, oo aan soo qaato tuducan uu allifay Abwaan Saahid Qamaan, Hooriska iyo Hoojiska gabayguna waxa ay kala noqonayaan sidan :

Gammaankiina badan Feeytinoow (**Qaybtani waa Hojis/Hakis**).
Gobolba waa Cayne (**Qaybtanina waa Hooris**).

Haddaan soo qaadano gabay tusaale ah oo magaciisu yahay "**Majeerteen hadduu kala tashaday**", ee uu tiryay Yuusuf Maxamed Sharmaarke "Faratol", ee ah:

"Tamadkiisa gabay Yuusuf baan, tiri idhaahdaaye

Ma tilmaamo oo anigu waan, tacadi boolyaaye
Taftarkuu ku dhigay eeganaan, tacalimaayaaye
Tu'yar bal an ka dhaho caawa wa u, tooga waynahaye

Nin haduu togdheer soo maruu , talo ku weyrooqdo
Tooraha haduu galo luguhu, waysu tiirmaane
Mid hadduu tabcado tii kalaan, tamar ku taagnayne
Majeerteen haduu kala tashaday, waa tab loo jiraye"

Gabayada kale ee caanka ah, ummadda Soomaaliyeedna ay aadka u wada taqaano, waxa ka mid gabaygan uu magaciisu yahay "Allahayoow nin ii daran", oo uu allifay Ugaas Nuur Ugaas Rooble, gabaygani waa gabay farshaxan iyo diblomaasiyad xeel-dheer xambaarsa, waxaanu tusale wanaagsan u yahay badda gabayga, meerisyo ka mid ah gabaygina waa kuwan:

Allahayoow! Nin ii daran maxaan, daafta hore seexshay
Nin i' daaqsanaayana maxaan, daafida u kariyay
Jidhku nimaanuu doonayn maxaan, hadalka deeqsiiyey
Ma' deg-deg'e xaajada maxaan, ugu dul-qaad yeeshay
Waji dabacsan deymo aan dareen, galin qubaaqiisa
Debno furan dabuub una ka-didin, deexashiyo muuso
Qosol dibada yaal oon ka iman, dhuunta dacalkeeda

Kanaan degay! Kanaan door-kabiday!, Kani dan baan mooday!

Waxaa dood kaftan ah sheeko guud, ugu daleeyaaba
Dabinkaan u dhigo maalintuu, dagalka soo saaro
Intiiyoon dawaarka u rogoon, xeelada u daadsho
Isagoon digniin qabin maxaan, kaga dayaansiiyay.

Kanaan degay! Kanaan door-kabiday!, Kani dan baan mooday!

4.7.1.1 MIISAANKA GABAYGA

B) Miisaanka Gabayga Ee Gaarriye

Haddaan tusaale u soo qaato gabay duco ah oo uu sameeyay Aw Cilmi Xuseen. Miisaanka Gaarriye ee gabaygu waxa uu noqonayaa:

Ramadaan qof soomani ma karo riiqda maansada e
1 1 2 1 2 1 1 1 1 1 2 1 2 1 1 1 (20 shaqal)
Ruugaamiskii baa ka maqan, reenki feedhaha e
2 2 1 2 2 1 1 1 2 1 2 1 1 1 (20 shaqal)
Allahayoow adaa raasiqoo, roobka noo shuba e
1 1 1 2 1 2 2 1 2 2 1 2 1 1 1 (21 shaqal)
Adaa ramadka caanaha macaan, noogu soo roga e
1 2 1 1 1 2 1 1 1 2 2 1 2 1 1 1 (21 shaqal)
Ruuxaad abuurtaba adaa, raashina u qora e
2 2 1 2 1 1 1 2 2 1 1 1 1 1 1 (21 shaqal)

T) Miisaanka Carraale

Miisaankani waxa uu gaar u kala miisaamaya Hojiska iyo Hooriska gabayga
7,5= Geedbuu ku saaraa kolkuu, kuu gol leeyahaye =6,2
7,5= Waa soo sidnaa xeedhyihii, saabka loo tolaye =6,2
7,5=Guuguuliyoow haddaad, gu'ga u ooyayso =6,2

4.7.2. GEERAAR

Geeraarku waa mid ka mid ah Badaha Maansada waanu ka gaaban yahay dherer ahaan Gabayga. Waxa uu leeyahay cod u gaar ah oo lagu garto. Waa tiirka labaad ee maansada xagga caan-nimada, waxaanu labeeyaa gabayga. Dhererka meerisyada ama tuducyada Geeraarku waa qaar ka gaabgaaban kuwa gabayga.

Geeraarku taariikh ahaan waxa uu ka mid yahay badaha maansada kuwa ugu da'da wayn, waayo waxa ku qotoma hees hawleedyo la qaadi jiray muddo fog, geeraarka waxa inta badan loo adeegsan jiray amaanta gamaanka , waxa kale oo laga adeegsan jiray goleyaasha. Taasna waxa ka marag ah in la odhan jiray weedhanGeeraarn" gamaan baa leh ama gole ayaa leh", goluhuna waa meesha ay ku caweeyaan geel-jiruhu marka ay geela xareeyaan.

Halbeegga Geeraarka:

Geeraarka waxa hal-beeg u ah tuducyo ku jira hees-dhaqameed ay haweenku qaadaan marka ay wadaan awrta dhaanka ah, heestaas oo ah sidan:

Hobaleey hobaleeyooy
Hobaleey hobaleeyooy

Shaluu taagan ahaayoo
Xaluu tiir ku xidhnaayoo
Wuu tagoogo casooboo
Dhulkuu taakinayaayeey

Hobaleey hobaleeyooy
Hobaleey hobaleeyooy

Waar caddaawe caddaawoow
Carruurtii yaryarayd iyo
Culimaa ku sugeysee
Cagta soo fududeeyeey:

Waxa sidoo kale hal-beeg u noqon kara geeraarka tuducyadan hoose

Waar Hobeeya Hobeeya
iyo
Hooy Hoyaaley Hoyeeya

Labadaas tuducba waa qaar hal-beeg u noqon doona geeraarka, waana qaar leekaanaya dhererka tixaha geeraarka oo haddii aad soo qaadato tusaaleyaasha xagga hoose ku xusan ee Geeraarka ah, waxa ay dhammaantood leekaanayaan, tuducaas hal-beega u ah geeraarka.

Xaraf-Raac isku mid ahi waa inuu ugu yaraan ku jiro dhammaan tuducyada, sadarada iyo meerisyada geeraarka, haddii kale geeraarku waxa uu noqonayaa Jacbur.

Geeraarka waxa ku allifan hees dhaqameedyo dhawr ah. Hees dhaqameedyada ku allifan Badda Geeraarka waxa ka mid ah heestan loo qaado marka uu dibigu beerta qodayo oo lagu samirsiinayo

dibiga, looguna sheegayo in loo sad burin doono markay beertu bislaato ee ah:

Markay beertu bislaato
Bullaaloow labadeena
Waa naloo badhi goyn

Sidoo kale Geeraarka waxa ku sargo'an heestan la qaado marka firilayda (Galleyda, Garawga iyo Qamadiga) la haramaynayo ee ah:

Bariiskii cadcaddaa ee
Badda looga tallaabay
Waa kan oo la budeeyoo
Buushihii laga saarayoo
Biyo loo kululeeyay

Geeraarada waxa ka mid ah,heestan loo qaado marka gammaanka tartanka orodka loo qabanayo ee ah:

Dalmaroow faraskayga
Waa inaad dagdagtaayoo
Sida haadka u duuloo
Daruuraa kor u dhaafoo
Dayaxaa ka cawee

Sidoo kale heesaha caanka ah ee Geeraarka miisaankiisa leh waxa ka mid ah heesta uu Maxamed Saleebaan Tubeec qaado ee "Iiid wanaagsan", oo ay erayadeedu yihiin:

"Alla maanta ayaanta
Iyo iidda wanaagsan
Ilaahii ina siiyay
Isagaa ku abaal leh
Way ahaataye maanta
Si wanaagsan u iida

Ardey joogta iskuulka
Odayaal talinaaya
Ilaahii ina siiyay

Isagaa ku abaal leh
Way ahaaate maanta
Si wanaagsan u iida"

Geeraarada hal-abuurradu curiyeen ka mid ah geeraar uu magaciisu yahay "Ugaasoow toban xaajo". Geeraarkan waxa tiriyay Guraase Xaaji Cali oo ku noolaa carra-ogaadeen. Guraase sida la sheego waxa necbaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, Waxa uu ka mid ahaana raggii abaabulay shirqoolkii loo yaqaanay "Kala kacii Gurdumi". Gabayo badan ayuu Sayidku ugu hal-daray, isaguna geeraarkan ayuu tiriyay:

Ugaasoow toban xaajo
Oo ta'da looxa ku taal
Oon laga toosi karaynin
Bal ma kuu tiriyaa
Talo waa boqor baa leh
Tawfiiq Ciise Madoobiyo
Talyankii Faranj baa leh
Taandho reer Berberaad iyo
Turkigii xukumaa leh
Tuhun shiishka Amxaariyo
Nin la soo tashadaa leh

Talo waa boqor baa leh
Isagoo malab tuuqsan buu
Macaluul mid la taagan
Tiigsin dheer la dhacaa
Markaasuu turturqaa
Nin maroodi taxaabay

Oo abees tunka saartay
Inuu aadyar taxaasho
Taana waanay ahaanin

Tartar dheere nin fuulay
Laba tiiri afaystay
Tuur bannaan cido gaystay
Timaa reer Dalal sheegtay

Isla taakulin mooyee
Anaa kuu talinaaya
Taana waanay ahaanin

Tolkii aynu naqaanay
Ogaadeen taladiisa
Taan idhaahdo un mooyee
Tu kaleeto ma joogto
Taana waanay ahaanin

Geeraarada casriga ee weliba dadka qurbe-joogga ahi ay tiriyeen waxa ka mid ah kan uu sameeyay Abwaan Jamaal Cali Xuseen oo ah hal-abuur sameeya tixda iyo tiraabtaba waxaanu ku qotoma sheeko xiiso iyo qosol badan oo magaceedu yahay Qiirada Qurbe-joogga.

Nin reer Somaliland u dhashay oo qurbaha ka tegey ayaa markii ugu horreysey waddanka ku laabtay isaga oo aad u qiiraysan. Maalin buu isaga oo lugaynaya meel ka mid ah magaalada Hargeysa wuxuu soo ag maray waab yar oo ay islaani shaah ku iibinayso, halkaas oo uu fadhiyay nin kale oo isagu dadka aan weli waddanka ka dhoofin ah. Halkaas waxaa ku dhex martay saddexdan shakhsiyadood sheeko qosol xikmad leh oo fariin muhiim ah xanbaarsan, iyo weliba Maanso jiifto ah. Ninkan qurbaha ka yimi waxa la yidhaa "Qurbaawi", islaantana waxa magaceeda la yidhaa "Qaleeya", ninkan waddanka degganaa ee islaanta waabkeeda hore u sii fadhiyayna waa "Qowdhan".

Ninkii Qurbaawi ayaa markuu waabkii soo istaagay hadalka bilaabaya oo odhanaya:

"Meeshan sidee baad ugu nooshihiin, waa meel ay dadkii dhisan waayeen, bal eeg siday u burbursan yihiin waddooyinkani. Weligay meel sidaa waddooyinkeedu u xun yihiin kumaan arag caalamka intaan marayay."

Islaantii meesha shaaha ku iibinaysay ee Qaleeya ayaa u jawaabaysa oo odhanaysa:

"Hooyo waan ku arkaayoo nin dibadda ka yimid baad u eegtehee, miyaanad hooyo la socon wixii waddankan ku dhacay. Beri baa waxa la yidhi markii ay diyaaradahii dawladdii Siyaad Barre dadka Hargeysa ku rushaynayeen ayaa oday iyo islaantiisa iyaga oo jooga Geed Deebleh, ay halkaa diyaaraddii ka soo baxday maalin ka mida maalmihii rusheyska. Odaygii ayaa islaantii ka cararay intuu aad u naxay markay naftii qabatay. Ka dib markii ay dayuuradihii dhaafeen ayaa islaantiisii odhanaysaa "Bal odaygan fulayga ah eega, raggii hore ma iyagaa carari jiray". Odaygii baa intuu deg-deg u soo booday dhakhso ugu jawaabaya islaantiisa oo odhanaya "Ee orodoo naga tag, raggii hore ma samadaa lagaga iman jiray" Islaantii Qaleeya oo tusaalahaa u soo qaadatay oo ku leh ninkii Qurbaawi; dhulkan Somaliland samada ayaa lagaga yimi oo ha barbar dhigin waddamadaa aad soo aragtay ee aanay iyaga cidi rusheeynin.

Ninkii Qurbaawi baa dhinacna ugu qushuucay tusaalahan qosolka iyo xikmadda wata ee ay islaantu u dhiibtay, dhinacna ka yara xishoodsan oo isagoo is dhaafna ka muuqdo ku leexinaya arrintii Siyaasiyiinta waddanka oo odhanaya:

"Hooyo waan ku fahmee, laakiin waddankan siyaasiyiin ayaa ku ciyaaraya oo aan dadkii waxba u qabanaynin", halkaa waxa dooddii la wareegaya ninkii meesha fadhiyay ee "Qowdhan" oo hadalkii qaadanaya oo odhanaya: "Horta qolooyinkiinan qurbaha nagaga yimaaddaa ereygan siyaasad qalad ayaad ka fahamteen oo dhinac kale ayaabad u qaaddeen". Ninkii Qowdhan oo hadalkiisii sii wata ayaa odhanaya: "Beri baa nin reer miyi ah lagu yidhi bal waxaad sharaxdaa erayga "Siyaasad" micnahiisa? Ninkii reer miyiga ahaa ayaa intuu dhinacyada eegay odhanaya isagoo sharaxaya erayga siyaasad; " Erayga Siyaasad waa marka konton nin oo isku reera oo meel ku shiraysa adigoo shirka kula jira uu midi kabahaagii gashado marka shirka laga soo baxo, sidii aad u garan lahayd kii kabahaaga gashaday baa la yidhaa "Siyaasad". Sidaasuu ninkii reer miyigaa ahaa u sharaxay siyaasad.

Hadalkisii isagoo sii wata ninkii Qowdhan wuxuu odhanayaa:

"Markaa ninkaagan dibadda ka yimidoow dareenkaagu ma xuma

laakiin halkaa ay diiraddu kaa qabsatay maaha xaalku, wax aad siyaasad moodaysid ayaan siyaasad ahayn. Ma ogtahay in Dhulkii uu idinka uun idin sugayo oo aan cid kale u maqnayn, haddaba malaha war baa kaa maqane bal aan kuu sheego waxoogaa Maanso ah oo la yidhaahdo "Qiirada Qurbo-Joogga" oo aan anigu maalin dhexdaas ah Qurbo-Joogga adiga oo kale ah kula hadlayay. Jamaal wuxuu yidhi:

Qaaddirkeen Allaheen
Quraankeena nimcaysan
Qoraalkiisa hanuunsan
Qunyar baa lagu sheegay
Gacantoo lays qabtaa
Qudh-bax lays tusaa
Qadarin laysku qiraa
Quus laga reebo dalka hooyo,
Waa mid diintu qiraysoo
Qaaddirkeena u qushuucay.

Qayrkiin Afrikaan
Qiyaastii arligooda
Qurus-doonka shacbigooda
Qarqiyoo kor u qaad
Qurbahay ka kaceen
Quudkay u kaceen
Gaajoy ka qabteen
Muruq bay qotonsheen
Maskax bay ku qabteen.

Qurbo-joog xisaabteenna
Qiraynaa samahaaga
Inaad qayb ka ahaato
Siyaasadda qarankeenna
Qorashaha ummaddeenna
Qaabka waddankeenna
Qayb weeye ku sugaysa.

Qof kale inaad eegto
Qaranka aad ku hallaysid
Hadday qiiro ku hayso
Dalka qiimo u hayso
Quluubtaadu la hayso
Qalbigaagu la haysto
Qurbo-joog waan ku rabnaa.

Qanacaa deg-degee
Dadkii quus ka dhigaaya
Qoonsimaadka abuuray
Qiyaastii laga yaabay
Adoo quudhsi ka reebay,
Qunyar sheeg danta guud.

Qarankan waddankeenna
Qaadhaankaa dibaddaa
Qatanaanta ka saara,
Qaaddirkeen ku ilaali
Qalbigaa ummaddeenna
Quluubteeda hagaagsan
Qolofteeda midaysan
Quwad weeye sarraysa.

Qoraalkii xusuusteena
Qawlaysatadi baas
Qudhunkii berigii
Qiilkii dabar-goynta
Qoladii hor-istaagtay
Qurbo-joog qayb ka ahaa
Dadkuna weydiin qirayaa.

Qiyaamaha xasuustiisa

Qaabbila danyaroo
Qaylo dhaan ugu baxoo
Qudh-bax weeye dadweynoo
Qiil dambaan jireynoo
Waa sidaa Qurbo-joog
Qarankaydin sugaayee.

Qiyaastii ma filaayo
Dadkuna way la qabaa.

Qac ku siiya indhaayoo
Qawlkiinna adkeeyoo
Qiimeeya baahida,

Eesh Qiyaasak Qurbo Joog, Qarankaydin sugaayee!

Geeraarkan waxa laga sameeyay hees ku jirta albumka heesaha ee "Diiriya" ee soo baxay dabayaaqada sanadka 2009, qaado fanaanka Eng Maxamed Aadan Cali "Himilo". Waa heesta uu kuu soo galo "Barnaamijka Qurbe-joogga", ee ka baxa Laanta Afka Soomaalida ee idaacadda VOA-da.

Way badan yihiin Geeraarada la sameeyay, Maansooyinka caanka ah ee qaata Badda geeraarka waxa ka mid ah:

1.Geeraarka uu sameeyay Sheekh Cabdiraxmaan Allamagan ee Yarad-diid" oo ka mid ahaa manhajkii wasaarada waxbarashada ee Soomaaliya gaar ahaana fasalka 2aad ee dugsiga sare, ee erayadani ku jiraan :

"Meel sifaarkiyo hiishiyo
Sagan-daaqa Biciidkiyo
Sakaarooyin galaanoo
Sool dhaxaanu dagnaa"

2.Geeraarka Rafasho ee uu sameeyay Cabdilaahi Cabdi Shube, ee ay tuducyadiisa ka mid yihiin :

"Roob magaalo ku hooray
Ramaas sooma baxshee
Laamiduu ku raftaa"

3. Geeraarka uu sameeyay Faarax Nuur ee ″Ka samaan ka samaan″ oo ka mid ahaa manhajkii wasaarada waxbarashada Soomaliya ee dugsiga sare ee ay ka mid yihiin:

″Haduu saakimi waayo
Salli baan u dhigaayoo
Iska seexo idhaa″.

4.7.2.2 Miisaanka Geeraarka

B) Miisaanka Carraale

6,2=Sida daad u sabbee
7,2= Culimaa ajar roone
6,3= waa badbaado qabnaa

T) Miisaanka Gaarriye

Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa Geeraar uu sameeyay Raage Ugaas oo ah:

Walhadoow faraskaygu
1 1 2 1 1 1 1 (8 shaqalle)
Meel walaaqtan col joogo
2 1 2 1 1 2 1 (9 shaqalle)
Riddo soo widhwidhaysuu
1 1 2 1 1 1 2 (9 shaqalle)
I waydaarinayaaye
1 1 2 1 1 2 1 (9 shaqalle)
Ma walaakay rumaa
1 1 2 1 1 2 (8 shaqalle)

4.7.3. Jiiftada

Jiiftadu waxa ay ka mid tahay badaha Maansada, waa badda saddexaad ee u caansan badaha maansada gabayga iyo geeraarka

kadib. Jiiftadu waa nooc gaagaaban, samaynteeduna waa sahlan tahay. waxa ay hadda inta badan badashay Gabaygii iyo geeraarkii. Jiiftadu waxa ay leedahay dhawaaq ama cod gaar ah oo lagu garan karo markaba.

Hal-beega Jiiftada

02/December/2008, ayay soo baxay tuducyadan hal-beegga u ah jiiftadu:

Hooyaalayeey Hooy
Ama
Hoobeey Hobeey Hooy

Labadaas tuduc waxa ay halbeeg u yihiin jiiftada. Jiifto kasta oo la sameeyayna waxa ay leegtahay labadaas tuduc. Hdadii ay Jiiftadu leekaan waydo dhawaaqa tuducyadaasna, Jiiftadu waxa ay noqonaysaa mid laaxin leh. Tusaaleyaasha Jiiftada ah ee xagga hoose inoogu xusanina waa qaar le'eg halbeegaas Jiiftada.

Xaraf-Raac isku mid ahi waa inuu ku jiro dhammaan sadarada jiiftada ugu yaraan. Haddii kale jiiftadu waxa ay noqonaysaa jacbur.

Jiiftadu waa bad soo jireen ah oo ku aroorta qarniyadii hore, gaar ahaan waxa ay ku abtirsataa, kana soo jeeddaa ciyaaraha dhaqanka ah ee laga ciyaaro miyiga. Waxaana luuqdeeda ka samaysan heeso dhaqameed badan oo ay ka mid tahay heestan la isticmaalo marka awrka la rarayo ee ah:

Dhagoyaroow dhadaa qubatee
Bal an dhaxanta kaa dado

Iyo weliba heestan la adeegsado marka awrka rarka ama dhaanka laga furayo ee ah:

Siduu caynku kuu gubay
Cagtaa ii dalooshee.

Jiiftada waxa ku cabiran ama ku jaan go'an qaar ka mid heesaha la adeegsado marka la isugu yimaaddo golayaasha lagu qabto ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, sida ciyaarta loo yaqaano **Jaandheerta**. Jaandheerta waxa laga qaadaa heestan leh cabirka Jiiftada:

Arday macalin baa waday
Askarna saajin baa waday
Anna amar Ilaah iyo
Aardoon ayay waday

Wiglada oo ka mid ah ciyaaraha dhaqanka, ayaa iyadana lagaga luuqeeyaa heestan oo qaadanaysa dhererka Jiiftada. Heestaas oo ah:

Hablaa la igu aaminay
Ha iga aflagaadayn.
Haddii lagugu aaminay
Maad wada abaahidid?

Jiiftada waxa ka unkan heesta laga qaado ciyaarta loo yaqaano "***Sacabka***" oo laga ciyaaro dhul uu ka mid yahay Gobolka Sanaag, hees ciyaareeddaas oo ah mid duco ahi waa tan:

Cawdu bille balooy baydh
Cawodaran ka yaasiin

Hees kale oo laga qaado ciyaarta loo yaqaano "***Hogol Casar***" oo ka mid ah ciyaaraha dhaqanka ee Gobolka Sanaag, ayaa iyaduna waafaqda badda jiiftada, heestaas oo ah:

Meeshu waa jameecaad
Waa culimo jaaheed
Alloow jirabka naga hay (tuducan waan yara saxay)
Yaan jalleeco nala tagin

Jiiftada waxa ku saleysan badi heesaha ay qaadaan fannaaniinta Soomaaliyeed, sidoo kale waxa ku salaysan silsilado maanseed caan baxay oo ay ka qaybgaleen Hal-Abuuro caan ah oo magac iyo maamuus ku leh gayiga ay Soomaalidu ku nooshahay, silsiladahaas

maanseed oo ay ka mid tahay “Silsiladii Siinley” iyo waliba “Silsiladii Deelley”.

Jiiftada tusaalaheeda waxa inoo noqon karta maansadan uu magaceedu yahay waxan ahay afkaagii, ee uu sameeyay Xasan Daahir Ismaaciil “Weedh-Same”. Taariikhdu markii ay ahayd 16kii February 2008.

Abtirsiinadaadiyo
Isirkiyo abkaagiyo
Waxan ahay astaantuu
Dadku kugu aqoonsado
Waxan ahay afkaagii

Waxan ahay afkaaraha
Cudud lagu abqaaliyo
Axadhkiyo u-fiirsiga
Codka lagu aloosoo
Garashada ugaaska ah
Anigaa aroorshee

Mar haddaan abaarsado
Kasmadiyo aqoontaa
Arradoo basaasoo
Ergisada dhiggaabaad
Ilbaxnimo ka eegtaa
Waxan ahay afkaagii

Jiiftooyinka waxa ka mid ah tan baroodiiqda ahi ee uu Bashiir Good ka sameeyay Geeridii Abwaankii caanka ahaa Xasan Sheekh Muumin oo ku geeriyooday 20/January 2008 magaalada Oslo, Norway, laguna aasay magaalada Boorama. Maansada magaceeda waxa la yidhaahdaa “Qudbigii Suugaanta”.Waana kuwan erayadeedii:

Duniyeey qadaraleey
Qabar xumi ma oolee
Maantana qab baa dhacay
Qaylaa habeen timid

Ababshihii qoraalkiyo
Qodinkii aqoontiyo
Qudbigii suugaantiyo
Gorod baa la qaadoo
Qaddarkii haleeloo
Qalinkiisi joogsaday

4.7.3.2 Miisaanka Jiiftada

B) MIISAANKA GAARRIYE
Gaarriye shuruudan ayuu u dhigay miisaamidda jiiftada kala ah
1. Bayd kasta oo Jiifto ahi waa inuu ahaado Tobanle ama Sagaalle ay xundhurtu miisaanto.
2. Shaqalladu iskama filiqsana ee hab go'an ayay isu raacaan.
3. Shibanayaasha isxigsada ama labanlaabma meelo gaar ah ayay ku leeyihiin Jiiftada.

Habka miisaanka Jiiftada ee Gaarriye waxa tusaale u noqon kara heesta Jiiftada ah ee uu sameeyay Cabdiqaadir Xirsi Yamyam oo ah:

Gudgudaa i miray xalay
1 1 2(1) 1 1 1 1 (9 Shaqalley)
Daruur baa i guud timi
1 2 2 (1) 2 1 1 (10 shaqalley)
Wixii haro galsho lahaa
1 2 1 1 (1) 1 1 2 (10 shaqalley)
Xareed baa ka galac tidhi
1 2 2 (1) 1 1 1 1 (10 Shaqalley)

T) MIISAANKA CARRAALE
7,2= Guul maalintay tahay

9,0= Saddex dumarka kaga tagay
5,4= Goormuu gudaayaa
7,2= Gacantaada iga daa
7,2 =Good iyo Abees ku cun

4.7.4 MASAFO

Masafada oo lagu naanayso, "**Maanso Culimeed**", waxa aasaasay samaynteeda Culimada, waxaanay leedahay habdhaca iyo luuqda Jiiftada, waxa ay se kaga duwantahay laba bayd oo kasta oo Masafada ka mid ahiba waxa ay sameeyaan macno buuxa oo dhamaystiran, gaarna way isu raacaan, inkasta oo ay Culimadu aasaastay Masafoda, haddana waxa la adeegsada Hal-Abuurada kale ee Maansoleyaasha ah. Masafadu waa tiirka afraad ee maansada xagga caan-nimada.

Masafoyinka waxa ka mid Masafada uu sameeyay Sayid Maxamed Cabdalle Xasan, ee uu u tiriyay Cali Dhuux Aadan isaga oo Sayidku ku sheegay Cali-Dhuux qof jaahil ah oo diinta wax badan ka aqoon, isla markaana aan lahayn sifooyin wanaagsan waxa uu Sayidku yidhi:

- *"Nimaan sharaxa diimeed,*
- *Sheynaba ka suurayn*
- *Haddii aad u sheegtana*
- *Shaqfadloo aan gararayn*
- *Adiguna aad sheekh tahay,*
- *Isaguna sharmuud yahay*
- *Oo kula shikaayoon,*
- *Illeen waa shiddiyo hoog*
- *Nimaad gabadh la shaaximay,*
- *Shuqduf ilaxidh ugu gelin*
- *Oo shuqul gobaadeed,*
- *Shararraaxin ugu dari*
- *Oo sheemadii geel,*
- *Boqol xerada ugu shubi*
- *Oo shaharka jiilaal,*
- *Shabcanaaya caanaha*
- *Oo sheelka gurigaa,*
- *Shirka talada loo wici*

- *Oo kuu shisheeyaa,*
- *Isna waa shiddiyo hoog"*

Masafooyinka kale waxa ka mid ah Masafada la yidhaa Gobanimo ee uu sameeyay Xaaji Aadan Axmed(Afqallooc) ee uu Ummada Soomaaliyeed ugu guubaaninayay in ay hantaan xoriyadooda. Isaga oo abwaanku tusaale u soo qaatay rag waddamadoodii xoreeyay sida Mhatma Gandhi, oo ah Aabbaha Hindiya, ahna ninkii xoreeyay wadanka India, iyo weliba Kwame Nakruma oo ah ninkii xoreeyay waddankii la odhan jiray Gold Coast(Xeebta Dahabka), haddana loo yaqaanno Ghana oo ah waddankii koowaad ee ka tirsan Afrikaanka madow ee xoriyaddiisa hela, oo xoroobay 1957. Xaaji Aadan waxa uu yidhi:

"*Gobanimada Hawl yari*
Qofna kuma helaayee

Habeen nin aan u guurayn
Hoo lama yidhaahdee

Halkay taal wax kaa xiga
Halis iyo dab weeyee

Hore aan u jiidhnaa
Hadafkeenu yahayoo

Haytamihi Gaandaa
Baryo lagu hor joogee

Hanadkii Nakruumana
Hibadii buu helaayoo"

Masafada siyaabo kala duwan ayaa looga yaqaanaa dhulalka ay Soomaalidu dagto. Masafada xagga sare ku xusanina waa Masafada laga yaqaano dhulka Woqooyiga Soomaalida sida Gobolada Killilka Shanaad ee is-maamulka Soomaalida Itoobiya, Jabuuti, Puntland, Somaliland goboladeeda oo dhan. Sidaas daraadeed masafooyinkaas sare waxa aan ku sheegi karaa in ay yihiin '*Masafo-Woqooyi*", maadaama oo dhulka laga adeegsadaa uu yahay dhul u badan

woqooyi, marka dhulka ay Soomaalidu dagto loo qaybiyo Woqooyi iyo Koonfur.

Waxa jirta nooc kale oo Masafo looga yaqaano Gobolada Koonfureed ee Soomaaliya. Masafadaas oo gabi ahaanba ka duwan masafada xagga sare ku xusan waxa la odhan karaa waa "*Masafo Koonfureed*". Maadaama oo laga istcimaalo dhul u badan Koonfur marka dhulka Soomaalida loo qaybiyo Koonfur iyo Woqooyi.
Masafo-Koonfureedaas oo laga adeegsado Muqdisho iyo gobolada ku hareeraysan waxa ka mid ah masafadan aanan toos hadda u sixi karin hal-abuurka allifay ee ah :

"Soomaali aan u dagaalamayaa
Dalkan ballaadhan u daafacayaa
Kuwa dulmiyayaa la dawgalayaa
Kufriga soo dagay diida leenahay
Dantiinu duul kale dawri maysee
Ha daalinoo u dul qaata leenahay
Dabaylkii mawdku inuu I dandeeyo
Hilibka duul cunin deeb ma noqone
Dadkaan tus danihiisa leeyahay
Duriyadaada dab looma aasee
Kuwa dambaan u dariiq falayaa"
.

Masafada laga adeegsado koonfur waxa ka mid ah masafadan uu magaceedu yahay "Shaharka Soon" ee uu Sheekh Axmed Gabyow "Wacdiyow" kaga waramayo dhibaatada ka dhalanaysa haddii laga tago shanta tiir ee islaamka.

"Shaharkii soon iyo shaatadii dagoo
Haddii la sheelay shantii salaadood
Shahaadataynka shayb iyo shaabkii
Shafawiga loo ekaystay sheegmada

Shiribkii on sharcigeen banaynahay
Shabashabadood shahya huuh dhahaysiin
Iminka shuushku idiin yimaaddee
Shuulihiina la isku soo shiro

Shanshoodhinkiina laysku shiil tiro
Sharqi xaggiisna shawrigii la aadiyo
Shisha ka hoosna shilaal la isku shaqaalo
Shida dhacdaase shalaayi doontiin
Wacdigaan sheegana waad shakeyseen
Shaq uma siinin dhagahiina shaaqalan
Aw sheekhda beenana waad shubayseen
Shar ka dibaase shalaayi doontiin"

Fiiro Gaar ah: Masafo Koonfureedu waxa ay la nooc tahay Wiglada (Heellada/Balwoda) oo iyaduna ah nooc ka mid ah maansada oo aad ku arki doontaan qaybaha dambe ee buuggan.

4.7.4.1 Miisaanka Masafo Woqooyiga

B) MIISAANKA CARRAALE

Waxa aynu u soo qaadan karnaa masafadan Xaaji Aadan "Af-qallooc"
7,2=Surwaalkuu lahaa gabay
6,3= Adigaa ka saaree

T) MIISAANKA GAARRIYE
Waxa aynu tusaale u soo qaadan karnaa maansadan Ibraahim-Gadhle

Muruqaagu yuu noqon
1 1 2 (1) 2 1 1 (9 Shaqalley)
Magli dila walaalkii
1 1 1 1 (1) 2 2 (9 Shaqalley)
Maskaxdaadu yay noqon
1 1 2 (1) 2 1 1 (9 Shaqalley)
Maqal lagula leeyahay
1 1 1 1 1 2 1 1 (9 Shaqalley)

4.7.4.2 Miisaanka Masafo Koonfureed-da

Miisaanka Gaarriye
Soomaali aan u dagaalamayaa
2 2 1 2 1 1 2 1 1 2 (14 Shaqal)
Dalkan balaadhan u daafacayaa

1 1 1 2 1 1 2 1 1 2 (13 Shaqal)
Kuwa dulmiyaaya la daw galayaa
1 1 1 1 2 1 1 1 1 1 2 (13 Shaqal)
Kufriga soo dagay diida leeyahay
1 1 1 2 1 1 2 1 2 1 1 (13 Shaqal)

4.7.5 Buraanburka

Buuraanburka oo loo yaqaanno "**Maanso Haweeneed**" , wuxu ka mid yahay badaha ay qaadato maansadu. Waxa inta badan sameeya haweenka ama dumarka, maadaama oo ay badana samayntoodu gaar u noqotay haweenka. Waxa lagu tilmaamaa in uu yahay "**Boqoradda Maansada**". Buraanburka waxa barigii hore loo yaqaanay, asal ahaana uu ka yimi **Guraangur,** waxaana la odhan jiray (Guraangur guri baa leh), sababta buraanburka loogu yaqaanay guraangur waxa weeye, wakhtiyadii hore, buraanburku muu lahaan jirin xaraf-raaca ay maansooyinka kale leeyihiin, tuducyada buraanburkana waxa laga soo guri jiray xarafyo kala duwan.

Haweenku waxa ay leeyihiin suugaan balaadhan oo qiime badan. Waxa jira haween sameeya qaybo badan oo suugaanta ka mid ah. Laakiin baddani iyaga ayay gaar u tahay, raggana waxa ay la wadaagaan suugaanta kala gedisan curinteeda, ragru haba kaga badnaado'e.
Tuducyada/meerisyada buraanburku waa qaar leh dhawaaq gaar ah oo lagaga sooci karo qaybaha kale ee maansada sida gabayga iyo geeraarka iwm.

Tuduca Halbeega u ah Buraanburka

Buraanburka marka ay haweenku ku luuqaynayaan waxa jira tuduc aad u soo noqnoqda oo aan u fasiray in uu yahay halbeega tixaha buraanburka, tuducaasina waa:

Eey hoobalaay, hoobalaay, hoobalaay, haddaba

Xarafku waa inuu ugu yaraan laba jeer ku jiro meerisyada buraanburka. Laakiin buraanburku waxa uu u badan yahay noocii aynu soo qeexnay ee Jacburka, ama maansada aan lahayn xaraf ay ku

socoto bilaw illaa dhammaad. Buraanburka waxa ay haweenku u adeegsadaan xilliyada xafladaha iyo dabbaal-degga, sida aroosyada, Fujaanada, Meherka iyo xilliga geed fadhiisiga ee gabdhaha la kala guddoomayo. Sidoo kale waxa ay haweenku u adeegsadaan Buraanburka qaab waano iyo wacyi gelin ah. waxaanay kula dardaarmaan hablaha ay waalidka u yihiin, bal fiiri Buraanburkan lagula dardaarmayo gabadh la aroosay:

loogu sii daraa
Oo Sariirtuu seexanaayaa
la saxartiraa
Sanqadha waa laga yareeyaa
markuu saldhigo
Soddohdu waa hoos qabaw
waana lagu hirtaa
Haddaanay kaa hoyanin waa
hoyga lagu gam 'aa
Naa waana hilawkaagiiiyo
hooyadaa labaad
Inanna kii hooyo leh ayey
hibadu saaranatay

Bilicda gurigaaga ehelkiisu
haw bogaan
Oo naag xun waa lagu
bukoodaaye
baarri noqo
Oo hunbanni waa laga
fogaadaaye
feejignow
Naa sayga oo shaqo ka yimid
sawdka laguma gubo
Sufur qabaw baa biyaha
loogu sii shubaa
Ubadka waa laga sabaa
lagana seexiyaa
Oo subag sixina baa cuntada

4.7.5.1 Miisaanka Buraanburka

B) MIISAANKA GAARRIYE

Waxaan tusaale u soo qaadan doonaa buraanburkan ninka lagu ammaanayo:

Maxamed joog dheere janankii magaaladoow
1 1 1 2 2 1 1 1 2 1 2 1 2 (18 Shaqal)
Janno ku waaroow jacayl baa laguu qabaa
1 1 1 2 2 1 1 2 1 2 1 2 (17 Shaqal)

T) MIISAANKA CARRAALE

Aynu soo qaadanno Buraanbur ay samaysay Xaliimo Sheekh Cismaan Nuur oo ah:

8,2= Raggaba giiryaale iyo, geesigii la hubo =6,3
6,4= Hadday goolaaftamaan, waa gudboonyihiin =5,3
7,3= Hadday goob wada tagaan, geela kala badsade =7,1

Guuroowga

Guuroowgu waa nooc ka mid ah Maansada waxaanu laga adeegsadaa deegaano u badan Koonfurta iyo badhtamaha Soomaaliya,. Mararka qaarkoodna waxaba la sheegaa in uu yahay Gabayga qudhiisa oo koonfur looga yaqaanno Guuroow. Laakiin waxa uu leeyahay luuq u gaar ah oo lagu garto marka codka la saaro.

Guuroowgu waxyaabaha uu gabayga kaga gadisan yahay waxa kale oo ka mid ah, in aanu lahay Hojis iyo Hooris kala qaybsan, oo ay xidhiidh yihiin dhammaan tuducyada tixaha Guuroowga ahi

Guuroowyada waxa ka mid ah Guuroowgan:

Maal badan ninkii yeeshay iyo maro adduunyaale
Amba muuq qurxoon lagu arkoo midab u nuuraayo
Amba maanso badan lagu arkiyo gabay macaanaaday
Aadane intuu milicsiyaan cidina moogeyne
Mawloow noo dhaxeey, waadigii magaca waynaaye

Maahmaahyada haddaan soo qodo iyo hadalka maantoo ah
Mool sireed ha qodin oo islaam lagu mixneehaayo
Maahuu kuugu sugaayaa had waa lagama moodaane
Mar uun baad galaysaa waxaad kali miraaftaaye

Maahmaahyada haddaan soo qodo iyo hadalka maantoo ah
Labo maydtiday kugu rabaan sida ah maankooda
Labo inay maqnaatay rabaan maanta idilkeedba
Laba muuqashay kugu rabaan minanka joogiisa

Martidii muraad kaa leh oo minanka soo aaday
Iyo maallkaaga ah intaad maamul ka ahayde
Hadday meel isaga soo dhacaan ee la wada maadsho
Ma jogaa iyo maya warkay mahadiyaan waaye

Oo inaad maqnaatay rabaan maanta idilkeeda

Macyuub inaadeerkaa ah oo magac darro u diiday
Ee maal asaan dhiibi rabin laga maroogsiiyay
Munaafaqa shisheeyoo cabsada meel uu kugu jeedo
Labadaasna maankooda waa inaad ka meytaawdo

4.7.6.1 Miisaanka Guuroowga

Miisaanka Gaarriye

Guuroowga waxa tusaale u ah tudcuyo ku jira guuroowga xagge hore aan ku qornay ee ah:

Maahmaahyada haddaan soo qodo iyo hadalka maantoo ah
2 2 1 1 1 2 2 1 1 1 1 1 1 2 2 1 (23 Shaqal)
Nin markhaatiqeed loogu yimi xaajo muran gaartay
1 1 2 1 2 2 1 1 1 2 1 1 1 2 1 (20 Shaqal)
Ma heshaa hadii ay dhanaa niman maaqabeen ah
1 1 2 1 1 1 1 2 1 1 2 1 2 1 (18 Shaqal)
Uusan maya iyo haa dhihin saw mushkilad maaha?
2 1 1 1 1 1 2 1 1 1 1 1 1 2 1 (18 Shaqal)

4.7.7 Wiglo (Heello, Dhaanto, Balwo, Hirwo)

Wigladu waxa ay ka mid tahay Badaha Maansada. Waxay ahayd mid soo jireen ah oo lagu xuso dhaqanka. Welgadu waxa ay leedahay dherer iyo cabbir gaar ah oo lagu garto marka lagu dhawaaqayo.

4.7.7.1 Tuduca Halbeegga u ah Wiglada

Wiglada, Heellada , Balwada, Hirwada ama dhaantada, waxa halbeeg u ahaa tuduc laga qaado ciyaaraha Heellada iyo Hirwada tuducaas oo ah

Hellooy helleellooy hellooy helleelooy

Laba eray oo ka wada bilaabmaya xaraf isku mid ahi, waa in ay ugu yaraan ku jiraan qaybta hore ee wiglada iyo qaybta dambe ee Wiglada. Haddii kale wigladu waxa ay noqonaysaa Jacbur.

Ciyaarta "**Dhaantada"** marka laga ciyaarayo hawdka waxa la adeegsadaa heeso uu ka mid yahay tuducan oo wiglo ama Balwo ah:

Hablaha Cali Khalaf Ciyaartoodiyo
Codkoodaan ku caano maalnaa

Cali Khalaf, waa qabiil ka mid ah qabiilada Beesha Ogaadeen.

Sidoo kale Ciyaarta Dhaantada, oo la qabto xilliyada arooska iyo xilliyo kaleba ayaa iyana la adeegsadaa tuducan wiglada ama balwada ah:

Caruuska ciyaarta loo tumayoow
Ku curo Cabdinaasir oo kale

Cabdinaasirka tuducan ku xusani waa **Jamaal Cabdinaasir**, Madaxweynihii Masar ee Reer Galbeedka kala wareegay Kanaalkii

Suweys oo iyagu ay sameeyeen laakiin ku yaalay dhulka Masar oo ay qodistiisana ku hawlanaayeen 12 sanno (1857-1869).

Wiglada hab-dhaceeda waxa leh heesta la qaado marka la ciyaarayo ciyaar dhaqameeda ***Dafka*** oo laga ciyaaro gobolka Maroodijeex. Heestaas oo ah:

"Sidii qudunquuto qaaxo yareey
Markaad qososhaan ku qaayibayeey".

Ismaaciil Sheekh Axmed "Cagaf" tuducyadan uu sameeyay ayaa baddan wiglada iyaguna waafaqaya, tuducyadaas oo ah kuwan:

"Sad iyo calafbaa sidaa wax yidhee
I seegtaye samo ku nooloow"

Xuseen Aw Faarax ayaa isna tuducyadan wiglada ah sameeyay:

"Burcana uga baxay dhankaa bari
Ka baaqay banaanadii hawd
Bogaygu ka dhuubay baal dacar
Booraan Dacawaan Basraay idhi"

Baddan wiglada ama balwada, waxa Maansooyin badan oo qaayo weyn ka unkay **Maxamed Ismaaciil Baasarce**, oo loo yaqaannay berigii uu noolaa Balaayocas, markii uu dhintay se loogu badalay Barkhadcas, oo ahaa nin ku caan baxay nacaybka gumeysiga, wadaniyada iyo dareeno qotodheer oo dal jaceyl ah. Barkhad cas waxa lagu tilmaami karaa abwaanka sameeyay maansooyinka u qiimaha badan ee baddan wiglada laga sameeyay. In badan oo ka mid ah waqtiyada aan badda wiglada xasuustana niyadayda waxa ku soo dhaca Barkhadcas.

1958kii markii la furayay Madaarka Hargeysa ayaa waxa imanayay xafladaas, nin lagu magacaabi jirey Duke Of Glucers, oo adeer u ah Boqoradda Ingiriiska, waxaana Barkhadcas laga codsaday in uu sameeyo Maanso soo dhawayn u ah waftigan imanaya. Barkhadacas waxa uu saluugay soo jeedintaas, waxaanu diiday in uu ammaano ninka dalkiisa iyo dadkiisa gumeysta ee xooga ku haysta,ee isku

dayaya in uu diinta Islaamka ku baddalo Kiristanka. Barkhadcas oo laga filayo Maanso Ammaan ah ayaa tiriyay Maansadan magaceedu yahay, **"An ooyee albaabka ii xidha"** oo uu ku muujiyay nacaybka uu Ingiriiska u qabo. Maansadaas oo qaadanaysa Badda wiglada, Barkhadcas waxa uu yidhi:

"Awoowgay ninkii indhaha tiray
Ninkii aabbahay adoonsaday
Ninkii anigana I iibsaday
Ninkii ifka igu adduun tirey
Haddaan ogohoonan ka aarsan karayn
Haddaanan Aadanoow unuunka jarayn
Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee
An ooyee albaabka ii xidha

Isagoo England jooga buu I diloo
Ushuu soo fidshaa I iimaysoo
Waa taa aramidi I oofa tirtee
Haddaan ogohoonan ka aarsan karayn
Haddaanan Aadanoow unuunka jarayn
Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee
An ooyee albaabka ii xidha"

Barkhadcas mar kale ayaa maalin waxa soo martay Gabadh garanaysay, isaga oo fadhiya geed ku yaal Kheyriyada Hargeysa. waxay si ilaaq ugu tidhi, "Toloow qofkani ma qof aan garanayaa". Barkhadcas oo goortaa xanuun hayay uu jidhkiisa dooriyay, ayaa xanuunka haya ku tilmaamay Gumeysiga. Waxaanu gabadhi ku yidhi, "Waxan aan la xanuunsaday ee aan la caatoobay waa aramidii Gumeystaha", waxaanu ku jawaabay Maansadan wiglada ah ee ay ka mid yihiin :

"Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Sidii garanuug joogta gayi abaareed
Amase gari laacay geed sare
Gurucaa dheeri waa gumaysiga

Adiga gabadhyahay habeen gudayee
Anigoon guunyo waayin geel dhalay
Gasiinka la cunno afkaa ma gashee

Gaajiyo cudur gaanka iima sudhnee
Waxa i goday waa gumaysiga

Sidii geesi uu tolkii gacma jaray
Garawshiyo waayay oon gardarayn
Ilmadan gu'i weyday ee gobo'liyo
Gamm'aan diiday waa gumaysiga"

Maansadan mararka iyo meelaha qaarkood waxa loo yaqaannaa Balwo.Waxaana magacaas aad loogu yaqaanaa ciyaar laga ciyaaro/ciyaari jiray asal ahaan gobolka Awdal ee ay magaalo madaxdiisu yahay Boorama., aakhirkiina ku baahday gobolada kale Hargeysa iyo Togdheer. Balwada waxa ka mid ah eraydan uu sameeyay Cabdi Sinimoo ee ah:

"Balwooy waxaa i baleeyay baabuur
Balwooy waxaa I baleeyay Boorama"

Mar kale ayuu Cabdi Sinimoo ka hadlay gabadh uu jeclaa oo Indhocad la odhan jiray oo uu yidhi:

"Iyadoo uurka hooyadeed ku jirtaa
Indhocad ku ayaanso la I yidhi
Imakana iyadoo adeegaysaa
Indhocad arki maysid la I yidhi"

Ciyaarta Balwoda oo awal laga ciyaari jiray gobolka Awdal ayaa ku fiday gobolada kale ee Hargeysa iyo Burco. Markii ay fiday Balwadi ayaa la yidhi tuducan Balwoda ah:

"Balwadi baxsatoo baray qabatee
Bigfoodh ma ku baadi doonaa"

Bigfoodhku waa gaadhi markaas la adeegsan jiray.

Ciyaartii Balwada aakhirkii waxa dhibsaday bulshadii oo ay hogaaminayaan culimadu. Sanadkii 1947 aya magacii laga badalay ciyaartii Balwada, waxaana loo bixiyay Heello. Magacii balwona waxa

loo badalay "Belo" oo ah wax dhibaato wata. Tuducyada Heellada waxa ka mid ah

Wadada loo maruu wad yaallaaye
Wardheer dal wanaagsanaydee

Ciyaarta Hirwada ayaa iyana laga adeegsadaa tuduc waafaqaya tuducyada Wiglada, Heelloda, iyo Balwada. Tuducaas hirwada oo ah

Haddeer anigaa hambaabirayee
Hirwadu ma intaan hurday timi?

Farqiga u dhexeeya Wiglada, Heellada iyo Dhaantada
Wiglada waxa ku jira 12 shaqal, sida

Tufaaxa ku yaalla tolmoonbaan
Habeen walba tiigso leeyahay

Hirwada waxa ku jira 14 shaqal, sida

Hadduu ballankii kaa dhabyahayeey
Biyaan dooni been ku sheegeey

Dhaantada waxa ku jira 16 shaqal, sida

Naa abeeso yaroo af kala haysoo
Hooy la aaminay Aaminaay garo eey

4.7.7.2 Miisaanka Wiglada(Heello Balwo Hirwo)

B) Miisaanka Carraale

10,2= Wixii dharigala dhib ha u dhigan
10,2= Hinqaday anigoo harraad qaba
10,2= Rabiyoow laba talaba tii roon

T) Miisaanka Gaarriye

Tusaale waxa u ah tan aanan rasmi ahaan u ogayn cidda samaysay:
Haddaad hungurooto waa la hadlaa

1 2 1 1 2 1 2 1 1 2 (14 Shaqal)
Hab baa la dhisaa wax lagu helo
1 2 1 1 2 1 1 1 1 1 (12 Shaqal)

4.7.8 Shiribka

Shirabku waxa uu ka mid yahay Badaha Maansada. Waxa uu se ku kooban yahay deegaanno cayiman oo ka mid ah dhulka ay Soomaalidu dagto oo u badan gobolada Banaadir, Shabeelada dhexe iyo agagaarkooda. Waxaa aad u yaqaanna uun dadka meelahaas ka soo jeeda ama ku koray iyo dadka u kuurgala suugaanta. Shiribku waa nooc gaar ah oo Maanseed. Waana tiirka siddeedaad ee maansada. Shiribku waxa uu leeyahay luuq gaar ah oo lagu garto marka lagu dhawaaqayo. Meerisyada ama tuducyada shiribkuna waxa ay leeyihiin dherer gaar ah oo summad ah. Shiribku waa maanso ciyaareed loo qaato warmo iyo gaashaamo la qurixyay.

Laba eray oo ka wada bilaabmaya xaraf isku mid ahi waa inuu ugu yaraan laba jeer ku jiro sadarada shiribka, haddii kale waxa uu noqonayaa jacbur.
Shiribyada waxa ka mid ah shirib ka hadlayay waxyaabo uu Abwaan lahaa “ka diida Buush” waxaanu shirabkaasi ku bilaabmayay:

1. Markaan ku dilo ii ducee, ka diida Buush dadkeygiyow
2. Taada dayace tayda doon, ka diida Buush dadkeygiyow
3.Gumeysi doorta ducufooy, ka diida Buush dadkeygiyow
4.Iiga dambeeya dunidaan, ka diida Buush dadkeygiyow

5.Dusha I saar sidii dameer, ka diida Buush dadkeygiyow
6.Ninkii dukada waa dakhraa, ka diida Buush dadkeygiyow
7.. Dullaal ha beecsho shiik da’ weyn, ka diida Buush dadkeygiyow
8.Iska dud sidii duunyadii, ka diida Buush dadkeygiyow

9.Dimuqoraaddi diin kalaa, ka diida Buush dadkeygiyow
10.Anaaba Daa'in doorinaa, ka diida Buush dadkeygiyow
11. Qofkii dakiya waa dilaa, ka diida Buush dadkeygiyow
12. Diktoor ma rabee deldelaay, ka diida Buush dadkeygiyow

4.7.8.1 Miisaanka Shiribka

Miisaanka Gaarriye

Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa, shiribka xagga sare ku xusan baydad ka mid ah, kuwaas oo ah :
Markaan ku dilo ii ducee, ka diida Buush dadkeygiyow
1 2 1 1 1 2 1 1 1 2 1 2 1 1 1 1 (20 Shaqal)
Taada dayace tayda doon, ka diida Buush dadkeygiyow
2 1 1 1 1 1 1 2 1 2 1 2 1 1 1 1 (19 Shaqal)
Gumeysi doorta ducufooy, ka diida Buush dadkeygiyow
1 1 1 2 1 1 1 2 1 2 1 2 1 1 1 1 (20 Shaqal)

4.7.9 Saarka(Badda Baarcaddeha)

Baddani waa bad ka soo jeeda ciyaartii loo yaqaanay Baarcaddeha,oo ka mid ah Ciyaaraha dhaqanka ee ay Soomaalidu leedahay, ee laga ciyaaro Miyiga. Waa bad leh dhawaaq iyo luuq gaar ah oo dhagta maqasha ee aqoonta u lihi ay markiiba garan karto. Mararka qaarkooda Balooley ayaa loo yaqaanaa. Balooleyduna waa ciyaar waayadii hore la ciyaari jiray oo halhayskeedu ahaa

Ballooley iyo Ballooley hee

Ciyaarta Baarcaddeha waxa halbeeg u ah:

"**Hiyeeleeleey hiyee**" oo dabadeed looga jawaabo "haahaa".

Tuducaas halbeegga u ah ciyaarta baarcadduhu waxa uu noqonayaa tuduca halbeegga u ah badda Saarka. Bal eeg heestan la isticmaalo marka Baarcaddeha la ciyaarayo ee ah:

Hiyeeleeleey hiyee haahaa
Habluhu gaagaabanaa haahaa
Ma gudin baa lagu jarjaray haahaa
Ma guri bay wada galaan haahaa

Sidoo kale waxa isna hore u jiray tuducan halbeega u noqon kara saarka, kaas oo ah:

Hobeeya hobeeya hobeeya

Tuducani waa mid carruurta loogu heeso.

Ugu yaraan waa inay erayo ka wada bilaabmaya hal xaraf oo isku mid ah oo ay ku wada jiraan dhammaan tuducyada saarka, haddii kale saarku waxa uu noqonayaa Jacbur.

Sidoo kale Baarcaddaha waxa ku aroora Maansooyin sabaaleed ay Hooyadu dhalaankeeda ku aamusiiso marka ay ooyaan, sida Heestan oo kale:

Hobeeya hobeey hobeeya
Hobaaladu dhawrtayoow wa
Ma aabbahaa socdaalay
Socdaaloo socod ku raagay?
Ma geelii baa arooray
Arooroo oon ku raagay?
Ma naaskii baa gabnoobay
Gabnoobood godol ka wayday?
Ma reerkii baa sabool ah
Sabooloon subang ku siinin?
Maxaad la samaamureysaa?

Heestaasi waxa ay gaar u tahay Wiilasha sabidooda, waxa hablaha logu heesaa Baarcaddahan hoose, ee ah:

Hobeeya hobeey hobeeya
Hobeeyadu dhawrtayeeya
Sidii bilaneey bil dhalatay
Bil dhalatoo beeli aragtay
Ama sidii biladayaha Adari
Laguu soo wada baxaanbax

Heestan ayaa iyaduna ah mid lagu sabo caruurtu marka ay caruurtu ooydo ee ay ka ooydo dilmo ama dagaal ama guulguulid lagu sameeyay. Iyada oo Hooyadu aamusiinaysa caruurteeda ayay ugu heestaa sadaradan:

Kumaa dilayee dagaalay?
Kuma dayn u sheeganaaya?
Kumaa duur kulul ku jeexay?
Ninkii dila ee dagaala
Ninkii duur kulul ku jeexa
Ninkii dayn u sheeganaaya
Anaa dili oo dagaali
Anaa duur kulul ku jeexi.

Ma malayn kartid qiimaha ay heestaasi u leedahay ubadka iyo micnaha ay dhalaanka u samayso. Mar kasta oo aan heestaas xasuusto ama aan maqlona waxa aan xasuustaa waayo waayo iyo ayaamihii aan yaraa ee ay Hooyaday ii qaadi jirtay hees carruureeddaas sabaalada ah. Waxaana niyadayda ku soo dhaca kalgacalka ay hooyadu u qabto carruurta.

Saarka waxa kale oo ku sargo'an heestan carruurta lagu sabo ee ah:

Samoowa samoow samoowa
Sadkii Rabbi keenayoow wa
Ka soo seexooy subeexa
Ka soo dhuumooy dhurwaaga

Baddani hadda waxa ay ka mid tahay badaha aadka loo adeegsado waxaana laga sameeyay Maansooyin badan oo miisaankaas leekaanaya. Maansooyinka Baarcaddeha raacaya waxa ka mid ah Maansada "Hooyadu waa lama huraan" ee uu sameeyay Careys Ciise

Kaarshe.Careys Ciise oo ku caanbaxay baddan saarka ayaa ah Abwaan tusaale wanaagsan u noqon kara marka laga hadlayo baddan saarka. Qaar ka mid ah erayadii maansadii Hooyadu waa lama huraan waa kuwan:

Hagaag waa loo socdaa
Hor waa loo sii hoydaa
Hadal waa la hindisaa
Mudaan uurka hurudnoo
culeys beey hayn jirtoo
Xannuun beey la hingatee
Hooyadu waa lama huraan

Ha`dii kale waxaan lahaa

Habeen goor uu bartamay
Caanihii beey nagu habtoo
Horaadkeey noo dhigtoo
Dharkii beey na huwisee
Hooyadu waa lama huraan

Calooshaadoon hif oran
Adiga oon ka haqab`bin
Hunguri ma haweeysatee
Hooyadu waa lama huraan

Waxa sidoo kale badda Saarka waafaqaysa, Maansada saarka ah ee uu Gudniinka Fircooniga ah kaga hadlo Muxumed Cali Masmas. Erayadeeduna ay yihiin kuwan:

Gudniinka fircooniga ah
Faafee laga doodayaa
Fidmiyo cudur buu la yimi
Waxaan diintu noo fasixin
Xadiiskuna faafinayn
Faa'iidana noo lahayn
Inaan falo waa dambiye
Inaynu ka fiirsanaa

Aniga wayla fiican tahay
Falkaasi dhamaanba jara

Rasuulku wuxuu na faray
Ficilna ugu sheegay gabadh
Falkaas shaqadeedu haa
Dhegaha furo oo I maqal
U fiirso waxaan ku odhan
Finkaas kaga dhiijiyoo
Findhicil wax ka wayn ha gooyn
Haddaad ku fogaato ood
Adigu fasahaadisana
Faraha naar baad la gali

Ilaahay qofkii fahmee
Wuxuu faray raacayaa
Foolxumo kaga baydhayee
Foojigo maahee ka durug
Maxaa qofka oo fayaw
Fallaadhaha loogu ganay
Maxaa farxadii aroos
Fiintii uga qaylisaa?
Maxaa fooshiyo dhalmada
Dhib kale loogu sii furaa?

Fasalba fasalbaa badalay
Markii Faraw hooyadeed
Filkii hablahee kacaba
Fadhiisiya ay lahayd
Inay faral gudatay bay
Ku faantooy moodaysee
Feedh bay uga leexatee
Hadduu dhaqankani fogaa
Haddaa fursad loo helee
U fuli sida layna faray

Maansooyinka saarka ah ee caanbaxay Soomaaliduna aadka u wada taqaano waxa ka mid ah kuwan:

1.Maansada saarka ah ee Hayaan ee uu sameeyay Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" Oo ka mid ahayd manhajkii wasaarada waxbarashada Soomaaliya, gaar ahaana fasalka 8aad, tuducyadeedana ay ka mid yihiin ;

Hadhkii ma ha seexanba ?
Habeenkii socod miyaa?
Ninkii hakadaa baqoolka
Habaaska miyuu dhaxlaa?

2.Maansada kale ee saarka ah, magaceeduna yahay "Anuun baa hooyadaa ah" ee uu sameeyay Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", ee ay ka mid yihiin:

Hunguri calaf baa xukuma
Hantina dhaqanbaa shushuba
Dadka hidihiisa guud
Wixii la haya dhex-yaal

4.7.9.1 Miisaanka Saarka

b) Miisaanka Gaarriye

Gaarriye waxa uu ugu horreyn Baarcaddaha u sameeyay tuduc halbeeg u ah Baarcaddeha, tuducaas oo ah:

Lalaa lalalaa lalaa la

Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa tan uu sameeyay Xasan Xaaji Cabdilaahi "Xasan-Ganay" ee ah:

Haleelooy hebedka geel
1 2 2 1 1 1 2 (10 Shaqal)
Hashaan maqasha iska celin
1 2 1 1 1 1 1 1 1 (10 Shaqal)
Harraatiyin taanay dhalin
1 2 1 1 2 1 1 1 (10 Shaqal)

Markay hiigaan nirguhu
1 1 2 2 1 1 1 (10 Shaqal)
Jiilaalkii bay hadhaa

2 2 2 1 1 2 (10 Shaqal)

T) Miisaanka Carraale
9,2= Bumbay iyo balad shisheeye
8,3=Bariisku halkuu ka beermo
8,3= Alloow aan lagugu beegin

4.7.10 Badda Haanta

Baddan oo waafaqaysa heesta ay haweenku adeegsadaan marka ay haanta lulayaan, Heestaas haanta oo ah:

Haantii qabooy qoor yar
Laba qaar laguu kala jar
Laba qaalin kugu buube
Qooraansigay baratay
Qoodhihii raggay aragtay.

Heestaas haantu waxa ay leedahay habdhac iyo dhawaaq gaar ah oo ay kaga geddisan tahay badaha maansada ee kale, sidaas daraadeed heesta haanta iyo maansooyinka kale ee leh habdhaca iyo luuqda haantu waxa ay noqonayaan bad gaar ah oo ka tirsan badaha maansada Soomaalida.
Badda haanta waxa halbeeg u noqon kara tuducyadan:

Hoobaalayoow heedhe

Hoobeey hiyee haanta
iyo
Hoobeey hobeey hoobe

Ugu yaraan waa inay erayo ka wada bilaabmaya hal xaraf oo isku mid ahi ay ku jiraan dhamaan tuducyada badda hanta, haddii kale maansadu waxa ay noqonaysaa Jacbur.

Waxa iyaguna heestaas la mida ah hees kale oo loogu heesa haanta qudheeda marka ciirta la lulayo ee la rabo in caanaha subagga laga saaro. Heesta kale ee haantuna waa :

Haanteeydu waa ceeb1a'
Waa ceebla' caga toosan
Waa naag cas oo gaaban.
Juguc..juguc..juguc..(Waa codka ay haantu samayso marka la lulayo)

Haanteeydu waa gaari
Waa gorof aan xooleeyey
Oon geed ka soo qaaday
Gacalkayna ima siinin
Juguc..juguc..juguc..

Haanta waxa kale oo loogu heesaa heestan:

Haanyahay sidii godadle
Godadlaha Garaad Faarax
Oo gabadh yar loo geeyay
Waa maxay is guunguunku?
Waa maxay geddiyo xeeshu?
Waa maxay is geed saarku?
Waa maxay is giringirintu?
Waa maxay is gaballixintu?

Baddan waxa waafaqda Heesta ay ciyaalku xoolaha kaga celiyaan Dacawada oo iyaguna ah:

Naa hooy dayooy heedhe
Dayo faaraxeey heedhe
Faadfaadisooy heedhe
Faadumo-Ardooy heedhe

Waa dacawadii dhoosay
Oo dhuuni doonaysa
Oo dhixirki ka hallaabay
Waa la I dilayaaye
Waa la I dabayaaye
Ha ii soo dhawaan dhoosay

Hees-dhaqameedyada kale ee leh luuqda iyo cabbirka badda haanta waxa ka mid ah heestan aan ka hayo saddexda bayd ee ay dhalaanku qaadaan marka ay xoolaha raacayaan, iyaga oo la hadlaya tuugta:

Tuugoow mareegaale
Adigoo laxdii daylo
Dabadeeda gaadaaya

Baddan haantu, waa mid dihin oo aan wali aad looga samaynin Maansooyin badan. Maansoyinka hadda jira ee ku sar go'an **badda haanta** waxa ka mida Maansada magaceedu yahay **Dhurwaa adhiga Eebaa leh**. Maansadan waxa sameeyay Xuseen-Dhiqle. Xuseen wuxu ahaa sida la sheego ninkii ka gabyi jiray xarunta daraawiishta intii aanu Sayid Maxamed Cabdalle Xasan bilaabin gabayga. Markii dambena waxa uu ahaa ninkii xafidi jiray gabayada Sayid Maxamed iyada oo gabayga loo akhrin jiray uun hal mar oo aan mar labaad lahayn. Hadda Xuseen isaga oo u digaya Waraabe soo weeraray adhi ay Daraawiishtu lahayd oo abhinaya waraabihii ayuu yidhi:

Dhurwaa adhiga Eebbaa leh
Eebbiyo Ustaadkaa leh
Oo niman ku dili baa leh
Waa niman Daraawiish ah
Gaaciye mataan baa leh
Geeraarshihii baa leh
Laba ilmaa garaadaa leh

Sidoo kale baddan haanta waxa waafaqaya Maansada murtida badan. Ee magaceedu yahay, "Sirta nolosha" oo dad badani u yaqaanaanan; "Heedhe Sahraay Heedhe". Waa maanso ka waramaysa dhaqanka iyo xaqiiqada nolosha. Maansadaas oo uu sameeyay Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", waxa sadaradeeda ka mid ah :

Saaxiibkayow heedhe
Safar baan ka imi dheere
Marka hore salaan diirrran
Marka xiga samow heedhe
Ha ka nixin si-dalagtayda

Sacab fara-madhnaantayda
Suugaanta yaabkeeda
Salka iyo fadhaa keena
Marka xiga sugnaanteeda
Socodkiyo falkaa sheega
Xeerkeedu waa saase.
Saaxiibkayow heedhe
Anba saaka qaybteeda
Sirsirraan ka joogaaye
Xadhiggiyo bal eeg suunka
Iyo sabarka gaadiidey
Iyo salabka ii qaaran
Iyo suudha guudkayga
Hilaygiyo waxaan saabka
U gilgiley Samaw haanta
Subag inay ku dhiiqdaaye
Saasay ku badisaaye
Sannad weliba xeeshiiye
Kol hadday silloonaato
Samaheedu waa dhiige
Sumuc talada loo dhiibye
Sida sida sidaas weeye
Si la yeeli jirey weeye

Maansooyinka Dhifka iyo naadirka ah ee laga sameeyay baddan aan u bixiyay badda Haanta, waxa ka mid ah Maansadan uu sameeyay Abwaan **Maxamed Aw Cali Cartan "Hal-Deeq" o**o ka mid ah abwaannada dhalinyarada ah. Maansadan waxa uu Hal-Deeq ku waaninayaa mid ka mid saaxiibadii oo waayaha saluugay waxaanu yidhi:

Saaxiibkayoow waano
Ayaan kuu sidaa culuse
Adigoon si kale yeelin
Hadda sahami jiiraanka
Sintan iyo sintaas dheeho

Waxa jira dad aan seexan
Soli weydey gogoshoodu

Saddex qado kal dhaaf taagan

Sabar baahan weeyaane
Sanqadhiyo wadnuhu hawda
Sambabada hawo u dhiibay
Xameetidu ku saydhayso
Suntan madawyo waabayda
Safradoobay uurkoodu
Saablaydu ololayso

Badda waafaqda heesta **Haantu**, waa bad dihin oo aan wali laga samayn maansooyin badan. Hal-abuuraduna ay ka faa'iidaysan karaan adeegsigeeda.

4.7.10.1 Miisaanka Badda Haanta

B) Miisaanka Carraale
7,3= Naa yaan ku baalidine
7,3= Yaan bawdka kuu dhigine
10,0=Baranbaradu kugu xayane
6,4= Baayooy Bullooy ii bax

T) Miisaanka Gaarriye
Tusaale wanaagsan waxa u ah heesta haanta qudheeda
Haantii qabooy qoor yar
2 2 1 2 2 1 (10 Shaqal)
Laba qaar laguu kala jar
1 1 2 1 2 1 1 1 (10 Shaqal)
Laba qaalin kugu buube
1 1 2 1 1 1 2 1 (9 Shaqal)
Qooraansigay baratay
2 2 1 1 1 1 1 (9 Shaqal)

4.7.11 Badda Maqasha

Baddan maqashu waa bad soo jireen ah waa Bad-Maanseed ku arooreysa hees hawleedda ay caruuurtu qaadaan marka ay maqasha la joogaan, iyaga oo weheshanaya codkooda si aanay Dacawada iyo xayaawanadu ugu soo weerarin maqasha una dareensiiyaan in lala joogo. Heestaas maqashu waxa ay leedahay habdhac iyo luuq gaar ah, sidaas daraadeedna waxa ay noqdeen heestaas iyo maansooyinka kale ee leh habdhaca iyo luuqda heesta maqashu, bad gaar ah oo ka tirsan badaha Maansada Soomaalida. Carruurtu waxa ay yidhaahdaan:

Maqaleey war laay
Ma laguu waramay
Waxa weerar dhacay
Waxa waran dhul galay
In Cali la dilay
Oo Cumar la dabay
Oo dhiig qulqulay
Oo dhagari timi ?

Yaa ii waramay
Ma walaalkeybaa
Weli hoose iyo
Waaleed ka yimid?

Maqaleey warlaay
Anaa ku warami
Ee waayey hay

4.7.11.1 Tuduca halbeega u ah badda maqasha

Dhammaan sadarada ku jira badda maqashu waxa ay leekanayaan tuducan kooban ee halbeega u ah badda maqasha, tuducaasina waxa uu noqonayaa

Hoyaleey hoyaay

Ugu yaraan waa inuu xarafku hal mar ku jiro dhamaan meerisyada ama tuducyada ama sadarada maansooyinka ku aroora badda maqasha hadii kale waxa ay noqonayan qaar jacbur ah, oo aan xaraf raac lahayn.

Haddii hal shaqal oo dheeraad ah lagu daro meerisyada badda maqasha, waxa ay badda maqashu toos isugu badalaysaa badda kale ee jiiftada, waxaana tusaale u ah:

Maqaleey warlaay (badda maqasha)
Maqaleey warlaayeey(Jiifto)

Heesaha leh hab-raaca, iyo luuqda badda maqasha waxa ka mid heestan loo qaado iduhu marka ay dhalayaan ee ah:

Daylooy wan dhala
Wan galaalan dhala
Waagii beryaba
Waa wan iyo nayl

Waxa sidoo kale leh luuqda iyo habraaca badda maqasha heestan loo qaado riyaha ee ah:

Garooy maadahaa
Waa maalin dhoow
Ooy midi dhashaa
Midi dhaysisaa
Midi dhaqayo tahay

Abwaan Axmed Aw Geeddi oo dhex taal ahaan u adeegsanaya hees-hawleeda sumalka, ayaa sameeyay heestan waafaqaysa badda maqasha:

Sumalyahow darbani
Naylaha duduuc
Oo dooxa gee
Oo damal hadh geli
Oo dacawadii
Dabada hunbulnayd

Yay kaa daldalan
Yay kula dul marin

Dadku waa hayaan
Roobaa kada`ay
Daba taxantiyoo
Sahan doodiyiyo
Horseed baa la direy

Cir daroorey iyo
Daruuraha onkodey
Doog dhabashadii
In la duulo saw
Damac muu ahaan

Dalan doolayoo
Waan daaley iyo
Halanoo degiyo
Awraha dabaal
Doorkan waa la nacay

Waxa jira dugaag
Weer daaliniyo
Aar iyo dadqaad
Derimaha ka badan
Dib u feejignow

Xil daruuran baa
Dumadaada sudhan
Nayl daba yar iyo
Deylooy laxdii
Yey kaa dib jirin

Maansooyinka laga allifay badda maqasha waxa ka mid ah maansadan uu sameeyay Sidiiq Maxamed Burmad, ee magaceedu yahay “Guuraa-Gaddoon”.

Goormay ahayd
Gayigoo samaa
Oo gaaxsanaa

Gudgudoo habeen
Gaydhaha ka qubay
Geedaha dhamaan

Cir galaangaloo
Gaalaan baxoo
Aan kala go'ayn

Qoraxduna godkoodii
Ka gurguuratooy
Gantay nuurka iyo
Falaadhaha gudboon
Mayay daba galooy
Gashay heegadii
Guulaamayaal
Wada gooshayaan
Dhinaciyo garbaha
Fadad guuxayaa
Isu giijiyeen
Illamaa gadiid

4.7.11.2 Miisaanka Badda maqasha

B) Miisaanka Gaarriye
Abwaan Gaarriye waxa uu caddeeyay in badda maqashu ay ku sar go'an tahay tuducan ah:

La la laa la laa

Tusaale ahaana waxa aynu soo qaadan doonaa heestan uu sameeyay Abiib Iimaan Xasan ee ah:

Agoonki makee
1 2 1 1 2 (7 Shaqal)

Awoowgi korshoow
1 2 1 1 2 (7 Shaqal)
Dadku aaminee
1 1 2 1 2 (7 Shaqal)
Amiin loo baxshoow
1 2 2 1 2 (8 Shaqal)

T) Miisaanka Carraale
5,2=Maqaleey warlaay
6,1=Ma laguu waramay
6,2= Yaa ii waramay ?

4.7.12 Badda kebedda

Kebeddu waxa ay ka mid tahay walxaha ama qalabka lagu dhiso aqal Soomaaliga (Buulka, Laba-daryaalaha). Waxa laga sameeyaa maydhaxda geedka Galoolka. Kebedda oo ay sameeyaan haweenku ayaa loogu heesaa, hees hawleed la isku dhaafinayo shaqada culus ee la hayo.

Heesta kebeddu waa badda ugu shaqalada badan maansooyinka jira, sidaas daraadeed waa badda ay ugu adagtahay in la sameeyaa, marka ay haweenku kebedda samaynayaan waxay haweenku heestan ku madadaaloodan iyaga oo u duurxulaya gabadha kebedda leh:

Naagta kabada leheey
Kaalin daraneey
Adaan kayd u sii dhigin

koronkor cuni maynoo
Kariba maynee
Karuur geel ma la hayaa?

Geedba geedka u dheer
Laga garaacyeey
Galool mudhay mullaaxdiiyeey.

Baarqab waa seedoo
Sariba maynee

Sagaal jir aan irmaanayn

Naagta daaha leheey,
docadaloolayeey
Ninkeedii dabayl raacyeey

Barobar shaalayeey,
Buul shareerayeey
Ma maantaan bah kula ahayeey

Heestaas Kebeddu waxa ay leedahay luuq gaar ah oo aanay la wadaagin heeso kale oo badani. Waxaanay sidaas daradeed ku mutaysatay in ay noqoto bad gaar ah oo ka mid ah Badaha Maansada Soomaaliyed. Dhawaaqa macaan ee ay leedahay luuqda heestaasi waxa dhadhamin kara qof joogay madal kabad lagu samaynayay oo dhageystay dhawaaqa toolmoon ee ay haweenku sida farshaxanka ah, ee hallaasiga ah ugu qaadaan heestan.
Heesaha leh miisaankaas badda Kebedda waxa ka mid ah heestan loo qaado gabadha aroosadda ah marka la galbinayo ee la galinayo gurigeeda cusub:

Inanta galbiyaay
Gudaha keenaay
Nin bay jamatay jookhooy

Badda kebeddu waa bad tuduc kasta oo ka mid ahi uu ka koobnaanayo saddex qaybood oo isku xidhan. Saddex qaybood oo kasta oo isku xidhanina waxa ay sidooda u noqdaan jumlad dhamaystiran oo xambaarsan hadal nuxur leh. Taas aawadeed waa inay saddex eray oo isku mid ahi ku jiraan dhamaan tuducyada badda kebedda.

4.7.12.1 Miisaanka Badda Kebedda

B) Miisaanka Carraale

6,3=Geedba geedka u dheer, laga garaacyeey=5,2,
Galool mudhay mullaaxdii=7,3
6,3=Geesi gola keeniyo, gaari ridhataa =5,2
6,4= Galool loogu daahaa
6,3= Naag an daah xidhaneey, Docadaloley 5,2
Ninkeedii dabayl raac =6,4

T) Miisaanka Gaarriye
Heesta kebedda qudheeda ayaan tusaale u soo qaadan doonaa:

Naagta kabada leheey, kaalin daraneey, adaan kayd u sii dhigin
2 1 1 1 1 2 2 1 1 1 2 1 2 1 1 2 1 1 (25)
Koronkor cuni maynoo, kariba maynee, karuur geel ma la hayaa
1 1 1 1 1 1 2 1 1 1 1 2 1 2 2 1 1 1 2 (24)
Baarqab waa seedoo, sariba maynee, sagaal jir aan irmaanayn
2 1 2 2 2 1 1 1 1 2 1 2 1 2 1 2 1 (25)

4.7.13 Badda Caddooloolka

Caddoloolka oo ah ciyaar ay carruurtu ku maaweelooto habeenka caddada ah ee uu dayuxu jiro, si fiicanna wax loo arki karo, ee aan gudcurka ahayn. Carruurtu marka ay maalintii oo dhan ku foognaato raacidda xoolaha ayay habeenkii isugu yimaaddaan kambalka oo ah duleedka reeraha. Waxay qabsadaan ciyaartan caddaloolka iyaga oo ku heesaya heestan leh badda gaarka ah, oo aan u bixiyay "Badda caddoloolka", heesta caddaloolku waa:

Maroodi cadhoole
Haddii col la sheego
Cadaada ku mere

Hashii Cosob waa tan.

Ugu yaraan waa inay erayo ka bilaabmaya hal xaraf oo isku mid ahi, ku wada jiraan dhammaan saddarada badda caddaloolka.

4.7.13.1 Tuduca halbeegga u ah badda caddaloolka

Baddan cadda-loolka waxa hal-beeg u noqon kara tuducyadan:

Hoyaaley hoyeeya
iyo
Hobeeya hobeeya

Badda heestani waxa ay u dhaw dahay Badda haanta, laakiin marka si aad ah aad u dhuuxdid waxa aad dhaadaysaa in uu jiro farqi u dhaxeeya labadaas badood oo lagu kala saaro, oo badda haanta waxa la dhadhaminayaa in ay ka meerisyo dhaadheertahay baddan aan u bixiyay “Badda Caddo-loolka”, sidaas awgeedna waxay noqotay in lagu tilmaamo bad gaar ah.

Badda Caddaloolku waxa ay toos isu waafaqaan bad ka mid ah badaha maansada ee luqada Carabiga, laakiin lama odhan karo baddani waxa ay ka soo jeedaa luqada Carabiga, sababtoo ah hees dhaqameedyada lagu qaado baddani waa qaar ku salaysan Af-Soomaali sax ah, oo aan lagu darin erayo Carabi ah, markaa baddani waa bad laba luqadlay ah oo Soomaaliga iyo Carabigaba laga helo.

Badda Carabiga ah ee ay isku sargo’an yihiin baddan Caddaloolka waxa loo yaqaanaa “Fucuulan Fucuulan”, waxaana ka mid ah erayeeda

Iyaaka iyaaka
Akhaaka akhaaka
Waman la akhaa lah
Fucuulan fucuulan

Badda Caddaloolka oo sidoo kale loo yaqaano "Badda Halaanhalka", waxa ku aroora heeso dhaqameedyo ka mid ah suugaanta la dhaxlay, hees-dhaqameedyada ku aroora badda Caddaloolka waxa ka mid ah hees-dhaqameedkan ay isugu heesi jireen laba ka mid ah Qabiilada Soomaaliyeed ee ood-wadaagta ah, meerisyada heestaasina waxa ay yihiin kuwan:

Awaariyo Koorre
Afmeerada Qaydar
Iidoorku ha haysto
Carruurtu ha ooydo
Ahaan kari mayso

Marka sare la akhriyo waxa lagaga jawaabi jiray heestan kale ee iyaduna ah badda Caddaloolka "Halaanhalka" ee ah sidan:

Awaariyo Koore
Afmeerada Qaydar
Iidoorku ha haysto
Carruurtu ha ooydo
Ninkii adag baa leh

Heesaha fannaaniintu ay ku luuqayso ee ku sargo'an badda caddaloolka waxa ka mid ah:

Maxaan baraf jiidhay
Dadkoo ka baqaaya
Dhibtaa u badheedhay
Jacayl basanbaasa
Yarkii igu beeray
Hadduu boggu waayay
Billaahiyo dhaardhe

Maansooyinka baddan laga tixraacay samayntoodu waa kuwo kooban,
Waxaana ka mid ah maansadan uu magaceedu yahay "yaa?" ee uu sameeyay Siciid Ibraahim Dool "Gurey". Meerisyada maansadaas waxa ka mid ah:

Cabdoow yulqan maanso
Suugaan yabadhkeeda
Markaad yabyabkeeda
Ya'leey ka bilawday
Ed yeeke dul-saartay
Irmaana ka yeeshay

Ee aad yaradkeeda
Raggaad ugu yeedhay
Hadduu kaba yaabay
Hadduu kaba yoolay
Markaad wax ku yuubtay
Hadduu kaba yaacay

Adoo yac dabaaya
O laac yar lulaaya
Wax aad yar dadayso
Intii kula yooli
Yunuuntiyo ceelka
Markaad uga yeedho
Ayay kula yeelan
Waxaad ugu yeedhay!

Maansooyinka caanka ah ee laga unkay baddan waxa ka mid ah maansada magaceedu yahay "Hambaber", laakiin ay dadku inta badan u yaqaanaan "Hargeysi ma toostay", oo uu sameeyay Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi". Erayada maansadaas waxa ka mid ah kuwan :

Habeenada weysha
Dhurwaa habarteeda
Dorraad ku hiraabtay
Haab-haabadka naaska
Haaneed ka deyeysa

Nirgaa hugun yuuska
Halkii lagu ooday
Hammuunta ka yaw leh
Riyaa hoganaaya

Idaa tuban heelka
Cadceedda hagoogtey
Haleelada weydda
Dhaqaaq hidin waaga
Hareeriga taagan
Dantaa ku habsiisey
Inay hakadaane
Dhulkoo hanad joogo
Intaan gadadh heerin
Ka sii degin heerka
Hadeer la yaqaano

Intaan habqan beeshu
Huluulaha oodan
Ku saan go'in hawdka
Intaan habac jiitan
Badhkeed ku hallaabin
Markay habaq baahdo
Dugaaggu hilbaysan
Intaan hawa boodka
Fardaa higil raacay
Kuwii higsanaayey
Hummaaggu ka reebin
Xayeeshku habaabin
Intaan halladaadka
Hayaanku is waayin
Habeenku dhex qaadin
Hadhow la shallaayin

Maasnsooyinka dhifka ah ama faro ku tiriska ah ee Baddan waafaqaya waxa ka mid ah, Maansada magaceedu yahay " Hashii Cosob" ee uu sameeyay Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Erayadeena ay ka mid yihiin :

Caroogga saboolka,
Adduunka ku ciillan
Anaa cudha haysta.

Anaa Cabdillaahi
War-geys u ah caydha.
Caloosha danleeyda,
Anaa cabbiraaya.
Waxaad dhaqday deer-cad
Ayaw jaray cawda?

Shabeelki Cagoole
Hadduu dad-cunoobay
Jidh caato ah doonay
Caddiinkana diiday,
Hadmaad u cadiigsan?
Hadmaad ka cad-goosan?

Haddaad caqli leeday
Intaad cilmi-baadho,
Car suuqa madoobi
Cidduu yahay soo hel!

Cagaarka la leefay
Cirroolaha baahan
Ciyaalka jal beelay,
Hablaa carcaraafay
Cibaarada joogta
Canaanta ayaa leh?

Ma jeeblahan cawlan
Ayaa ku curyaanshay?
Kumaa cadawgaa ah?

Nin kuu cudud-sheegtay
Dhashaadana caydhshay;
Nimuu camalkiisu
Jar dheer kala ciiray;

Nin ceebta korkiisa
Caddaan ugu taalla
Aroorba cid saara,
Maxaad u cawaansan?

Fulaa cararaaya
Maxaad ugu ciidmi?

Dhiqlaa ku cunaaya
Intaad ka cabsooto,
Maxaad naf cagaagan
Islaan cimri-goys ah
Cibaado sabool ah
Culayska u saari?

Miyaan cadda-loolka
Habeenki ciyaarta
Carruurtu ku heesin
"Maroodi cadhoole":
"Haddii col la sheego"
"Cadaadda-ku-meere!"
"Hashii cosob waa tan."?

4.7.13.2 Miisaanka Badda Caddaloolka

B) Miisaanka Gaarriye
Abwaan Gaarriye waxa uu baddan cadaloolka u sameeyay tuduc hal-beeeg u ah, tuducaas oo ah:

Lalaala lalaala

Tusaale wanaagsan waxa u ah heesta caddaloolka qudheeda
Maroodi cadhoole
1 2 1 1 2 1 (8 Shaqal)
Hadii col la sheego
1 2 1 1 2 1 (8 Shaqal)
Cadaada ku mere
1 2 1 1 2 1 (8 Shaqal)
Hashii cosob waa tan
1 2 1 1 2 1 (8 Shaqal)

T) Miisaanka Carraale

6,2= Cismaanow Tilmaansan
6,2= Tiraabo hagaagsan
6,2= Ayaan taxayaaye
6,2=Toloow wax dhagayso

Badda Shallaadka

Baddan oo ah bad ku cusub Suugaanta Soomaalida isla markaana ah bad ajnabi ah oo ka soo jeeda luqada carabiga, waxa Af Soomaaliga ku soo daray baddan culima awdiinkii hore ama wadaadii xerta ahaa. Culima awdiinkaas hore waxa ay miisaanka baddan leekaysiiyeen luuqda ay ku qaadaan Salliga Nabi Maxamed (Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) waxaanay soo qaateen Salliga Nabiga ee ah:

Salaatu Laah Calayka yaa Muxamad
Salaamu Laahi yaa nuural quluubi

Salligaas Nabigu waa mid ku salaysan dhawaaqa iyo habraaca luqada Carabiga, wadaadadii hore ee Soomaaliyeedna, iyaga oo salligaas nabiga waafajinaya maansada ay qaadayayaan, ayay wadaadu sameeyeen maansadan:

Mijo dhuubdhuubaneey riyuhu waa balee (Baydkan waxa ku jira waxoogaa laaxin ah)
Wankii badhilaa balaayada kaa xijaabee.

Wadaadadu beerka xaydha leh way cunaane
Ilaahay maad ka yaabtaan ood na siisaan
.
Badda Shallaadka oo u badan jacbur, waxa lagama maarmaan ah inuu xarafku galo ugu yaraan laba jeer.

4.7.14.1 Miisaanka Badda Shalaadka

B) Miisaanka Gaarriye

Tusaale waxa aan u soo qaadan karaa, tan:

Wadaadadu beerka xaydhaleh way cunaane

1 2 1 1 2 1 1 1 1 1 2 1 (16 Shaqal)

Ilaahay maad ka yaabtaan ood na siisaan

1 2 1 2 1 2 2 2 1 2 2 (18 Shaqal)

Miisaanka Carraale

9,2=Wadaadadu beerka xaydha leh, way cunaane=4,1

7,3=Ilaahay maad ka yaabtaan, ood na siisaan =4,2

Badda Hagarlaawe

Baddan aan ugu magacdaray Maansada Hagarlaawe oo ah maanso uu allifay Maxamed Xaashi Dhamac “Gaarriye”, waa bad dhif iyo naadir ah oo laga yaabo in aanay hore u maqal dad badan oo Soomaali ahiba. Markii koowaad ee aan ka fikiray jiritaanka baddani waxa ay ahayd dhamaadkii June/2007. Markaas oo aan safar waxbarasho ku joogay dalka Paakistaan. Xilligaas waxa aan cajalad ka dhagaystay maansadaas Hagarlaawe ee aan baddan maansada ka midka ah ugu magac daray.

Baddan Hagarlaawuhu waxa ay ka soo jeeddaa asal ahaan maanso aan tuducyadeeda aynu ka helnay tuducan qudha ee ah:

Gaaliyo wixii jeceloow jab

Maansada Hagarlaawe oo leh habraaca iyo dhawaaqa tuducaas sare, erayadeedana uu allifay Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac “Gaarriye”, waa tan:

Hal madaw araar iyo maanso
Harawaati roob iyo mawjad
Murti iyo higgaad nabad-doon ah,
Waayahan haddeer ku salaysan
Ahna diirad keebka hagaysa
Berritana nin nool u hal-hays ah,
"Haye cala salaa" mar kaleeto

Dhoodaanna heestu ha gaadho.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?
Ma og tahay habaaska dalluumay?
Ma og tahay hor-weynta la qaaday?
Ma og tahay in Hawd laga guurey?
Ma og tahay gabdhaha wada heermay?
Ma og tahay rasaasta habawday?
Ma og tahay hoggaanka la eeday?
Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?
Ma og tahay "hiraay"da "wiraay"da?
Hadhaciyo bardaha laga caagay;
Haradiyo biyaha godobaysan;
Naylaha haraaryadu laysay;
Shimbiraha dhirtii hadhsan waayey;
"Hiih"diyo "hayaay"da baxaysa.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?
Ma og tahay nacaybka la huurshay?
Ooryaha asayda hagoogtay;
Hooyada baroorta naf moodday;
Aanada ilmaha ku hadaaqay;
Dhalashiyo hablaha dhaxdin seegay.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?
Ma og tahay habaarka dhisaalan?
Halasaha dagaalka sokeeye
Dhallintiyo halyeeyada le'eday;
Gacalkiyo hilbaha is-xasuuqay.

Ugu yaraan waa inay erayo ka wada bilaabmaya hal xaraf oo isku mid ahi, hal mar ku jiraan dhammaan tuducyada maansooyinka waafaqa baddan aan u bixiyay hagarlaawe.

4.7.15.1 Miisaanka Badda Hagarlaawe

Miisaanka Gaarriye

Tusaale waxa u ah tan uu sameeyay Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", ee ah:

Meeshiyo Hargeysiyo Juubba
2 1 1 1 1 1 1 2 1 (11 Shaqal)
Qoriyahaw halkaad cuskataaba
1 1 1 1 1 2 1 1 2 1 (12 Shaqal)
Waa haar korkayga ku taalla
2 2 1 1 1 1 2 1(11 Shaqal)
Waa meel jidhkayga habaysa
2 2 1 1 1 1 1 1 (10 Shaqal)

Badda Salliga

Sidoo kale baddan Salligu waa mid asal ahaan ka soo jeedda Afka Carabiga, waana bad ajanabi ku ah Af Soomaaliga. Laakiin hadda ka mid noqotay badaha Maansada Soomaaliyeed. Baddani waxa ay waafaqaysaa Salliga Nabi Maxamed (NNKH) e, ee ah:

Allaahuma Salli Calaa khayri khalqi saayidinaa

Salligaas Nabiga, oo ay qaadaan culimada Soomaalidu, waxa la leekaysiiyay tuducan Af Soomaaliga ah:

Markuu wanka helo wacdiyoow, marka kale wayso xumoow.
Allaahuma Saalli Calaa khayri khalqi saayidinaa

Markuu kildhi helo kaftamoow, marka kale kuudud xumoow.
Allaahuma Saalli Calaa khayri khalqi saayidinaa

4.7.16.1 Miisaanka Badda Salliga

B) Miisaanka Gaarriye
Baydka sare ayaan tusaale u soo qaadan karnaa ee ah:
Marku wanka helo wacdiyoow marka kale kale wayso xumoow

1 1 1 1 1 1 1 1 2 1 1 1 1 1 1 1 1 2 (20 Shaqal

T) Miisaanka Carraale
9,1=Marku wanka helo wacdiyoow, marka kale kale wayso xumoow=8,1

Badda Seyliciga

Badda Seylicigu waa bad ku abtirsata ciyaarta loo yaqaanno "Seyliciga". Heestan oo la qaado marka la ciyaarayo ciyaarta Seylicigu, waa mid leh luuq gaar ah oo lagu yaqaano. Waa mid leh habdhac gaar ah oo ay kaga soocantahay maansooyinka kale. Sidaas dareedeed waxa ay noqotay bad gaar ah oo ka tirsan badaha maansada Soomaaliyeed. Heesta Seylicigu waa tan aan ka hayo saddexdan tuduc

Bismilaa salalaa calaayey hooyaale
Kaybaar kaybaar calaayey hooyaale
Kushumbaar kushumbaar calaayey hooyaale

4.7.17.1 Miisaanka Badda Seyliciga

B) Miisaanka Carraale
13,5=Bismilaa salalaa calaayey hooyaale
10,5=Kaybaar kaybaar calaayey hooyaale
12,5=Kushunbaar kushunbaar calaayey hooyaale

T) Miisaanka Gaarriye
Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa tuduca Saylicga ah qudhiisa ee ah:
Bismilaa salla laa calaayey hooyaale
1 1 2 1 1 2 1 2 1 2 2 1 (17 Shaqal)
Kaybaar kaybaar calaayeey hooyaale
1 2 1 2 1 2 2 2 2 1 (16 Shaqal)
Kushunbaar kushunbaar calaayeey hooyaale
1 1 2 1 1 2 1 2 1 2 2 1 (18 Shaqal)

Badda Salsalka

Baddan Salsalku, waa mid ku salaysan oo waafaqda hees ay carruurtu ku heesaan iyaga oo ka sheekayna geeddi uu reerkoodu galay iyo waliba heeso ay carruurtu qaadaan marka ay xoolaha la joogaan, oo ah:

Mulacoow hashii mayay maaragteen ?
Kaba tole kureed dilay maaragteen?
Nin yaroo nin wayn dilay maaragteen?

Baddan waxa kale oo waafaqaysa heesta ay carruurtu ku sheekaystaan ee ah:

Beri reerkayagu guur haawiyee

Heestaasi waxa ay leedahay dhawaaq gaar ah oo uu u sameeyo erayga 'Haawiyee" oo ah kalmad dhextaal ah heestaas ay carruurtu qaadaan, haddii erayga Haawiyee laga reebo heesta, heestu ma noqonayso mid dhadhan leh, waxaanay galaysaa bad kale oo ah badda jiiftada.
Heesta haawiyee, oo ka mid ah heesaha horseedka u ah baddani, waa tan:

Bari reerkayagu guur haawiyee
Guuryoo Galbeed qabay haawiyee
Waxaraha wad la I yidhi haawiyee
Wadi maayo baan idhi haawiyee
Qawtaar la ii qaad haawiyee
La igaga qalbaw sii haawiyee
Waday oo wadaan waday haawiyee
Doob meel hurday helay haawiyee
Doob yahaw ayaad tahay haawiyee ?

Baddan Salsalka, waxa maanso ku sargo'an sameeyay Abwaan Axmed Aw Geeddi, maansada Axmed Aw Geeddi oo ah mid ka

waramaysa farshaxanimo xagga dhaqanka ah iyo aqoon ku saabsan dhaqanka, magaceeduna yahay Bari-samaad, waxa ay erayadeedu yihiin kuwan:

Dayaxoo baraarugay laba badhkii
Xiddigaha u baanoo baadigoob
Cadceedoo bidh soo tidhi baalcaseey
Daruuruhu bishleenoo lays boqraday
Cirkoo soo bashiishtoo soo burqaday
Mayeygoo badweyntaa foos burburay
Dhibicoo bariiqdoo gees u baxay
Jeegaani badhaxdoo midabo badan
Hillaacoo ku beegmoo biligta guray
Onkodkuna bilkeyduu bigilka riday
Daadkoo butaacoo boholo xulay
Balliyada xareedoo doog barkaday
Dhulka oo barwaaqiyo baad huwaday
Buska iyo awaarii rays badalay
Buuflaha xaggaa iyo bacadki jabay
Berdahoo ballaadhoo buleyga riday
Lo'da oo bannaaxiday beri-samaad
Idahoo boqnaha sare soo barqaday
Riyahoo balaadh iyo buurta koray

Heesaha kale ee waafaqa badda salsalka waxa ka mid ah tuducyo ku jira heesta uu magaceedu yahay "saarkii duleed", meerisyada ku jira heestaas ee ku sargo'an badda salsalka waxa ay yihiin:

Saarkii duleedoow soo dagee
Waa dabbaaldagaagee soo dagee
Dahab iyo xariir buu doonayaa
Aqal wada dalooluu diidayaa
Meel an lagu dakayn buu diidayaa

Miisaanka Badda Salsalka
Miisaanka Gaarriye
Dayaxoo baraarugay laba badhkii
1 1 2 1 2 1 1 1 1 1 2 (15 shaqal)
Xiddigaha u baanoo baadigoob

1 1 1 1 1 2 2 2 1 2 (14 shaqal)
Cadceedoo bidh soo tidhi baalcaseey
1 2 2 1 2 1 1 2 1 2 (15 shaqal)

4.7.19 Badda Hees Carruureeda

Baddan hees carruureedu, waa badda ay tixaheedu leeyihiin meerisyada ugu gaaban ee ay tixi yeelato, waa bad aanay tuducyadeedu lahayn in ka badan 4 shaqal. Baddan oo ay ogaalkay yaryihiinba maansooyinka ku arooraa, waxa tusaale wanaagsan u ah heestan carruurtu qaadaan marka ay ciyaarayaan ee ah:

Billo billo
Koodaar
Ka u dhexe
E u dheer
Ka jaboo
Ku jiq sii

Waxa sidoo kale baddan ku jaan go'an heestan ay qaadaan carruurtu marka ay dhuumaalaysiga dheelayaan:

Adhadhina
Safaratina
Ayabush
Shakunati
Hururuf
Hararaf
Shaahii
Bunkii
Barandoow
Dahaba
Waagii
Baryoow
Walalac

Heesaha ay dhalaanku u qaadaan dhuumaaleysiga waxa ka mid ah heestan tirada ah:

Koownaa
Labanaa
Saddexnaa
Afarnaa
Shanaa

Waxa iyana baddan leeg heesta la qaado marka mooyaha la tumayo ee la labatiboodinayo, oo iyaduna ah:

Mooyaha
Malablaha
Magacii ?
Mooyaan
Tibahana
Culus iyo
Cabban baa
La yidhaa

Baddan hees carruureeda, waxa waafaqaya sadaradan maansada ah ee loo adeegsado halxidhaalaha lagu hubinayo sida uu qofku hadalka u odhan karo, ee ah

Ido dharan
Wada dhalay
Naylo dharan
Subax dharab
Dhidin hoos
Dhidar horror

Waxa kale oo ka mid ah hees-carruureedyada baddan waafaqa heestan ay carruurtu isu waydiiso si ay u ogaadaan qofka hadalka odhan og, iyo qofka hadalka ku yara hakada, heestaan oo ah
Abtigay
Mar i wad
Mar iswad
Miisaanka Badda Hees Carruureeda

Miisaanka Gaarriye
Mooyaha
2 1 1 (4 shaqal)
Malablaha
1 1 1 1 (4 shaqal)
Magacii
1 1 2 (4 Shaqal)
Mooyaan
2 2 (4 shaqal)

4.7.20 Badda Hayaayda

Baddan Hayaaydu waa mid ku sargo'an heeso halgan iyo guubaabo ah oo ay tirin jirtay Faadumo Xirsi Cabbane, oo ka mid ahayd dadkii sida aadka ah uga soo horjeeday gumaystaha Ingiriisku xilligii uu dalka haystay. Baddani waxa ay leedahay qaab-dhismeed u gaar ah oo aanay maansooyin kale la wadaagin, tusaalena waxa u ah tuducan ay samaysay Faadumo Xirsi Cabbane ee ah:

Hayaay bal eega
Hasheena naaxday
Libaaxu haysto
Dhiigaa ka hawle

Tuduca halbeega u ah badda Hayaayda

Baddan Hayaayda waxa halbeeg u ah tuducan:

Hoyeey hoyeeya

Dhammaan meerisyada ku jira tixaha ku aroora badda hayaaydu waa qaar leh dhawaaq ku sargo'an tuducaas, ugu yaraan hal eray oo isku xaraf-raac ahina waa in uu ku jiro meerisyada badda Hayaayda.

Badda Hayaayda waxa ku sargo'an maanso majaajileed uu qaado jilaaga Boon Xirsi "Bawdyo-Gaab". Majaajiladaas oo ah

Adoon qadaynin

Quraacna haynin
Safrad qadhaadhka
Hablaa qureysheed
Qooraansigoodu
Qalad ba weeye

Ninyaw bal qooqay
Haddii ad qooqday
Maxaad ku qooqday?
Adayska qooqee
Maxaad ku qooqday?
Cidlo ka qooqoow
Maxaad ku qooqday?

Miisaanka Badda Hayaayda
Miisaanka Gaarriye

Hayaay bal eega
1 2 1 2 1 (7 shaqal)
Hasheena naaxday
1 2 1 2 1 (7 shaqal)

4.7.29 Badda waraabka

Baddani waxa ku jira maansooyin iyo heeso leh luuq gaar ah, dherer maanseed iyo cabbir ay kaga gedisan yihiin maansooyinka kale, sidaas awgeedna ay ku noqdeen god gaar ah oo iskii magac u yeesha. Maansooyinka soo galaya godka waraabku waxa ay ku sar go'anyihiin heesta la qaado marka geela la waraabinayo ee ah:

Waa tanoo timi
Waana teenii
Waanay tuban tahay
Hadday tubantiyo
Haddii lala tago
Waa tolleey oo
Looma kala tago

Badda waraabka waxa halbeeg u noqon kara tuduca la qaado marka geela la waraabinayo ee ah:

Hobeeya hobeey.

Ugu yaraan waa inuu hal xaraf-raac oo isku mid ahi ku jiro dhammaan meerisyada badda waraabka.
Heesaha geela ee waafaqa badda waraabka waxa ka mid ah kuwan:

Badda waraabka , waxa ka mid ah hees hawleedyadan geela loo qaado marka la waraabinayo ee kala ah:

Sidii sagal roob
Oo si san u da'ay
Waa sugaynee
Maysa soo simay?

Koor dhawgaagiyo
Kalaamka Alleba
Waa na kiciyoo
Waa wax nagu kulul

Markaan ku arkaan
Ashahaatoon
Awlaxaygiyo
Eebadaydii
Aayar tiirsaday

Shifo ku afsaar
Oo shar kuuma leh

Iyo waliba heestan la qaado marka geela la daajinayo ee ah.

Adoo gubad galay
Guduudna ahaa
Garaad laawuhu
Goodir kugu sheeg
Oo ku garan waa

Badda warabka, heesaha waafaqa waxa ka mid ah heestan loo qaado lo'da.Ee lo'da dadka dhaqda ama raacaa ay kaga dhaadhicinayaan lo'du in ay ka fiican tahay geela, ee ah :

Saddex gobanimo
Giiro mooyee
Geelu kulama leh

Gadhoodh googo'an
Oo la galab lulo
Giiro mooyee
Geelu kulama leh

Geeska fidhinkaa
Ee gujada badan
Giiro mooyee
Geelu kulama leh

Saanta gogoshaa
Saanta gibishaa
Ee guryaha taal
Giiro mooyee

Geelu kulama leh

4.7.21.1 Miisaanka Badda Waraabka

Miisaanka Gaarriye

Waa tan oo timi
2 1 2 1 1 (7 shaqal)
Waana teenii
2 1 2 2 (7 shaqal)
Waanay tuban tahay
2 1 1 1 1 1 (7 shaqal)

4.7.22 Badda Dikriga

Baddan aan u bixiyay badda dikrigu waa bad asal ahaan ka soo jeedda Afka Carabiga, waana bad le'eg mid ka mid ah hababka loogu salliyo Nabi Maxamed Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee. Baddan dikriga waxa adeegsan jiray gobanimo doonadii kala gedisanaa ee dalka ka kicinayay gumaystayaahshii xoogga ku haystay, waxaana ka samaysan tuducyo dhiirigalin ah oo lagula hadlayo dadka uu cadawgu dhulkooda qabsaday.
Baddan dikriga waxa la leekaysiiyay salliga Nabiga ee ah

"Allaaluha saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam"

Iyaga oo dadka gobanimo doonka ahi akhriyaya salligaas nabiga ayay odhan jireen

Allaahuma saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam
Dhaqaajiya dhiiga dhallinyaradaay, dhurwaaga dhulkeena ka soo dhiciyaay

Allaahuma saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam
Waaryaa hanti dhawrtay hashaad dhaqanaysay, hareerigay daaqday ragbaa kugu haysta

Allaahuma saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam
Adoo dhimanaaya dhaqaalena haysan, maxaad uga dhuuman ku dhiiro dalkaaga

Allaahuma saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam
Ninkii calankiisa caqaarta ka doortay, calaamo ha fuusho o ciirsi ha waayo
Allaahuma saalli wa saalli calaa, xabiibi Muxamed Calayhi salaam

Heesaha kale ee leh luuqdan waxa ka mid ah Nebi-ammaankan:

Mukhtaar nabigeennu Makuu ku dhashoo
Madiinana mawdki baa ku helee

5.7.29 Badda Dabahuwanta

Badda Dabahuwantu, waa mid ku salaysan hees ay qaadaan haweenku marka ay diiranayaan maydhaxda, haweenku waxa ay xilliga ay maydhaxda guranayaan ku heesaan heestan oo leh luuq gaar ah, oo in badan uu ku soo noqnoqdo erayga 'Dabahuwan", heesta Dabahuwanta oo illaa hadda u muuqata mid leh baddan gaarka u leh, waxa erayadeeda ka mid ah :

Naa laago laago Dabahuwan
Naa laan galool ah Dabahuwan
Oon wali la diiran Dabahuwan
Naa mayla diiran Dabahuwan
Kula diiran mayo Dabahuwan
Anigayska diiran Dabahuwan
O maxaad ku diiran Dabahuwan
Mididayda daabcad Dabahuwan
Daabkaa dillaaci Dabahuwan
O maxad ku diiran Dabahuwan
Gees Goodirkayga Dabahuwan
Wuu kaa gammuurmi Dabahuwan

Maansooyinka raacaya badda dabahuwanta waxa ka mid ah maanso magaceedu yahay Kabacaseeye, oo uu curiyay Abwaan Maxamed

Xaashi Dhamac "Gaarriye". Maansadaas oo ay sadaradeeda ka mid yihiin:

Waa curub abaaday
Waa laan cusayb ah
Oo ciiro fuushay
Curdin weeye qaadhay
Waa cudur jidh yeeshay
Waa baahi cago leh
Waa ciil dadweyne
Canug laga sameeyay

Caynkuu u eegyay
Carrab laguma koobo
Waa caato miiqan
Oo caday ka dhuuban
Waa ciirsi laawe
Waa kabo caseeye
Ceelgaabta jooga

Waa caado goys yar
Ma yaqaan cisaynta
Qofna kama cabsoodo
Waa cadho gadooday

4.7.24 Badda Mooyaha

Badda Mooyuhu waa bad leh qaab dhismeed gaar, oo ay tuducyada ku jira maansooyinkeeduna isu nidaamiyaan hab gaar ah, sidaas daraadeedna noqotay bad magac qaadata, oo gooni u istaagi karta.
Badda mooyeha waxa aan ugu magac daray hees ka mid heesaha la qaado marka mooyeha wax lagu tumayo.Inta badan haweenka ayaa wax ku tumi jiray mooyeha, marka shayga ay haweenku tumayaan uu ku yara adkaado ayay qaadaan heestan ah:

Adagaa adagaa
Adagaa ma birbaa
Ma bidaar odaybaa
Saw ma soo budo duul
Ma bakaar subax baa

Baddan mooyeha waxa halbeeg u noqon kara tuducan:

Hoyaleey hoyaleey.

Tuducyada ku jira badda Mooyuhu waa in ay waafaqaan luuqa tuducaas sare, haddii kale waxa ay noqonayaan qaar laaxin ku jiro, oo ka leexday godkii badda mooyaha. Ugu yaraan hal xaraf-raac oo isku mid ahi waa in uu jiro dhammaan sadarada maansooyinka waafaqa badda mooyeha, haddii kalena waxa ay noqonayaan jacbur.

Mooyeha marka wax lagu tumayo waxa la qaadaa heestan ah

Alla yayla tumaay
Ila taakuliyaay
U tolkay dhalayeey
Alla yayla tumaay

Badda mooyeha waxa waafaqda heestan kale ee ay carruurtu qaado, ee ah:

Abtigaa ma fulaa
Ma faruuryo caddaa

Ma ka fuudka cabbaa

Heesaha waafaqa baddan mooyeha waxa kale oo ka mid ah heesta baroordiiqa ah ee uu sameeyay kuna luuqeeyo Cabdilaahi Maxamed "Qarshe", ee ah:

Wa ayaanba ayaan
Duni aakhir samaan
Nin aroosanayaa
Nina iilgalayaa

Cabdilaahi-Qarshe, waxa uu mar kale sameeyay hees waafaqda badda mooyeha, heestan oo uu sameeyay mar mustacmaradii Ingiriiska ee Soomaaliyeed loo soo beddelay badhasaab ay Soomaalidu u taqaanay Kamkame, waxa uu Cabdilaahi yidhi;

Ka kacaay ka kacaay
Kamkamaa yimiyeey
Kiniyuu gubayeey
Laysku soo korodhyeey

Saxardiid Maxamed Jebiye, ayaa maalintii calansaarka sameeyay hees waafaqda badda mooyeha, heestaas oo ay erayadeeda ka mid ahaayeen:

Somalaay kuligiin
Kulmiyaa la helee
Kadabaa dhaha eey

Maansooyinka ku sargo'an badda mooyeha waxa ka mid ah maansada caanka ah ee magaceeda la yidhaahdo "Indho badan", dadka qaarna ay u yaqaanaan "Ubaxeey Ubaxeey", ee uu allifay Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi". Maansadan oo ay erayadeeda ka mid yihiin

Ubaxeey Ubaxeey
Indho yaab badanaa
Kugu soo ururee
Maxay kaa uriyeen?

Cabdi Cilmi Shide ayaa xilli uu awr ka lumay isna unkay meerisyadan ku sargo'an badda mooyeha:

Waa madooboo qudhoo
Mataanaan ku sidaa
Malkadaan fadhiyaa
Maanta soo celiyeey

4.7.24.1 Miisaanka Badda Mooyaha

Miisaanka Gaarriye
Ubaxeey Ubaxeey
1 1 2 1 1 2 (8 shaqal)
Indho yaab badanaa
1 1 2 1 1 2 (8 shaqal)

4.7.25 Badda Biitada

Badda biitadu waa mid asal ahaan ka soo jeedda, kuna abtirsata ciyaar-maaweeleed ay dhallaanku dheeli jireen waayadii hore, haddana ay dheelaan. Biitada oo ahayd ciyaar leh heeso kala geddisan, oo leh habraacyo kala gooni ah, waxa ay heesahaasi kala gelayaan bado kala duwan oo ka mid ah badaha maansada.

Tusaale ahaan heesta lagu ciyaaro biitada ee ah:

Billo billo
Billa jira
Koodaar
Ka u dheer
E dhexaad
Ka jaboo
Ku jiqsii

Heestaasi waxa ay ka mid noqotay baddii ka mid ahayd badaha maansada ee aynu ku magacawnay " Badda Dhallaanka". Heesta

biitada lagu ciyaaro ee aynu baddan ugu magacdarnay waa heestan ah

Biitooy biito
Biito xariira
Shilinbaa dhuustay
Gafanaa sheegay
Sheelaa macawis.

Heestaasi waa mid leh hab-raac, cabbir iyo luuq gaar ah, sidaas daraadeed heestan iyo maansooyinka kale ee leh hab-raaca ay heestani leedahay waxa ay noqdeen bad gaar ah oo ka tirsan badaha maansada . shaqallada ku jira heestaas Biitadu waa todoba shaqal,

Tuduca Halbeegga u ah Badda Biitada
Meerisyada ku jira badda Biitadu, waxa ay ku sar go'an yihiin tuducan

Hoyaleey hooye

Heesaha ay fannaaniintu ku luuqeeyaan ee leh hab-raaca, iyo luuqda badda biitada waxa ka mid hees ay fannaaniintu ku luuqeeyaan maalmaha ciidda, heestaas oo ay midhaheeda ka mid yihiin baydadkani:

Annaguna ciidnee
Idinkuna ciida
Nabad iyo caano
Aynu ku ciidno

Heesaha kale ee leh habraaca badda Biitada waxa ka mid ah heestan ay dhalaanka ee ah:

Shimbiri qadday
Qaynaanisay
Laf qaadatay

Waxa kale oo leh hab-raaca badda biitada heestan kale ee ah:

Nayshay daylan
Oo daba oogan
Balbalaadhan
Baro ka yeedhis
Banankay daaqdo
Bal an soo eegee
Biitooy biito
Biito xariira

Heesaha kale ee waafaqa badda Biitada waxa ka mid heestan loo qaadi jiray si dhallaanka loogu baro tirooyinka tirsiimo ee Soomaalida, heestaas oo ah:

Koow koobaatay
Laba liibaantay
Saddex saalo bidho
Afar oorajanno
Shani sheekaysay
Lixi laan taagtay
Todobaa talisay
Siddeed ilma Suudi
Sagaal xawxawleh
Toban tira-buuxin

4.7.25.1 Miisaanka Badda Biitada

Miisaanka Gaarriye

Shilinbaa dhuustay
1 1 2 2 1 (7 Shaqal)
Gafanaa sheegay
1 1 2 2 1 (7 Shaqal)
Sheekhaa macawis
2 2 1 1 1 (7 Shaqal)

4.7.26 Badda Geeljiraha

Baddani waxa ay leedahay hab-dhaca iyo luuqda hees loo qaadi jiray wiilasha Geeljireyaasha ah, ee geela la jooga, heestaasi waxa ay leedahay qaab dhismeed gaar ah oo ay kaga geddisan tahay dhamaan maansooyinka kale ee Soomaalida, sidaas daraadeedna waxa ay noqotay bad gaar ah oo ka tirsan badaha Maansada Soomaalida. Heestaas Geeljiruhu waa:

Geel jiroow dhugufloow dhagayso
Geelu kaa cararyee dhagayso
Qaawanaan rooreey dhagayso.

Heestaasi illaa hadda, waa bad madi "kali" ah, oo aan lagu lammaanaynin luuqda iyo habdhaca ay leedahay.

4.7.26.1 Miisaanka Badda Geel-jireha

Miisaanka Gaarriye

Geel jiroow dhugufloow dhagayso
2 1 2 1 1 2 1 2 1 (13)
Geelu kaa cararyee dhagayso
2 1 2 1 1 2 1 2 1 (13)
Qaawanaan rooreey dhagayso
2 1 2 2 2 1 2 1 (13).

4.7.27 Badda Lixleyda

Baddan Lixleydu waa bad dhif iyo naadir ku ah maansada Soomaalida, badda lixleydu waa bad laga yaabo in aanay dad badani u dareemin in ay tahay bad gaar ah oo ka tirsan badaha maansada Soomaaliyeed, sababtoo ah waxa kooban maansooyinka ku aroora badda lixleyda.

Badda lixleydu waa bad ay meerisyada maansooyinkeeda inta badan ku jiraan lix shaqal oo qudha, sidaas daraadeedna waxa ay qaadatay magaca ah “badda lixleyda”.

Maansooyinka tirada yar ee ku abtirsada badda lixleyda waxa ka mid tuducyo ku jira heesta magaceedu yahay “badhbadhaadhnay” ee uu allifay Cali Sugulle “Dun-carbeed”, tuducyada ah badda lixleyda ee ku jira heestaas waxa ka mid ah kuwan:

Waabaa baryay
Arooryo baxsan
Maalin boqran
Badhbadhaadhnay
Gumeysi baaba

Maansooyinka kale ee ku abtirsada badda lixleyda waxa ka mid ah maanso ay samaysay Xamda Xasan Cabdiraxmaan oo ka mid ah ardayda wax ka barata Dugsiga sare ee Al-Jazeera oo ku yaalla magaalada Hargeysa.

Maansadan oo ay Xamda Xasan subax ka akhriday daabuurka ama safka ay ardaydu galaan arooryada hore ayaa dareenkayga aad u soo jiidatay, isla markaasna maskaxdayda ku reebtay dareen gaar ah, sababtoo ah markii koowaad ee aan maqlay maansadan, waxa aan qacdiiba dhaaday in ay maansadaasi leedahay hab-raac iyo luuq gaar ah oo ay kaga geddisan tahay inta badan maansooyinkii aan maqli jiray, markii aan baadhay qaab-dhismeedka maansadaasna waxa ay ka mid noqotay baddan lixleyda.

Maansada ay tirisay Xamda Xasan waxa ka mid ah meerisyadeeda kuwan ka hadlaya aqoonta, ee ah:

Aqoonta barta
Afafka barta
Axdiista dhigta
Salaadda ooga
Astuura jidhka
Udgoone raaca

Arday asluub loo
Amran ahaada
Insha Allaahu
Islaamka tiirsha

Adeeca waalid
Ummoo ha diidin
Adoon kasayn bay
Ku eegayeene

Aqoonta barta
Afafka barta

4.7.27.1 Miisaanka Badda Lixleyda

Miisaanka Gaarriye

Aqoonta barta
1 2 1 1 1 (6 shaqalley)
Axdiista dhigta
1 2 1 1 1 (6 Shaqalley)
Salaadda ooga
1 2 1 2 1 (6 Shaqalley)

4.7.28 Badda Daaqsinta

Badda Daaqsintu waa bad ka mid ah badaha ay ka allifan yihiin maansooyinka ugu tirada yar ee ka allifan bad ka mid ah badaha Soomaalidu. Baddan Daaqsintu waxa ay ku aroortaa oo ay leedahay luuqda, habdhaca iyo qaab-dhismeedka hees ay carruurtu kaga warbixin jireen raacitaanka ay raacaan adhiga, heestaas hormoodka u ah badda daaqsintu waa tan:

Hooyo iyo aabbo
Maanta adhigeeni
Waxan la soo joogay
Buulashii Gorayo
Iyo bankii dacawo

Waxan ka soo qaaday
Laba cad oo qudhuna
Iyo qumbe caloola
Waxan iskaga dhiibay
Laba tukoo sahana
Wuxuu iskaga dhiibay
Inan yar oo uurleh
Oo uur Ogaadeen leh
Oo Allahayoow leh

Baddan Daaqsinta waxa hal-beeg u ah tuducan:

Hooye iyo hooye

Dhamaan meerisyada ku jira maansooyinka ka allifan badda Daaqsintuna waxa ay leeyihiin luuq u dhaw luuqda uu leeyahay tuducaas hal-beegga u ah badda Daaqsintu.

4.7.29 Badda Jiibta

Baddan Jiibtu waa bad ku aroorta hees ka mid heesaha hiddaha iyo dhaqanka ah, kuna salaysan sheeko-dhaqameed caan ahayd, heestan oo leh habdhac gaar ah iyo luuq gooni ahi, waxa ay ka mid noqotay badaha Maansada Soomaaliyeed, heesta hormoodka u ah badda Jiibtu waa tan:

Soddon naaslay jurgunux
Kii la joogay jurgunux
Aabahaana jurgunux
Hooyadaana jurgunux
Adigana jurgunux

Sababta aan baddan loogu bixiyay badda Jiibtu, waa baddan oo leh eray ku soo noqnoqonaya sadaradeeda, eraygaas oo ah “Jurgunux”.

Badda Cawska

Baddan Cawsku waxa ay leegtahay badda jiiftada oo lagu daray laba shaqal, waxaana ku sargo’an heestii la qaadi jiray marka cawska la samaynayo ee ahayd:

Cawskanoow sabool diidoow, hoyal
Waqaan suuqa lagu dhigineey, hoyal
Soddon lagugu baayicineey, hoyal
Yaa sameeyay lagu odhan, hoyal

Baddan waxa le'eg meerisyada heesta calanka Soomaaliya, tuducyadeedana ay ka mid yihiin:

Soomaaliyeey toosoo
Toosoo isku tiirsada eey
Hadba kiina taag-daraneey
Taageera weligiineey

Waxa aan la ooyaayaa
Ilmadu iiga qubnaysaa
Ikhtiyaar nin loo diidoo
La addoonsadaan ahayeey

4. Isbarbardhiga tayada labada miisaan ee Gaarriye iyo Carraale

Bahweynta suugaantu waxa ay ka nasatay dood muddo dheer soo taxnayd oo ahayd kuma ayaa daahfuray miisaanka maansada Soomaaliyeed? Ma Carraale mise Gaarriye?.

Jawaabta su'aashaas waxa la helay 02/12/2008, kadib markii dood garnaqsi ah lagu qabtay magaalada Oslo ee dalka Norway, garina laba nin kama wada qoslisee waxa doodaas natiijadeedi ay noqotay in Abwaan Gaarriye loo aqoonsado daahfuraha miisaanka maansada Soomaaliyeed, kadib markii uu noqday qofkii koowaad ee qoraal mawduucaas ku saabsan soo gaadhsiiya ummada January/1976.

Waxa iyaduna taagan su'aal kale oo iyaduna xamaasaheeda, xiisaheeda, xaraaradeeda iyo xaalkeedaba wadata, una baahan in laga xaajoodo, xog badan loo raadiyo, dad xul ah loo saaro, xaqiiqadeedana la ogaado.

Su'aasha taagani waa labada miisaan ee maansada ee ay soo kala saareen Carraale iyo Gaarriye, midkee tayo badan? Miisaankee ayaynu u aqoonsanaa miisaanka caalamiga ah ee maansada? Miisaankee ayaynu siinaa kaalinta koowaad ee miisaanada maansada?.

Su'aashani waa ay ka kulushahay su'aashii hore ee laga garnaqay, waxaanay u baahan tahay guurti-suugaaneed aad u culus, aqoon badan u leh miisaanka maansada iyo suugaantaba, suugaan-dhaadhi ah, oo arrintan gasha kadibna go'aan ka soo saarta.
Laakiin haddii aan si bilaw ah doodaas ibaha uga furo, labada miisaan ee Gaarriye iyo Carraale kee ayaa muc badan oo shilis, darajada koowaadna qaadan kara ? Jawaabta su'aashaas waxa aan ka eegi doonaa isbarbardhig ku saabsan labada miisaan oo aan ka eegi doono laba dhinac:

4.8.1. Xagga u adeegsiga qaybaha maansada

Miisaanka Gaarriye waxa loo adeegsan karaa ku miisaamida dhamaan qaybaha maansada kala gadisan sida shiribka, guuroowga iwm, taasna waxa caddeeyay Gaarriye markii uu ka qayb galay doodii Oslo, oo halkaas Gaarriye waxa uu miisaankiisa ku saaray tuduc shirib ah.

Laakiin miisaanka Carrale looma adeegsan karo miisaamida qaybo ka tirsan maansada sida Shiribka, taasna waxa caddaynaya shiribka iyo miisaankiisa oo ka maqan buugga Carraale. Marka qodobkan laga hadlayo waxa la dareemi karaa in miisaanka Gaarriye ay adeegsan karaan dhamaan Soomaalidu, halka miisaanka Carraale aan loo adeegsan Karin miisaamida dhamaan maansada qaybaheeda.
Bal eeg tusaalaha aynu shiribka ku miisaamayno miisaanka maansada ee Gaarriye

Markaan ku dilo ii decee, ka diida Buush dadkeygiyow
1 2 1 1 1 2 1 1 1 2 1 2 1 1 1 1 (20 Shaqal)
Taada dayace tayda doon, ka diida Buush dadkeygiyow
2 1 1 1 1 1 1 2 1 2 1 2 1 1 1 1 (19 Shaqal)

Halkaa waxa aad ka arkaysaa in wakhti xaadirkan uu Miisaanka Gaarriye uu ka caalamisan yahay, kana sal balaadhan yahay miisaanka Carraale.

Xagga Miisaamidda Gabayga, Buraanburka, Badda Kebedda

Marka laga hadlo miisaanka Gabayga, Buraanburka, Badda Kebedda, Miisaaka Carraale uu ka waafisan yahay miisaanka Gaarriye, waayo Carraale waxa uu maansooyinka leh tuduca dheer sida gabayga oo kale u kala jebiyaa hojis iyo hooris. Qaybinta gabayga loo qaybiyo Hojis iyo hoorisna waa ta lagu kala garan karo gabyga iyo guuroowga.

Laakiin Gaarriye marka uu miisaamayo gabayga uma qaybiyo hojis iyo hooris, haddii aan gabayga loo qaybin hojis iyo hooris, sidee ayaa lagu kala garan karaa gabayga iyo guuroowga?. Farqiga u dhexeeya gabayga iyo guuroowga waxa aad ka eegtaa qaybaha hore ee buugga.

4.8.2. Xagga dhaxal reebidda

Marka mawduucan laga hadlo, Carraale waxa uu sameeyay cilmi baadhis aad u qoto dheer oo ku saabsan miisaanka maansada, taasna waxa marag ka ah buuga dhamayska tiran ee uu ka qoray miisaanka maansada. Buug suugaaneedka uu Carraale ka qoray maansaduna waa mid aad u dhadhan badan, micne balaadhan, waqti dheer loo huray, la hufay oo la kala haadiyay. Waana buug suugaaneedkii ugu xiisaha badnaa ee aan waligay akhriyo.

Halka uu Gaarriye ka qoray uun maqaalo uu ku daabacay xiddigta October, 1976-kii miisaanka Gaarriye, waayo illaa hadda ma arag buug si waafi ah u qoray miisaanka Gaarriye, laakiin cashar suugaaneedyada uu Gaarriye jeediyo, oo aan aad u dhagaystay, dhuuxay, waa khudbado suugaaneedka ugu xiisaha badan ee ay dhagtaydu jeceshahay in ay maqasho, maskaxdana ka daadagta markaba.

Halkana waxa aad ka dareemaysaa in Carraale uu wakhti badan u huray sidii uu ummada Soomaaliyeed uga tagi lahaa dhaxal qora, Gaarriyena waa fursad u banaan in uu daabaco buug ka hadlaya miisaanka maansada, waana tallaabo ay soo dhawayn lahaayeen dad badan oo suugaanta u dhuun daloolaa.

Laakiin labada miisaanba waa ku sax u adeegsiga qaybaha maansada, cilmigana waxa loo isticmaali karaa dhawr halbeeg oo kala gadisan. Tusaale ahaan heerkulka waxa lagu cabiraa saddex jid oo ay soo kala saareen Celcius, Fahrenhiet, iyo Kelvin, oo ah saddex nin oo saddex hab kala maray, ummadana waxa aan leeyahay waa halkii Abwaan Qaasim e

Qof kastoow midkii kuu macaan, muhato laabtaadu
Iska soo mar waa ku bannaan, marinkad doonaataaye

4.8.3. Isku beddelka Badaha Maansada

Maansooyinku waxa ay leeyihiin qaab dhismeed gaar ah oo lagu kala garan karo, dhismaha gaarka ahna waxa u yeela hadba sida loo nidaamiyo, loo kala horeysiiyo, loona habeeyo erayada ku jira maansadaas. Erayada ku jira maanso haddii la beddelo habka ay u nidaamsan yihiin, ama inyar oo wax ka beddel ah lagu sameeyo, waxa gabi ahaanba is badala godkii/baddii ay maansadaasi ahayd.
Tusaale waxaynu u soo qaadan doonnaa baddii maqasha oo marba waafaqi doonta bad kale oo ka mid ah badaha maansada

Maqaleey warlaay
Ma laguu waramay (badda maqasha)

Maqaleey warlaayeey
Ma laguu waramayeey (jiifto)

Aheey maqaleey warlaay
Aheey ma laguu waramay (Saar, Baarcadde)

Maqaleey war la'eey ah
Cidba maenad waraysan (Geeraar)

Maqaleey warlaay hooye
Ma laguu waramay hooye (Badda Haanta)

Warlaay maqaleey
War maan lagu siin (Badda waraabka)

Maqaleey war la'eey
Ma laguu waramaa (Badda Mooyeha)

Maqaleey warlaayeey miyaan, cidi war kuu keenin (Gabay).

Maansada iyo Madalaha Laga Adeegsado
Maansada Soomaalida waxa laga adeegsadaa madalo kala geddisan, mid kastaana waxa ay leedahay cid iyo meel ay ku habboon tahay. Si aynu u soo koobno, abala-ablayntan abbaartan waxa aynu soo xigan doonnaa kala-saarid hufan oo uu sameeyay **Macallin Axmed-Yaasiin C/Raxmaan** oo ka mid ah bare Afka Soomaaliga iyo Suugaanta ka dhiga mid ka mid ah dugsiyada sare ee ugu caansan Hargeysa oo ah Nuuradiin. Macallin Axmed-Yaasiin, isaga oo kala saariddiisa ku salayna goobaha iyo cidda maansada adeegsata waxa uu maansada u qaybiyay afar jaad oo kala ah:

1. **Maanso Guri:** Waa maanso laga adeegsado guriga, waxaana u badan maansada ay haweenku adeegsadaan sida heesaha haanta, cawska, sabaalada dhallaanka, kebedda, aloolka, buraanburka.

2. **Maanso Gaban:** Noocan maanso waxa adeegsada dhallaanka aan qaangaadhin, waxaana ka mid ah heesaha maqasha lagu raaco, caddaloolka, biito xariirada IWM. Maansooyinka dhallaanka waxa kaalin wayn ku leh hooyada, waayo waa dugsiga kowaad ee ubadku afka iyo asluubtaba ka soo bartaan.

3. **Maanso Geed:** Waa maanso ay adeegsadaan raggu, waayo geedka waxa inta badan ku kulma guurtida, odayada IWM.

Maansooyinkan waxa ka mid ah gabayga, geeraarka, masafada iyo qaar kale oo badan.

4. **Maanso Gole:** Kuwani waa bah maansooyin ah oo laga adeegsado goleyaasha kala duwan ee lagu kulmo sida ka ay kulmaan geel-jiruhu xilliga caweyska ah, ee ay ku ciyaaraan waallada, goleyaasha ay kulmaan barbaartu xilliyada gu'ga ee laga ciyaaro batarka, hirwada, heellada, dhaantada, balwada, wiglada iyo ciyaaraha kale ee la midka ah.

Waa Maxay Heesuhu?

Heesuhu waa nooc ka mid ah maansada Soomaaliyeed waxaana guud ahaan heesha loo qaybiyaa afar qaybood oo kala ah:

(1) **Hees-Hawleedyo** la adeegsado marka la qabanayo shaqooyinka kala gedisan, loona isticmaalo in la isku illawsiiyo daalka iyo tacabka ay hawshu leedahay.
(2) **Hees-Ciyaareedyo** lagu luuqeeyo marka ciyaaraha kala gedisan ee dhaqanka la ciyaarayo.
(3) **Hees-koolkoolineed** lagu sabaaleeyo dhallaanka yar yar, iyo
(4) **Hees-faneedyo** ay ku luuqeeyaan fanaaniintu kuwaas oo u sii kala baxa qaybo dhawr ah. Sida jacayl, waddani, qasaa'id.

5.1. Haddaba heesuhu baddee ayay galaan?

Heesuhu malaha bad gaar ah oo loogu soo hagaago. Badaha maansada intooda badanna waxa jiro heeso laga sameeyay. Tusaaleyaal hadii aan soo qaato waxaan idin tusi doonaa todoba heesood oo laga sameeyay, todoba badood oo kala gedisan kuwaas oo kala ah:

1) **Hees Gabay ah:** sida heestan uu qaado Cawaale Aadan Daheeye

Ayaamaha cisiga lee Ilaah, Caadil barakeeyay
Kuwa khayr ku caanee waxyiga, lagu calaameeyay
Maalin cadho lahayn oo caf iyo, farax la caadaystay
Subax ciid ah adigaa dhashiyo, yawmal carafaade
Ogoow camal samaantaad hablaha, caaro dheer tahaye

Nin waliba midduu dumar calmaday, way cuddoontahaye
Ammaataa haddaan curiyo oon, caawaba asteeyo
Waa xaajo caanoo jacayl, malaha ceebaale
Dabac ii cuntamayiyo gobnimo, caadil kuu dhaliye
Ogoow camal samaantaad hablaha, caaro dheertahaye

2) Hees Geeraar ah:, sida heesta geeraarka ah ee la qaado marka garawga (badarka, hadhuudhka), arabikhida (galleyda) iyo qamadiga lagu tumayo mooyeha**:**

Ma caddee ha caddaado
Caano geel haw ekaado
Culimaa cuni doonta
Iyo caalim wadaad e

Iyo Waliba heesta maalinta iidda ah la qaado, ee ku luuqeeyo Maxamed Saleebaan Tubeec, erayadeedana ay ka mid yihiin:

Alla maanta ayaanta
Iyo iidda wanaagsan
Ilaahii ina siiyay
Isagaa ku abaal leh
Way ahaataye maanta
Si wanaagsan u ciida

3) **Hees Jiifto ah:** sida tan uu sameeyay Cabdi Aadan Xaad "Cabdi-Qays".

Safar baa la baxayaa
Iyo socoto dheeroon
Soo noqod lahaynee
Inna wada sugaayee

Surin waxa la marayaa
Surmi iyo harraad badan
Saa waxa ka daran taa
Halaq micida saydhiyo
Saynlaha libaaxiyo
Abees baa susumayoo

Ninka saaka jecloow
Xilka sahal ha moodine
Dhulkan aan ku soconiyo
Samaduu ka culusyee
Yuu sibiq idinku galin

4) Hees Masafo ah sida

Gumaystaha dhacaayay
Geeridu dhibaysaa

Ninkii dhoof ku yimid bay
Geeridu dhibaysaa

Waqtigii dhamaayoo
Wuu dhaqaaqi dooonaa

5) **Hees Saar ah:** sida tan uu sameeyay ee uu qaado Cismaan Xuseen "Daljir" ee ka waramaysa kaalinta askariga;

Dareenkaygoow askari
Waxaan ahay aan dayicin
Dan guud iyo qaranimada
Dalkiisu ku aaminoo

Anigu ma dugsado qabiil
Midnimaa la igaga daydaa
Dayaay duhur iyo habeen
Dabaylaha roobka iyo
Gantaalaha dariskayaga

Naftaydu ma damaqsatee
Dareenkaygaa ka wayn

Dareenkaygoow askari
Waxaan ahay aan la dagin
Dushaan ka ilaaliyaa
Ammaanka dadwaynahee

Anigu ma gabado dagaal
Halgan baa la igaga daydaa
Difaac iyo dawladnimo

Dayaay waxaan ahay daljire
Distoorkiisiyo sharciga
Inuu magaciisu dumo
Ku doorsaday geeridee

6) **Hees Wiglo ah:** sida tan uu qaado Maxamed Xasan 'Halwad"

Hannaankaaga wanaagsan hadalkaagiyo
Habkaad u dhaqaaqdid waan ka heloo
Ku soo hirtayoo mabaan hakanine

Iyo waliba heestan waanada ah ee Soomaalida uu kula hadlayo Saalim Siciid Saalim ee ah:

Qaarbaa qaxayoo qaxoonti noqdee
Qaarbaa la qaloo la qoorgooyee
Qaarbaa qaday quud la'aan joogee
Qasaare keentay qayrna nooma waddee
Illeen dad qabtaa lagu qaboobaaye
Qiimaheen dhacayee qaranimadi luntaye
Anka qaylino qurbahaynu qubanahay

7) **Hees badda maqasha ah:** sida tan uu sameeyay Maxamed Cumar "Huryo":

Xaaraan cadoon

Cudurdaar lahayn
Lama calaashadee
Ciidda ku simoo

Imakay cuntadu
Cad xalaal ah tee
Cuna cuna cuna
Cabba oo cuna

Soonkoo ciyaar
Cisho kaaga tagay
Wuu culusyahee
Ciida ku simoo

Imakay cuntadu
Cad xalaal ah tee
Cuna cuna cuna
Cabba oo cuna

Iyo waliba heesta Hooyooy macaan ee uu qaado Cabdulaahi Yuusuf Hanuuniye ee ah:

Markan ku arko waan
Ka mafsuudilaa
Murugadan qabee
Hooyooy macaan

Muuqaagu wuu
Iga maydhilaa
Dhibtan soo mare
Hooyooy macaan

Murti iyo ammaan
Baan u marin lahaa
Ma huraankiyeey
Hooyooy macaan

Dadka moog ayaan
U macnayn lahaa
Maalin iyo habeen
Maqashiin lahaa
Hoyooy macaan

Maamo aragtidaa
Waxay ila mid tahay
Anigoo Makiyo
Madiinaba tagoo
Xajki soo mare
Hooyo magan Ilaah
Mar kastaba ahaw

Maamooy dhib baad
Iga soo martee
Miisaan xaqaa
Lama magi karee
Minankaa Janada
Mawle ha ka dhigo Aamiin, Aamiin.

5. Waa kuma Qoraaga Buuggu, Siciid Maxamuud Gahayr (Hargaysaawi)?

Siciid Maxamuud Gahayr, hooyadii waa Hodan Cabdi Cilmi, aabbihiina waa

Maxamuud Gahayr Warfaa 'Kabadheere". Qoraaga buuggan CULUUMTA MAANSADU waxa uu ku dhashay Cusbitaalka guud ee magaalada Hargaysa 27/7/1986. wuxuu waxbarashadiisa malcaamadeed ka bilaabay 1992-kii Camp Abokor oo ku taalla Bariga Itoobiya, ahaydna goob dad badan oo ka barabaxay magaalada Hargaysa qaxoontinimo ku tageen 1988-kii markii dagaaladu ka qarxeen gudaha dalka , waxaanu isla Kam Abokor ku bilaabay wax barashadiisa Dugsiga Hoose Sanadkii 1993kii, kadibna wuxuu u soo wareegay Hargaysa 1997kii, isla sanadkaa waxa uu ku biiray Dugisga Hoose/Dhexe ee Sh Cali Cismaan(Ex Reece) halkaas oo uu dhamaystiray aqoontii dugsiga dhexe sanadkii 2001,

Waxbarashada dugsiga sare waxa uu Siciid ku dhamaystay dugsiga sare ee Maxamuud Axmed Cali oo uu ka qalin jabiyay sanadkii 2005 isaga oo markiiba masuul ka noqday maktbadda wax akhriska ee iskuulkaas, kana mid ahaa ardaydii u sarraysay dugsigiisa sannadkaas 2005.

Sanadkii 2006 wuxuu ka mid noqday Macalimiinta Dugsiyada sare ee Maxamuud Axmed Cali iyo Gaandi waxa uu isla xilligaas xoog-haye guud ka noqday , ururka ilaalinta deegaanka soomaaliland (Somaliland Environmental Protection Organization) oo loo soo gaabiyo SEPO .

badhtamihii 2007, waxa uu safar waxbarasho ku tagay dalka Pakistan, Waxa uu Pakistan ka bartay Diploma ah Human Resource Management,2008 waxa uu kusoo laabtay Somaliland, Jaamacada Hargaysa ayuu Degree Business Administration ka diyaariyay, gaar ahaan management, isaga oo Jaamacadda Hargeysa dhammeeyay sannadka 2011-ka.

Ka sekow Siciid Maxamuud Gahayr waa Abwaan curiyay maansooyin kala duwan, waxa uu curinta Gabayga ka dhaxlay Aabbihii oo abwaan ahaa iyo Hooyadii oo alifta maansada, waxaana la odhan karaa "wuxuu ku abtirsadaa qoys ab iyo isir ku leh suugaanata curinteeda". Siciid markii koowaad ee uu allifay maanso waxa ay ahayd sanadkii 2001-da, suugaantiisuna waxa ay hanaqaadka u ballaadhan samaysay sanadkii 2005, sanadahan u dambeeyay ee 2007, 2008, iyo 2009-na, waxa uu Siciid kaalmaha hore ee koowaad iyo labaadba ka galay tartan suugaaneedyo lagu qabtay Hargeysa iyo Pakistan.

Sidoo kale Siciid waa macallin wax ka dhiga dugsiyada sare ee Hargeysa, isaga oo wax ka dhigay Gaandi, Al-Jazeera, Salaama, British,, Caalami iyo National oo dhamaantood ah dugsiyo sare oo ku yaalla Hargeysa. Imakana waxa uu wax ka dhigaa dugsiyada sare Nuuradiin, Maxamuud Axmed Cali iyo Sheekh Ibraahim Sheekh Yuusuf (Ex Gacan-Libaax) . Qoraaga buuggani waxa uu ku noolyahay magaalada Hargeysa, waxaanu leeyahay hal xaas oo ah Marwo Muuna Cabdi Suldaan Yuusuf Suldaan XirsiQani. Buugaagta kale ee uu gacanta ku hayo qoraagu waxa ka mid ah Quraanka, Hal-diiq oo ku saabsan maansada Macallin Maxamed Jaamac Cabdi (Gaaxnuug) Sayniska iyo Samo-talis "Talo-nabadeedka iyo Taariikhda Xaaji Cabdi-Waraabe".

Qoraagu waxa uu guddoomiye ahaa Akadamiga Waxbarashada iyo Cilm-baadhista oo soo saaray buuggan, sidoo kale waxa uu noqday xoghayaha maaliyadda Ururka Hal-abuurka Somaliland, xubinna waxa uu ka yahay Ururka Gaaroodi.

Cabdirisaaq Cabdilaahi Aadan
Guddoomiyeha Ururka SURE

6. Raad-Raaca Buugga (Bibliography)

1.Aqoon is weydaarsi ka dhacay Hargeysa 09/Jan/2006-16/Jan/2006, oo ku saabsanaa suugaanta iyo afka Soomaaliga, aqoon is waydaarsigan waxa daadihinayay Cabdirisaaq Axmed Geeddi "Aakhiro"
2. Buugga "Xiddigaha Maansada" ee uu qoray Cabdiqaadir Nuur Xuseen 'Maax".
3. Buugga "Hilimada Maansadii hore ee Soomaalida". ee uu qoray Aw Jaamac Cumar Ciise
4. Casharo suugaaneedyo uu Jaamacada Hargeysa noogu dhigay Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", warbaahinta gaar ahaan BBC-da aan ka dhagaystay.
5. Buugga "Miisaanka Maansada Soomaalida" ee uu qoray Cabdilaahi Diiriye Guuleed Carraale
6.Buugga "Halqabsi", ee laga qoray Maansada Maxamed Cali Cartan "Hal-Deeq".
7.Barnaamij-Suugaaneed laga baahiyay idaacadda Radio Hargeysa, oo uu daadihinayay Muuse Cali Faruur.
8. Gabayo qoraal ah oo aan ka helay Muxumed Cali Masmas.
9. Buugga "Nabadshe", ee uu Qoray Yaasiin Jaamac Nuux "Suldaan", ahna maansada Yuusuf Cismaan Cabdulle "Shaacir" iyo milicsi suugaaneed.
10. Qoraal suugaaneed iyo Miisaanka Maansada ee Gaarriye aan ka helay Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo iyo buugga "Mahadhada iyo Waxqabadka Gaarriye" oo uu qoray isla Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo.
11. Mareegaha internetka ee www.hoygasuugaanta.com, www.togaherer.com, www.aftahan.org , www.farshaxan.com, www.doollo.com, www.afmaal.com , www.hadhwanaagnews.com, www.wardheernews.com www.red-seaonline.com , wargeyska Saxansaxo, wargeyska Ogaal, iyo wargeyska Haatuf.
12.Wareysiyo aan la yeeshay Abwaan Axmed Aw Geeddi "Dheeraad", Suxufi Xasan Maxamed Yuusuf, Suxufi Maxamed Xasan Cali 'Waji", Maxamed Cali-Iid, Suxufi/Abwaan Sidiiq Muxumed Burmad, Abwaan C/Waaxid Cali Gamadiid, MacallinC/Risaaq Maxamed Guuleed, Abwaan Maxamed Saleebaan Cumar.
13. Buugga "Diiwaanka Qosolka", ee uu qoray Jamaal Cali Xuseen.
14. Buugga "Nabaadiino" ee uu qoray Xasan Cabdi Madar.

15. Buuggii “Fasalka 1aad ee dugsiga Sare”, ee manhajkii Wasaarada waxbarasashada Soomaaliya.
16. Aqoon-suugaaneed aan ka helay Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame “Hadraawi”.